FIILOFOOBIYA

AADAN KHADAR CALI

(AADAN-SAHAN)



Xuquuqda ©
Aadan-sahan
2024

Xuquuqda oo dhan way dhowran tahay. Buuggan ama qayb ka mid ah lama daabaci karo, la'aanta oggolaansho qoran oo laga helo qoraaga.

Copyright ©2024 Aadan-sahan All rights reserved. No part of this publication may.be reproduced,stored in any retrieval system, or transmitted in any form or by any means,including

photocopying, recording, or other electronic or mechanical

methods, without theprior written permission of the author.

Daabacaaddii laad,2024 Hargeysa
Qalinmaal
Publishing.
Qaabaynta jeldiga: Asad Aadan Cismaan Tel:+252-63
3333755
qalinmaalpublishing@gmail.com

Mararka qaar dhadhanka aad ka helayso in aad fahanto fekradaad 20meeyo sano si khaldan u sidatay ayaa kun jeer ka macaan ka aad ka helaysay fekraddaas mar kasta oo aad ku dhaqanto.

1

-“Maxaad ii weydiisay taas?!"

-“In aan adiga kaa maqlo iyada oo kooban oo kaalingal ah ayaan rabaa.”

-"Haddii aad sidan igu sii waddo faylasoof ayaad iga dhigaysaa!"

- “ Maxaa ka wanaagsan in aad noqoto faylasoofkayga. Markaas wax kasta oo aanfalo oo aan hore loo fahmayn in aad fahanto ayaad isku deyaysaa,annagana noloshayaduba waa halxidhaalayaal in la fahmo oo la furfuro u baahan.Waa sababta marka aad sida saxda ah ujeedkayaga u fahmi weydaan xataa beenaha maanqaboojiska ah ee aad nagu maaweelisaan aannu niyadda ugu xasilinno, idinkuna aad ugu malaysaan in ay doqonniimo naga tahay ee aad noo tidhaahdaan 'waa carruur cag weyn'. Mar ayaan is'idhaahdaa falsafadda la sheegaba waxa sameeyay nin gabadh in uu fahmo isku deyay. Ama falsafadda la sheegaba waxa aad mooddaa in loo sameeyay in annaga nalagu maaweeliyo, ka dibna ay xadhkaha goosatay oo heerkaas ay maanta marayso.”

-"Malaha ninkuba isla marka uu wax jeclaado ayuu faylasoof noqdaa!”

-“Iyo weliba hal'aabuur midho curiya, ma garanayo sababta ay suugaantu dhadhanka gaarka ah u samayso marka uu qofku caadifadoodo'e.”

-“Dee fanku waa luuqadda ruuxda. Sidaas ayay suugaantu dhadhan gaar ah u samaysaa marka la caadifad-hadlayo."- “ Haddaba iiga jawaab su'aashayda.”

-“Awal maxay ahayad gacaliso?!"

-“Isdhaafinta intaas le'eg in badan ayaad ku caanamaashay ee markan kaa yeeli maayo!"

-“Marka aan muuqaaga arko ayaan mahadinta Ilaahay iyo ku-murqaankaaga mooyaane wax walba hilmaamayaa."Inta ay indho-laabasho dumarnimo isla dadabtay oo khajilaad yari ay quruxdeedi qurux ugu sii dartay ayay ku tidhi:“gacalle;goorma ayuu jacaylku jacayl dhab ah noqdaa?!"

-"Marka horeba Idiley jacayl iyo dheeli meel ma wada galaan,ee haddii u jacayl jiro wuu jiraa, marin qumman ha loo maro ama mid maroora'e,laakiin haddii meesha ay dheel iyo ciyaar-ciyaari timaaddo jacyl kama jiro, ee ama xiise aan sii ridnayn ayaa yaalla, ama dano kale ayaa loogu gabbanayaa jacaylka!”

- “ Kaama lug baxayo'e aan si kale u dhigo su'aasha'e,goorma ayuu noqdaa jacaylku mid aad sidi saxda ahayd ula nooshahay,ama marinkii qummanaa haya?”

- “ Marka qalbigaaguna uu doonayo qofkaas,

-

caqligaaguna uu ku qanacsan yahay.”

-“Iima aanu dhicin macnuhu!"

Afar gu' oo cir Alle ka dhashay, se intii ay tirsamayeen aan la dhaaddanayn ayuu maanta ka joogaa.Muhashada kashiisa,meehannawga maankiisa, iyo sida ay noloshu isagaga murugtay sidi dunta oo kale ayuu ka ledi la'yahay.

Haabhaabay oo hareeraha eeg, hummaaggeedii iyo higilkeedi midina aaggan kama dhowa. Isgaray in uu nayaayir iyo naawilaad dhex dabbaalanayay. Mararka qaar xataa xusuusaha ayaa samirsiis noqda.

Maxaa horta xusuusaha mar walba kaalinta xun uun l00 geeyaa?

Maxaa loogu arkaa cadaab iyo hagardaamo in ay yihiin?

Muxuu qofku u jeclaystaa ruuxi uu soo caashaqay ee ay iswaayeen in uu illaawo?

Xusuustu marar badan miyaanay sidan Deeq oo kale samirsiis ahayn? Niyad'dhis ahayn? Oo aanay laab-qaboojin ahayn?

Imtixaan kasta oo nolosha ku soo waajaha, adiga oo dhammina dhan ayaad ka wada jeeddaa, imtixaankaasina dhanka kale, ruuxdaada,qalbigaaga iyo garaadkagana waad ugu babbac dhigaysaa, laakiin imtixaanka jacaylka adiga ayaa isla gelaya, qalbigaaga iyo caqligaaga ayuu dagaal ka dhex oogsanayaa oo qof isagii isdilaya, haddana isbadbaadinaya ayaad noqonaysaa haddii uu marinka jacaylkaagaasi qummanaan waayo.

Muddo saddex bilood ku dhow waxa uu la nool yahay xasuus...xasuusteeda. Raq iyo ruux toona meel kuma sheego. Jaan iyo cidhib meel ay dhigtay ma hayo. In kasta oo la yidhi dunidii hal qol ayaa la iskaga dhigay oo isgaadhsiina ayaa suuragelisay, isaga waxa ay u noqotay Qarniyadii Dhexe iyo waayihii xajka dhawrka bilood loo sii sadcaali jiray. Qof kasta oo uu ku tuhmayay wuu warawareeyay oo si dadban iyo si daahir ahba wuu u weydiiyay, laakiin cidina kama aanay shaafiyin weydiinta garaadkiisa raafka ku qodaysa.Mararka qaar in aad ilbidhiqsina Alle ha ka yeelo'e soo xasuusto wakhti qurxoon oo

gacalle aad jeclayd aad la qaadatay, erayo nafta u roon oo aad wadaagteen, iyo ficillo muhasho abuura oo aad wada samayseen,ayaa ku filan in maalin dhan oo jawigu uu kaa qasnaa ay kuu toosiyaan.

Sidaas si la mid ah, eray si dheeldheel ah afkaaga uga soo fakaday iyo fal aadan ku talo galsanayn ama aad u badheedhayba oo aadan wax weyn u arkayn ayaa qof noloshiisa oo dhanba burburkeeda horseedi kara, ama kaalin libaax ka qaadan kara niyadjabkiisa.

Sidaa awgeed ayuu Deeq Maxamed ugu dhegganaa xeer ka mid ah qaacidooyinka noloshiisa ee uu ka duulo oo ah, haddii aadan qofka qalbigiisa xasuus wanaagsan kaga tegi karayn, ugu yaraan mid xun uun bal ha kaga tegin. Dhaawac aan dhaymo lahayn oo dhiigbixiisu aanu cimrigiisa oo dhan ka joogsanin ha kaga tegin. Noqo qof marka muuqiisa la arko ama magiciisa la maqlo, amaba hummaaggiisu uu maanka ku soo dhaco wanaag lagu sidko oo kasha laga jeclaysto,wejiga qofkaasna dhoollacaddayn ku xardha, oo ha noqon qof indhihiisu in ay dhabannadiisa rusheeyaan u horseeda.

Si kasta oo uu isugu dayo in uu erayo ku cabbiro Idil, wuu ka waayay qaamuuska afafka iyo suuraysigaba, iyada ayuun baana awoodda in ay indhihiisa ka akhrisato waxa ay laabtiisu u qarinayso.

Wuu hubaa in aanu Idil wax duraya daa'in abidkii u geysan. In kolka uu xiskeeda ku soo dhaco aanay ka qoomamaynayn wakhtigii ay la SOo qaadatay. In uu si walba ugu roonaa. Haddana waxa uu isweydiinayaa,*maxaa dbacay?!*

Xaggee ayay salaaddu ka xidbmi la'dabay?!

Xaggee ayay sartu ka qudbunsan tabay?!

Waan bubaa oo laf toobin kuma aanan baynine wax dbab ab oo dban walba laga bubo ayaannu wadnaye, socdaalkayagii nololeed sakasban uu galay maxay tabay?!

Aaway Idisbaydii?!

Xataa su'aasha aadan jawaabta u hayni marar badan ayay noqotaa niyadkaab aad nafta ku maaweeliso oo marba inta aad wax suuraysato aad dhinac kale la aaddo!

Deeq:Haddi aan ku idhaahdo qalbigayga keligaa ayaad ku tahay been ku leeyahayba,marka aan dhabta kuu abbarana kaalmaha ugu sarreeya ayaad kaga jirtaa.

Lammaane kasta oo isjeclaadaa way awoodaan Idiley in ay gacmaha isqabsadaan, in ay weedho dhadhan iyo dhosog leh isugu niyadqaboojiyaan,kulan diran oo dardargelin lehna ay wada qaataan,balsewaxa la isku dhaafay ee lammaanayaasha jacaylladoodu ay isdheer yihiin waa mugga dhabnimadooda. Waa mugga uu jacaylka ay isu hayaan xaqiiqo yahay. Waa mugga uu kulankoodu yahay mid uu qalbi qalbila kulmay, ruuxina ay ruux la caweysay, in ka badan inta uu jidh jidh kale la kulmayo ee uu hunguraynayo. Waa hadba inta ay qofkaas ka dhab tahay waxa uu ka kale ku odhanayo, ama ka kale uu u samaynayo,amaba uu ka ag samaynayaa. Waa mugga ay isfahansan yihiin,noloshana ay isla fahansan yihiin.

Badanaa Idiley inta eray dhab ah oo ka turjumaya jacaylka aan kuu hayaa mugga uu le'eg yahay aan ku idhi ee aad ka didday (sastay) sida aan kuugu sheegay!

Waxa aan ku idhi Idiley; waan ku jeclahay, laakiin adduunka adiga kuuguma jeceli ee geyaanka ayaan adiga kuugu jecelahay!Waxa aan ku idhi; waan ku jeclahay, laakiin dartaa u dhiman maayo,cunnada iyo cabbistana u deyn maayo, hurdada iyo hadhkana uga haajiri maayo,oo sida aad adigu xaqa iyo xuquuqda iigu leedahay ayay naftayduna xaq iyo xuquuq iigu leedahay!

Waxa aan ku idhi; daraaddaa ehel iyo asxaab midna ugama go'ayo,oo sida aad iiga mudan tahay in aanan ku dayicin oo danayntaada aanan dhimin ayay iyaguna iiga mudan yihiin in aan u daneeyo oo aanan dayicin,cid walbana in aan xaqeeda siiyo ayaa waajibkayga ah.

Waxa aan ku idhi; kuma cabbirayo jacaylka aan kuu qabo waalid-caasinimo aan dhaleeyaday ku gacan saydho,

qaraabagoysnimo aan tolkay duleeddada ka meero,iyo dad-kago'midna. Haddii aan maanta

riximkayga dartaa u gooyo adigana berri arrimo kale oo igalakaa mudnaanaya ayaan dartood kuu goynayaa!

Waxa aan ku idhi; ma tihid ta adduunka ugu quruxda badan, laakiin waxa aad tahay ta indhahayga marka lagu eegayo ugu sidata,illeen ninba ta uu ka helo ayuu hablaha hodan ku sheegaaye.

Waxa aan ku idhi; ma tihid boqoradda adduunka, laakiin waxa aad tahay aniga boqoraddayda,boqoradda caalamkayga,boqorad ii talisana ma tihid ee boqorad karaamayn iyo weyneyn iga mudan ayaad tahay.

Kuma odhanayo waxa aad qalbigayga ku tahay keli oo haween kale isma sheeganno, se adigu waxa aad tahay seeskii hannaanka la-dhaqanka haweenka, inta kalena waa saqafkii. Waxa aan leeyahay ehel iyo asxaab hiil iyo hoo, hawl iyo hawraarba in ay ila wadaagaan doonaya,lab iyo dheddigna way leeyiiin,adiguna waxa aad tahay ta ugu mudan haweenkaas ee seeska u ah hayaanka noloshayda, iyaguna waa saqafkii dhammaystirayay.

Waxa aan ku idhi; ma tihid gabadha ugu qurxoon ee aan la kulmay,ugu sharafta badan ee aan l dhaqmay, ugu xishoodka badan ee aan bartay,ugu dadnimada wanaagsan ee aan sheeko ku maqlay, uguna edboon ee aan shaahid ku arkay, haddana waxa aad tahay ta keliya ee aan intaasba ka dhex xushay ee laabta aan u culay. In aadan ahayn ta dhan walba ugu sidatana macneheedu ma aha in aad dhan walba ka liidato,ee waa in wixii aad tahayba lagaa sii yahay, aniguna sida aad tahay aan kugu doortay.Dabciyadaada san iyo kuwaaga silloonba waan kugu jeclaaday oo aan kugu qaatay, aniga oo ku qanacsan qaybtaada xun iyo qaybtaada sanna boggayga ayaan burcad kuu mariyay.

Waxa aan ku idhi; kuuma samaynayo ballanqaadyo **daarran** aayeheenna danbe, oo wakhtiga iyo waayuhu hadba wejiga ay yeelanayaan innagu ma maaraynno, xilli walbana waxa aan kuula dhaqmayaa sida ugu habboon ee qalbi qof uu maalin uun jacayl u qaaday uu ula dhaqmo, xilli kastana xaalkiisa ayaan kugula falgelayaa.Cindigayga kama baxaysid, cadaw kaagama tegayo, cidlana kaagama dhaqaaqayo. Se wax ballanqaad ah oo aayaha aan iman ah kuu sii qaadi maayo,adigana kaama sugayo.

Waxa aan ku idhi;kuma jeclaanayo heerka aad ila joogto in ka badan oo haddii aynnu iscalfan weynno kama soo kabanayo, kumana

jeclaanayo mudnaanta aad agtayda ku leedahay meeqaam ka lita oo hoos kuumna dhigayo, murtida iyo macnaha aad noloshayda u leedahayna marnaba dhuldhigi mayo.Sababtana waan kuugu daray si aanu hadal waa margiye kuugu qalloocanin oo,Idiley;jacaylku waa sidi shinbir aad gacanta ku hayso, haddi aad si xooggan u qabato oo aad gacanta ku xejiso adiguna waad isdalinaysaa isagana waad dilaysaa,haddi aad si debecsan u qabato oo aad danayn dheeri ah siin weydidna wuu kaa faramudhuxsanayaa oo wuu firdhanayaa, mar walbana waa in aad gacan xannaano oo aadan ku xejin, kana debcin ku haysaa.Waxa aan ku idhi; isma kaa siinayo, iskuma kaa dirqiyayo, meel aadan ila jooginna agtayda kaama geynayo,kaalin aadan iga mutaysanna kuma gaadhsiinayo, si haddii maalin uun ay xumaani ina dhex marto aanan maqaam aadan mudnayn hoos kuugu dhaadhicin,maamuuskaagana aanan dhusinka hoose u galin, bahdil aan kuu qalminna aanan kuugu samayn. Haddii aanan maanta caddaali noqon oo meeqaamkaaga aanan kugu maamuusin berrina caddaali ma noqonayo haddiiba xisaabuhu sida aynnu u wadno ay isugu fadhiisan waayaan oo cagta ayaan ku hoos gelinayaa.

Waxa aan ku idhi; weligay kuma aanan odhan 'dartaa waan u dhimanayaa', oo waayuhu waxa ay i bareen badiba waxa afka laga sheegto in samayntoodu ay adkaato, waxa la sameeyana in aan loo baahanayn in afka laga sheegto. In aan ku ilaaliyaa waa waajibkayga ee ma aha arrin aan faan ka dhiganayo.Waxa aan ku idhi; adduunkani waa la-helaa-lawaayaa,ilbidhiqsiyada soo aaddani si ay kuugu iman Alle ayaa og, sidaas awgeed; marnaba jacaylka aan kuu qabo buuxin maayo oo heerka ugu sarreeya gaadhiin maayo illeen wax kasta oo dhammasytirmaba dhinnaanshiinyohooda ayaa bilaabma'e. Mar kasta waxa aan kuu jeclaanayaa si dhexdhexaad ah oo aan xiska ku hayo in aad tahay la-helaala-waayaa,maalinka aynnu iscalfannana ciidanka keliya ee aan nolosha ugu dagaalka gelayo ayaad ii noqonaysaa, anna askarigaaga dlhib walba kaaga gudban ayaan kuu noqonayaa.

Waxa aan ku idhi; ma tihid caalamkayga oo dhan, se waxa aad ka mid tahay himilooyinka ugu qurxoon adduunkayga.

Ma tihid noloshayda oo dhan, se waxa aad tahay xisaabaha ugu mudan ee ay

noloshaydu ka shidaal qaadato. Isle'egta noloshayda ayaad tahay.Keligaa uun kaama fekero ee cid kasta oo xaq igu leh, wax kasta 00noloshayda daarran,iyo danahayga ayaan sidoo kale ka fekeraa,se waxa aad tahay cidaha ugu mudan ee aan fekradahayga badanka ka maqnaanin,go'aamadaydana aan ku saleeyo.

Waxa aan ku idhi; haddii aad maalin maalmaha ka mid ah igu tidhaahdo 'waan ku deynayaa oo waan kaa tegayaa'-dhab iyo dheel ka ay doontaba ha kaa ahaato'e-hore ayaan kuu sii macasalaamaynayaa,oo waxa jira wax aan qiyaas iyo halbeeg lahayn, qüimayn iyo tilmaan lahayn, tibaax iyo odhaahna aan lagu koobayn, dheel in lagu waxyeelleeyo daaye dhab in lagu waxyeelleeyana aan dhimasho ka xigo.Waa magacyo-badan oo waa karaamo, sharaf, cisi, anafo, islawveyni,qab,iyo islahansarreyn.Dhab in lagu waxyeelleeyo ma oggoli dheel in lagu duro daaye. Jacaylka aan karaamadayda dhaafsiisanayaa cad iga maqan ha ahaado. Cisaynta naftayda ayaa kaalinta koowaad iigu jirta,sida aanan u oggolayn naftaydu in ay ku kacdo quudhsi adiga iyo cid kale toona ka dhan ah, ayaanan u oggolayn sinnaba in iyadana meeqaamkeedaa loo liido. Ogow Idiley;haddii aanan naftayda weyneyn oo jacaylka koowaad iyo cisaynta koowaadba aanan siinin in aanan adigana kaalintaas ku gelinayn, haddiiba aan isku dayana aad muddo kooban uun ku jirayso.

Waxa aan ku idhi; inta nolosheenna ka hadhay ma noqonaynno dad faraxsan, xataa haddii aynnu isguursanno ma noqonaynno dad badhaadhe ku dekeeya! Indhaha ayaad igu gubtay! Haddana waan kuu sii faahfaahiyay oo waxa aan kugu idhi; adduunyo waa kala-dhiman oo waa kala-dhantaalan, marka aad tidhaahdo dhammaatayba in ayaa dhinmaysa, maalinba far ayaa maydh la', dhib iyo dheef dhexdoodna way ka dhisan tahay, wayna sagaalaysaa ee ma tobnayso. Haddii aadan ku sii xisaabtamin mugga dheefta aad ka helaysid iyo mugga dhibta aad kala kulmnaysaa in ay isle'eg yihiin goor aadan iska filayn ayay nabar oofwareen ah kugu halgaadaysaa. Sidaas awgeed; waa in aynnu ku xisaabtannaa in aynnu kadeed iyo koolkoolinba mudanaynno. Haddii se aynnu badhaadhe badhaxtiran beerka ka sii jeclaysanno marka ay noloshu inagu

hamaansataba haadaan ayaynnu ku hoobanaynnaa oo waynnu hanjabaynnaa.

Hadalladani laga yaabaa in aanay ku habboonayn kalfadhiga jacay iyo kulanka lammaane ee u baahan gacaltooyada iyo xallad in loo yeelo,balse wa kuwa dhabta ah ee ay tahay inaynnu ku biyo cabno.Waa kuwa kamakacdada ah ee ay tahay in aynnu ku xisaabtanno.Ma og tahay Idiley jacaylka in uu isfahanku ka horreeyo, isfahanku udubxoog uu u yahay, isfahanku uu gundhig, sal iyo sees u yahay,jacaylka laguu sheegayana qaybtiisa ugu weyni ay tahay isfahan. Laba waxa ay isku fahmaan khayaaliga iyo hadallada macaan ee malabka dhiiqaya,hoostana moqorka (daloolka) madhan ee aan xaqiiqada xagna ula tallaabsanayn ka ah,jacaylkooduna waxa uu noqdaa mid garaadkii lagu kasi lahaa caynaddiisa iyogarashadi lagu halbeegi lahaa jiraalkiisu ay cirka ku faruur xidhan yihiin oo khayaal iyo mala'awaal ah,haddii uu maalin uun xagaldaacana aan cilinkiisa la saarayn illeen laba qof oo biyaha badda sawir farshaxan ah ku nashqadaynayay weeyaane.Labana waxa ay isku fahmaan biyo-kamadhibcaanka iyo hadalka kiisa run-kama-raysta ah, waaqica iyo waayohoodana way la tallaabsadaan oo han taabbagal ah iyo himilo run ku salaysan ayay wada dhistaan,jacaylka dhabta ah ee lagu taamayana kuwaas ayuun baa dhadhamiya.

Qalbigu waa caadifi Idiley, oo waa ka doonaya in uu maqlo hadallada macmacaan ee dhadhamaya been iyo bugba ha ahaadeen'e,caqliguna waa garaadyahan oo waa ka saxa iyo khaladka kala saaraya,runta iyo beentana kala shaandhaynaya, xaqiiqadana aqbalaya si kasta oo ay u qadhaadhahayba.Qalbigu waa ka hadda kuu sheegaya in qaabkan aan u hadlayaa aanu ahayn qab qalbi jacayllani uu u hadlo, erayadan maqalkooduna aanu roonayn.Caqliguna waa ka kuu sheegaya qaabkani in uu yahay ka saxda ah ee ay tahay in nolosha lagu saleeyo ee aad hadalkaygaas ugu qancayso si kasta oo aad u dhibsanaysaba. Marka uu caqligu qanco ee uu qofkaas ku aqbalo sida uu yahay isaga oo aan daba-ka-werwer ka qabin,qalbiguna uu qofkaas doono ee uu1 ku raalli noqdo sida uu yahay isaga oo aan ka labalabaynayn, markaas ayuun buu jacayl dhab ahi imanayaa.

Hadda mar kale ayaan kaaga jawaabayaa weydiintaadii Idiley.Jacaylka dhabta ahi waa marka qalbigaaguna uu doonayo qofkaas,caqligaaguna uu ku qanco.

Idil: "waa goorma haddaba marka caqliga iyo qalbiguba ay qancayaan?!”

Deeq:"waa marka qofkaas qodob kasta oo noloshiinna daarran aad faallaysaan ee aad ka dooddaan, ka diba aad fekrad kaga midawdaan iyada oo aanu midina caadifaddiisa xagjir ku noqonayn ee aad xaqiiqada aqbalaysaan,haddii aad ku midoobi kari weydaanna aad isku aqbashaan kala-duwanaanshaha. Idiley; midnimadu ma aha waxa lagu kala duwan yahay oo laga takhaluso, ka dibna la isu ekaado, ee waa waxa lagu kala-taggan yahay oo la isku aqbalo. Waa marka aadan qofkaas agtiisa haybad iyo ixtiraam ku dhawranayn ee aad ula dhaqmayso sidii qayb kaa mid ah, sidii adiga oo isla sheekaysanaya, sidii adiga oo qolkaagii oo hoosta kaaga xidhan jooga oo kale. Waa marka erayada aad odhan rabto aadan ka werwerayn in uu si khaldan u fahmo, ama hadal nin si u yidhi nin si u qaadaye ay duraan, ee aad og tahay xataa haddii aad erayo kala qubanaya ku qarawdo in uu isagu qaabaynayo oo hadal qiimo leh uu ka dhigayo. Waa marka aadan tuhun ka qabin erayadiisa iyo ficilladiisa ee aadan u arkayn in uu iska kaa dhaadhicinayo ama uu iska kaa gadayo, ee aad og tahay waxa uu dartaa u samaynayaa in ay qalbigiisa ka soo go'een, adiguna aad tabtaas isaga ula dhaqmayso.Markaas ayuu jacaylku gaadhay heer lagu tilmaami karo jacayl rasmi ah.”

Idil:"haddaba waxaas oo dhammi sidee ayay ku dhacayaan oo qofkaas aad sidaas oo dhan uga boganaysaa?"

Deeq: “ su'aashaas cid kaaga jawaabi kartaa ma jirto ee waxyaabaha idin dhex maraya ayuun baad qodobbadaas oo dhan ka akhrisan kartaa,waana adiga iyo fiiradaa."

Wada-sheekaysigoodaas ayaa hillaac biligtii maankiisa ku mushaaxay.

Wax uu gocanayo ama uu ka qoomamaynayo00iyada 00 gudboon in uu sheego uu ka aamusay ma aanay jirin.Weedhihiisaasi waxa ay ka mid ahaayeen kuwa ugu kakan ee gabadh ku jecel adiguna aad jeceshahay oo indho kugu dhaygagsan galka kaaga soo saartay adiga oo hor fadhiya lagu yidhaahdo.

Way ahayd in uu intaas u sheego maadaama uu aamisanaa,kamana aanu gabban,iminkana ma gocanayo oo gabadh garasho leh ayay ahayd.

Marar badan inta aynnu ka qoomamaynno erayo aynnu nidhi tagtadii in la mid ah ayaynnu ka qoomamaynnaa marar ay ahayd in aynnu hadallo oo aynnu aamusnay. Laakiin weli wuu isweydiinayaa:"aaway Idishaydii?!"

Waayo?!

Intaas oo dhan ka dib ma ka suurtoobaysay in uu sidan samaynayaa?!

Wax walba wuu ii ahaa.

Wehel iyo wadeey (saaxiib) ayuu ii ahaa, maantana waageeni (ajnebi)aanan wejigiisa arki karin ayuu iga yahay!Waan ogaa oo waxani hore uguma aanay qarsoonayn ee ma gadaal ayuu kala soo baxay tolow?!

Nin adduunyo joogow maxaa aragti kuu laaban! Maxaa loola yaabayaa ninkii yidhi: "cimrigaaga oo raagay geel dhalayana wuu ku tusaa”?!

Cimrigayga oo raagay Deeq oo caynaddan ahna wuu i tusay!Ish!

Iga daa qalbiyohow xodxodashada aad ninkaas iigu bogsalaaxayso xiska iyo maanku way diideen intii uu xero-kaweydaartaye!

Ma wixii oo jacayl ahaa ka dib... wixii oo kalgacayl uu i waraabiyay ka dib... wixii oo erayo maangal ah oo laabtana qancinaya uu ii miisayay ka dib... wixii oo han iyo himilo aan la dhisayay ka dib... wixii oo...iga daa...! Ma rabo in aan xataa xasuusto! Laakiin miyaan deyn karaa xasuustiisa?! Ninku waa Deeq dee! Haddii uu yahayna?!

Miyaanu ka cidhiidhtoonkan iyo cillanaantay i baday ahayn?! Gef wuu dhacaa...

A aaa...a aaa...kan gef laguma sheegi karo!

Waxa uu agtayda ka taagan yahay booska uu shirkigu Ilaahay agtiisa ka taagan yahay!

Waan ka xarrimay beeraha qalbigayga iyo riximkaygu in uu midho u beero!

Waan ka xarrimay gacantiisu in ay goshayda galagalaysato! Waan ka xarrimay in uu gogol igula caweeyo!

Iyada oo maankeeda isdiiddooyin is'oggol oo haddana kala irdhoonayaa ay ku hirdamayaan ayay daaqadda ka daawanaysaa daruuraha ay hoos u eegayso.

Kor in ay u eegto mooyaane miyay weligeedba daruur ka hoosaysa aragtay. Illeen daruurta boggeeda iyo dharbarkeeda kore way isu eg yihiin.

Hadba ka-fekerkiisa waxa ay iskaga mashquulinaysaa ufiirfiirsiga degaanka ku xeeran iyo dadka kala midabbada, qaabdhismeedka iyo muuqaalka ah ee aanay hore u arki jirin ee ay hadda ugu horrayso.*Ilaabay abuur badanaa!*

Tolow taas ninka ka soo ag toosayaa dulgaad intee le'eg ayuu leeyabay?!

Tan sidan u miigantay ka naf ka deyayaa ma bilaa damiir ayaa?!

Xudbuumaddaas aad mooddo xagaagii in ay dacarbaxday ma cid baanata ayay weyday?!

Kan indhaha yupgar e arig ecsapges ling riade oyun geabadbisloamed ing gaaninayaa...!Acuudu billaab...!

Istaaqfarallaab...!

Ma xanaaqiisii ayaa Idiley balkaa kula gaadbay?! Waa maxay dadkan aad wada biifaysaa?!

*Boggaagii daadaxda abaa ma dabci-xumadan ayaa u danbaysay?!*Markii uu jacaylka dhabta ah uga sheekaynayay way xasusataa mushaaxa xanbaarsanayn,laakiin mid kastaa uu ka muhimsana tobanhadal oo roomansi ah oo toban maalmood oo kal duwan uu kagafarxiyo. Mid kastaa waxa uu xanbaarsanaa xaqiiqo ay mahuraan tahayin noloshooda lammaananimo ay ku saleeyaan. Mid kastaa waxa uu hoosta ku watay xeer nololeed oo hayaanka adduun in lagu guuleysto tallaabo wanaagsan u noqon karayay.

Waxa ay xasuusatay sidii ay noloshu agtiisa ugu fududayd. Sidi uu u ahaa nin agtisa si yar oo fudud loogu noolaan karo. Nin dhibsigisu uu yar yahay oo aan gocasho iyo karahsi badnayn. Nin aan waxba adkayn ee wax kastaba xalka iyo maaraynta ugu dhow u eega.

Maalinkaas ay ka sheekaysanayeen jacaylka dhabta ah ee uu sidaas ugu faahfaahiyay ayuu uga warramay sidii uu u qaatay fekradda ah in aanu nolosha waxna isku adkayn,iyaduna fekraddaas way la aamintay oo way kaga dayatay. Ismalure ayuu ahaaye iminka iyada ayaa ismalurenimadaas la wadaagta.Lafteedu waa Ismalurto.

Waxyaabaha noloshaada dhabta ahna kaa mashquulinay.dheef u dhiganta waxaas aad ka mashquushayna aadan ka helayn, sababta aad isugu lurayso ayaaba khalad ah.

Fekraddaas way ka sinnaayeen. Haddana sidaas oo ay tahay,madadaalada, maaweelada iyo xaraabaysiga nolosha ma aanay dayici jirin maadaama ay kuwaasi marar badan xataa nolosha dhabta ah ka mudan yihiin.

Waxa uu uga sheekeeyay sida uu ku bartay in nolosha waxna aanu isku adkaynin.

DeT

Guyaal Lx hor, intii aanu hayaanka jacayf ina kuleran, sxka sati ku dhacay gofha upu weyn ce gof basa oo dhanka je sylka a januedhowhas bradanka uo ko dioco, nolosbans ku adkeeys se un rallazho ka cprad Lani wanyo.

Jacaylku waa mid ka mid ah arnmahs csadifadeed ee fahankoeala iyo darcenkoraduba ay ugu sahlan yibuin, haddana marka laks falgrbejo ugu adag ce aan siyaabaha dhayalka abs loogs gongsadli karin.

Khaladka aan ku dhacay waza uu ahiaa in aan iku arlkeeyay fahanka jacaytha,ka dibna ow igu adkaaday.

Gacaliso, suuradda Albaqara saca loogu magac daray re qisadiisa lagaga sheckaynayaa waa rusaalaha ka dhiman badiba bukshadeenta er haddu ay fahmnaan ay nolosha jacayl sahalada sida yar byaga dhabrayn karo a nogon labayd.

Laba raas oo ka mid ah rcet-Banii Israa'il ayaa isku qpbtay sanada nin la kala dilay. Qoladii laga dilay ayaa qolo o tohuntay, qoladui laga ccdecyayna ganafka ayay ku dhufatay oo way diidday.

Markii ay qir iyo qir noqotay ayay isula yimaaddeen nebi Muuse NKH'c,haddii ay u xaalwarramecn oo garnagii ay sugaycenna waxa lagu soo dejiyay nebi Muuse NKH'e waxyi yar iyo weyn,cirroole io carruur, aqoonyahan iyo agnaan (jaahil), qof kasta oo goobta taagnaa uu fahmi karayay, xataa in lagu ccliyo aan u baahnayn, in dedaal laga bixiyo fahansiintiisana aan sinaba loogu xisaabtamaynin.

Waxa loo sheegay hadaI kooban oo kaalingal ah ou ah: "sac gawracal"

Sac looga (qala). Ma aha wax cid la fahansuyo, waxa la gudboonayd in ay dhaqaaqaan oo mindidaay soo qiataan, saca ugu dhow ce agtooda marayana ay dhuunta ka lisaan, amərkaasna sidaas sahlan ay ku fuliyaan.bale waxa ay jcclaystecn in ay matalada yara adkecyaan xoogaa, ama ay fahan intan ka badan u su yeezhaan, iyagjina waalagu adkeeyay heer ay ku sigtecnba in ay waayaan sac ay qpılaan oo kurnannaankoolii bo'da ahaa ay ka soo qaban wasyaan.

Hal godob ayuun bay sameyen oo ah, amarkaas sahlanaa ce sidas keeneen, ka dibna wax aanay jeclaysan oo aanraalligelin ay kala kulmeen.in aanay filanayn masadlada sidas u fududi in ay qaddiyaddooda sidas dheelaysaa? Waa ku sideel"

Iyaga oo haysta fursad ay sac kasta oo adduunka guudkisa saaran qaarkood!" Ka dib sifooyinkii loo sheegay waxa ay ku soo koobeen lahaayeen, waxana loo sheegay sacaasi in uu ahaado mid aan da'weyneyn oo aan duqoobin, sidoo kalena, uu ahaado mid aan weyl ahayn oo aan dhaylo curdin ah ahayn, uuna ahaado qaalin xooggan oo muggeed u buuxda. Waxa soo

Haddana weydiin kale ayay keeneen oo ah:“bal midabkiisa koobantay fursaddii ay ku helayeen sacaas oo lo'da noo sheeg Muusow jaadka uu yahay?!"Miidaamo dhego ma badankeedii way ka baxday fursaddii xulashada.Bal may intaas leh haddii malag dhawaaqaayo, murti ayaa ahayd. Waa duul ku kaaftoomi lahaayeen!maqiiqan oo kakaanaanta doorbidaya. Dhankii midabkana waxa loo sheegay in uu ahaado hurdi ifaya oo weliba marka la eego indhaha faraxgelinaya oo dadka eegayaa ay la dhacayaan bilicda midabkiisa!

Xataa midabkaas in uu leeyahay uun looguma ekayn ee waxa la daba dhigay shardi ah in uu noqdo mid soo-jiidasho leh, oo haddii laga waayo soo-jiidashadaas shardigaasi wuu burayaa.Marka aynnu wax qiimaynaynno, arrimaha la xidhiidha dareennada qof waliba waxa uu ku eegaa indho ka shidaal qaadanaya caadifadihiisa u kaydsan iyo dhadhansigiisa ama dookhiisa,sida hal masalo la isugu waafaqaana way adkaataa. Sidaas ayaa loogu adkeeyay,oo dhadhansiga shakhsiga ah ayaa lagu darayshardiyadii sacaas,taas oo adkaynayay qof kasta oo eegaba indhihiisa in uu faraxgeliyo!

Maxay kadeed iyo rafaad ka mareen tolow baadhitaanka sacaas?!

Bal qiyaas, qoomiyad dhan oo meel deggani lo'da ay leedahay ee kumannaanka ah iyada oo ka dhex baadhaysa sac midabbo iyo astamo gaar ah leh, wareeggii kasta ee sifo gaar ah lagu baadhayaaba tolow imisa ayuu kuqaadanayaa?!

Intaas kuma aanay ekayn adayggaas ay isku adkaynayeen ee amarkaas yar ee sahlan way falsafadaynayeene, haddana way yimaaddeen iyaga oo markan cabanaya oo dareemay markii ay isku adkeeyeen in Ilaahayna uu ku adkeeyay oo dhaaddan in fulinta arrinkani uu ku adkaan doono, waxana ay keeneen weydiintii u danbaysay ee lo'da reer-Banii Israa'iilba halka sac ka soo reebaysay,halka sac ee halka nin uu haysto ka soo reebaysay, waxana loo sheegay in uu yahay sac aan dhulkana lagu qodin oo aan beer lagu faaqin,waraabna aan loo adeegsan. Yacnii; sac aan korkiisa rar iyo wax-qaadis loo adeegsan ee maamuusan.

Weliba intaas lagagama hadhine waxa loogu daray in aanu sacaasi iin abuureed lahaanin ee uu ceeb-ka-saliim ahaado.

Wax ay baadhaanba waxa ay sac dhammaanba astaamihii leh ka heleen hal nin, ninkiina dhankiisa ayuu kaga adkeeyay oo markii uu dareemay in uu yahay ka keliya ee loo baahan yahay ayuu isaguna buur isa saaray oo uu yidhi:"waxa aan sacaygaas idinkaga gadayaa haraggiisa muggii oo dahab ah!”

Amankaag weynaa!

Ikhtiyaar kalena ma jiro!

Sanka ayay kaga tollaadeen in ay dalabyadii ninka oo iyaguna dhankooda u adkaa aqbalaan, sidaas ayayna sacii ku qaleen,qaddiyaddiina ay ku xalliyeen.

Idil:“oo Deeqow;maxaa sababay masalada sidaas u sahlan ee ah in sac la qalaa in ay gaadho heerkaas lo'dii markaas ay gaadhi karayeenba halka sac uun laga soo helay, kaasna qiimaha intaas le'eg laga siiyo?!"

Deeq;jawaabta keliya ee weydiintaasi ay leedahay Idileywaa in ay doonayeen iyagu in lagu adkeeyo oo ay adaygga ka doorbideen fudaydka iyo samaynta waxa ay sida sahlan ku xallin karayaan! Waa in ay falsafadeeyeen nolosha qaybaha aan falsafadaynta u baahnayn.

Waxa intaas sii dheer in aayadaha ka warramaya qsadan uu Ilaahay ku xusay bogagga ugu horreeya Quraanka sidii in la inoo tibaaxayo

farrin ah in aynaan nolosha isku adkayn, noloshuna ay fududdahay oo dhacdo oo innagu arrinkas aynou u gacan qaadno in aynnu buro waxyeellada meelmarintisa inaga soo gaadhaysa,haddiiaynaan awoodi waayinba in aynnu ka dhabaynno rabitaankaas.

adduunka guudkisa yaalla oo jacaylkuna uu ka mid yahay ay fudud waliba ay inagu adkanayaan in u dhiganta inta aynnu innagu isku adkaynno. ” Deeq;isha ayaad ka ridday. Xataa Ilaahay ayaa Quraanka inoogu tilmaamaya in uu fudayd iyo yasirid inala doonayo ee aanu culays iyo kadeed inala rabin.

Adiga oo doonaya in aad buug akhrido haddii aad ku xidho shardi ah si aan buug u akhriyo waa in aan joogaa meel cidla' ah oo ay neecawi ka dhacayso,buuq iyo sawaxanna aan lahayn oo xataa sanqadh aanan maqlayn,qaxweshiilanina uu i hor yaallo, kursi aan qallafsanayn oo aan fadhiga lagu dhibsanaynna aan salka ku hubsado, ka dibna aan halkaas buuggaas baallaha kaga rifo, tolow kharash iyo qaxar intee le'eg ayay kugu qaadanaysaa in aad intaas uun ka dhabaysaa?! In aad hesho meeshaas, oo aad hesho wakhtigii aad ku tegi lahayd, oo aad hesho kharashkii aad ku gaadhi lahayd iyo kii qaxwuhu intee ayay kugu qaadanaysaa?! Intee ayaad se halkaas ku sii negaan kartaa oo aad sidaas u sii fadhiyi kartaa?! Toddobaadkii se imisa jeer ayaad fursad aad bartaas ku tagto helaysaa?! Inta aad ku sii aaddan tahay iyo inta aad ka soo socoto oo keliya wakhtiga kaaga baxaya imisa bog ayaad ku akhriyi lahayd?!Waxaas oo dhan waxa kaa qaadanaya in aad akhrido qayb ka mid ah buug adiga oo awooda inta aad qaadato oo bartaada hurdada aad la tagto in aad ku dulakhrido,ama goobtaada waxbarashada iyo shaqada aad u qaadato oo inta aad wakhtiga u hesho aad akhrido, amaba inta aad baska saaran tahay aad akhrido.

Sidaas ayay nolosha wax waliba kuugu adkaanayaan haddii aad adigu doorbiddo adaygga iyo isku-adkaynta nolosha!

Bal sidaas oo dhan ayuu Deeq u fahansanaa nolosha'e maxaa ku kellifay in uu sidan igu sameeyo?!Muxuu anigana nolosha iigu adkeeyay, isaguna uu isugu adkeeyay?!

Deeqda Ilaahay lagaa qadi dheh kaasow! Istaaqfarallaah!

Maxaan u habaarayaa?!

Sow kii i baray jacaylka iyo ninku sida uu wax u jeclaado,odhaahihiisiina ficilkoodii oo ka marag kacaya aan noloshiisa ka akhristay.

Sow kii boqoradda iga dhigtay ee aan ii arkayn naag in naf laga dayo uun loola xidiidho, ee xataa aan habeenna gacan damac leh igu soo taagin!

Sow kii iiga sheekeeyay taladii uu Steve Harvey inantiisa siiyay ee ahayd:“gabadha uu ninku xidhiidhka la leeyahay ama waxa ay noqotaa boonbalo uu ku danaysto, ama waxa ay noqotaa gabadh ku habboon in nolol daba dheer lala qaato, suurena ma aha in ay gabadhu labadaasba kulmisataa ee ninka agtiisa mid ayuun bay ka noqonaysaa."Sow kii aan weligay indho damac leh igu eegin,ku-dangaadhna aan ii arag, noloshiisana aan carshiga boqortooyada kaga fadhiyay!

“ Ninka noloshiisa han kasta oo uu yeelanayo iyo damacyadiisuba saddex qodob ayay ku salaysan yihiin: waxa uu yahay, waxa uu sameeyo,iyo inta uu shaqaysto. Waxa uu doonayaa in uu magac iyo maamuus yeesho,kaalinna uu iska soo saaro. Waxa uu doonayaa in uu ku sheegganaado waax nolosha ah oo magacaasna uu ku samaysto,isagana looga danbeeyo. Waxa uu doonayaa in uu soo galo bishii dakhli uu raall ku yahay oo hadba inta uu tabcadaa waxa ay safka hore ka gelaysaa qiimiga uu isu hayo. Ninka marka ay saddexdaasi isugu fadhiistaan ayuun baa noloshiisa lagu tilmaami karaa mid dhabbihii la qummanaa haysa, inta se saddexdaasi ay khalkhalka kaga jiraan, han kasta oo kaleba iyaga ayuu ka soo hormarsanayaa." Sow tii aan nolosha Deeq hadalkaas Steve Harvey sida waafiga ah uga daalacday!Wuu lahaa magac iyo maamuus cid kasta oo taqaanaaba ay ku qadderiso. Wuu hayay shaqadii uu ugu jeclaa oo ahayd in dadka aqoon

ahaan o dhiso co murcalin ayuu shaa Shagpda ugu wern e ulmnu Shagadaas higilka iyo mamnuuska lch ayuu hayay Decq.Dakbliea noo dhaqale ahaan ugu tirsana, Saddexdi rukun ee rinku raganimadtin qaadatay maxay ugu soo marmarsootay tolow?Ilaa hadda qalbigayga sidi ayuu ugu weyn yahay si kasta co caqligaygu uu u karhayaba!

***

Intan oo su'aalood ee ay halkan kaga cataabayso Idil ayuu isaguna dhankiisa ula ciirciirayaa.

Waxa garaadka Deeq isaga soo daba laabanaya hadalkiiSteve Harvey ee ahaa:"gabadha dumarnimada dhabta ah lihi waxa ay dibedda u soo saartaa raganimada dhabta ah ee ninka!" Xaqüiq! Idil iyaga oo aan isguursanba waxa ay Deeq dedaalkiisii ugu dartay in raganimadiisa dhabta ahi ay soo daahirto, waxana ay siisay fursad kasta oo uu ku muujin karayay, isaguna uu ku xaqiiqsan karayay!

Qalbiga ninka waxa ku yaalla qol aanay cid waliba awoodin in ay gasho,ama xataa ay ogaato dhanka uu kaga yaallo, hal gabadh ah oo qudha ayaana furaha qolkaas hesha, haddii ay gashana weligeed kama baxdo xataa haddii ay iswaayaan, laakiin noloshiisu iyada isuma taagto ee way socotaa, wuu guursadaa oo uu dhalaa, dumar kalena nolol aanu jacayl ka madhnayn wuu la wadaagaa. Ninka caalamkiisa guduhu isaga ayuu ku kooban yahay, culayskiisa iyo murugooyinkiisana wuu la aamusan yahay. Hal mar ayuu helaa gabadh uu u wada furmo o0 uu laabta u sii daayo, iyada ayuun buuna culaysyadaas gudaha ka haysta la wadaagaa, waana sababta ay qalbigiisa ugu yeelanayso kaalinta aanay cidina ku lammaanaynayn, haddi uu iyada waayana qolkaas qalbigisa ahi sidaas ayuu ku xidhmaa, furihiisana lagu waayaa.Deeq waxa uu arkaa qolkaas

dareennadiisa oo dhammi ay ku cabbudhsan yihiin ee ay iyadu furi jirtay marka uu la kulmo ee ay

dhibaato kasta oo uu tabanayaba ka dareemi jirtay in furihiisii uu lumay,sidaasna ay weligiiba caadifadahaasi ugu cabbudhsanaanayaan.

Dareenkaas laftiisa ayaaba xanuun kale ah!

In aad dareento in murugooyin badani ay kugu soo socdaan, laakiin aad sii og tahay in aanay jirin cid garabka ku taabanaysa oo ku odhanaysa "waan kula jiraa",cid laabteeda aad ku dhuumanayso oo aad gabbaad ka raadinayso, iyo cid illinta kaa tiraysa oo aad ku.tashato midina,iyada lafteeda ayaa dhibkaas kaaga sii weynaanaysa!

Waxa weli xusuusteeda dhex maashaynaysa uu ku sheekadaas ku samayso. Intas uu u sheekaynayay way xasuusata sidi ay ugs uu taagaba ay indheheedu raacayeen.Marka aynnu godobkaas ku salaynno jacaylka, waa mid ka mid ah cid u hayso ka dareentaa ma aha wax u baahan falsafadayn iyo bogollal su'aalood oo isdaba yaalla!

In aad gof gacaltooyo u qaaddo oo uu agtaada qiimi ku yeeshaa ma aha wax kaaga baahan weydiimo, in aad tobannaan qof la tashato, in aad meel ismadoobayso sidii n' uu Ganacbuur ku dhacay ama lax uu Huluunbe haleelay, in aad naftaada dulmido oo oonta aad ka soomiso,in aad oomiso oo harraad ay la dhuun-qallasho aad ku daawato,iyo in aad saamallayl iyo soo-jeed baddo midna!Waa dareen Si kale oo ka dhow, dareennada qalbiga laga dhaado ee caadifadeed ma jiro qof kuu tilmaami karaya sida ay yihiin wanaagsan, in aad si wanaagsan u dhistidna wvuu u baahan ama ay u shaqeeyaan!Salaadda iyada oo la yidhaahdo yahay adiga oo aan isku adkaynayn. khushuuca oo niyadda soo xaadiriya ayuun baad aragtaa, ee ma arkaysid cid ku odhanaysa sidaas ayaa loo khushuucaa oo tilmaamo xaddidan oo aad u raacdid ku siinaysa,sababtuna waa in khushuucdu ay tahay arrimaha qalbiga iyo dareennadiisa,cidda keliya ee hadba maarayn karta qalbiga ee waxa uu qaadayo iyo waxa uu falayo ku shubaysaana waa adiga,cidda keliya ee kula dalacanaysa ee hadba waxa uu qalbigaagu ku sugan yahay kula eegaysaana waa Ilahay. Waa sir adiga iyo Ilaahay idinka dhexaysa qalbigaaga iyo wixii aad dareen iyo shucuur ku sidataaba.

Sidaas aanay u jirin cid kuu tilmaami karta khushuucda salaaddu,ayaanay u jirin cid kuu tilmaami karta cidda aad jeceshahay iyo sida aad u jeclaanayso midina.Haddi ay dhacdo oo malin uun aad isweydisid tolow qof hebel ma jeceshahay mise ma jeclid? Doorasho ayaad garaadkaaga gelisay,

waxana uu dooranayaa hadba wixii isaga ku weyn ee aad adigu ahmiyadda siisay, in aad jeclaato iyo in aadan jeclaanin.

Qofka aad sida dhabta ah u jeceshahay waa ka wax kasta oo kugu saabsanba aad qaybta la wadaagto, wax kasta oo aad haysatana aad qaybta ka siiso, noloshaadana aad ku hallayso. Ka aad jacaylka ka sugaysana miisaankaas ayaad saari kataa.

Qof kastaaba waxa uu leeyahay caalam dadka ku xeeran uu la wadaago oo ka uu ummadda kula joogo ah, iyo caalam gudihiisa ka dhisan oo hal qof uun uu la wadaago, caalamkaas gudaha ee sirihiisa,waayihiisa,doqonniimooyinkisa, goldaloolooyinkiisa, iyo culaysyadiisaba wata ee baahida ugu xeesha dheer ee qof walba loogu tegayo qofka aad isu furtaan ee aad la wadaagto ayaa ah qofkaagii, isaga ayaadna nolosha qadhaadhkeeda iyo macaankeedaba si waafi ah ula qaadanaysaa.

Ha weydiinin cidna sidee ayaa qof loo jeclaadaa? Ama sidee ayaa jacayl loo dareemaa? Sida aadan u weydiinayn sidee ayaa loo khushuucaa? Ama sidee ayaa khushuuc loo dareemaa? Giddigood waa dareen qalbigaaga ka oogan, maareeyaha qalbigaaguna waa adiga,cidda qudha ee su'aalahaas kaaga jawaabaysaana waa isla adiga uun!

Jacaylku waxaasbeen'abuur dusha laga saarayo ee cadaawaha iyo nacabka lagu sheegayo ee gabboodfalaha daallinka ah iyo maska aadunka ah ee maanka dafaya lagaga dhigayo ma aanu mutaysan!

Jacaylku waxa uu u baahan yahay waa fahan aan falsafadaysnayn! Waa garasho garawshiinyo wadata!

Deeq:

Intan haddii aynnu Idiley isla fahannay, dadka badigoodu dabinkaas ah falsafadaynta nolosha iyo jacaylka ayay ku dhacaan, ama qofkaasi dhacdo soo martay ayuu jacaylka iyo waxyaabaha kafarcama feker gaar ah uga qaataa, amaba dhacdo uu goobjoog u ahaa. Qof kastaaba jacaylka iyo arrimaha ka farcama ee guur,kalsooni,xidhiidh,baahiyaha ninka,kuwa gabadha,kala-duwanaanshohooda,sida uu midiba ka kale ula dhaqmayo,iwm,falsafad isaga u gaar ah ayuu ka sitaa.

Qaabka aad ku noqon karto qofka aaddoonayso qofkii ku habboonaa,isagana aad kaga dhigi karto qofkii kugu habboona qalbiyadiinnuna ay si aan labalabayn lahayn isugu dooni lahaayeen,caqliyadinnuna ay si aan daba-ka-werwer lahayn isugu qanci lahayeen, waa in aad masalo kasta markeeda ka dooddaan,dood aqoomaysan oo dhab'abbaar (objective) aad xaqiiqada ku beegsanaysaan ah, ka dibna aad masalo kasta isku si isula fahantaan,wixii kala-duwanaanshiiyo ah ee la aqbali karana aad isugu dulqaadataan. Intaas ka dib ayuu jacayl dhab ahi imanayaa. Ka bacdi marka aynnu isla fahansan nahay waxa ay yihiin kalsooni, kalgacayl guur, ubad, jacayl, hinaase, furriin, iwm, ee aynnu isku falsafad ka aaminsan nahay, ama haddii aynnu ku kala duwanaanno uu midkeenba garanayo qofkiisa kale arrinkaas waxa uu ka aaminsan yahay ee uu ku tixgelinayo,markaas ayay dhalanayaan waayaha jacaylka dhabta ahi.Laakiin haddii arrimahaas jacaylku tiirarka uu ku qotomo ah uu midkeenba fahan iyo falsafad gaar ah ka haysto, waxa aynnu noqonaynnaa laba dareewal oo gaadhi laba shidh oo kala jeeda leh uu midiba dhankiisa u sheelaraynayo,goorta gaadhigaasi uu geddoomayo,kala go'ayo, ama ugu yaraan labada shidh midi uu shaqada gabayo ee ka kale uuafduubanayaana ma dheeraanayso.

Idil:“laakiin Deeqow innagu markii aynn isbarannay sidan ma aynaan samaynine!"

-"Markaas caqli intaas inoo fahma ma aynaan lahayn,laakiin iminkaba habeen inagama aanu tegin. Arrimo badan oo aynnu marar badan isku qabannay mid kasta hadda dib waynnu u falanqayn karnaa,dawadisa kamadanbaysta ah iyo tallaalkiisa ka-hortagga ahna waynnu heli karnaa.”

Aabbihii cune af macaanaayee!

Waxa aad mooddaa eray kasta oo uu leeyahay in uu qalbigayga ugu degayo sidii balanbaalis bilic u yeelaysa degaanka ay ku degto.

Xasuus kasta oo wanaagsan oo aan ka haystay tan uu ku kacay ayaa dhantaal iyo dhalliil ku noqotay.

Wax walba falkan uu ku kacay wuu qarribay!

Waan u xiisay hadalkiisii iyo araggiisiiba, laakiin caqligaygu ma oggola in aan naftayda u oggolaado xataa fursad aannu taleefan iskaga maqli karno!

Fiicnaan lahaydee haddii aan ardaydiisa ka mid ahaan lahaa! Hadda luuqad-jidheeddiisii indhaha wiilashooda maamulaysay ee ay hadba dhan ula dekaamayeen iyo erayadiisii miidda ahaa ee kaftanka korkaxaadiska ah xanbaarsanaa ee uu ardaydiisa wax ugu sharraxayo ayaan iska dhegaysan lahaa. Inta aan ku dhaygago ayaan dhegahana u raaricin lahaa, markaasuu codkiisu igu dhibci lahaa.

Laakiin maxay kuugu taallaa, waanigaa cirka iyo dhulka dhexdooda maraya, juqraafiga dhulkana meel aan saacaddan kaga beeganahay aanan garanayn,halka aan cago dhiganayana waxa igaga horreeya aanan xog ka haynine.

Imisa jeer ayaannu isku qabsannay ciyaaraha uu daawado iyo kubbadda uu ciyaaro?!

Waxa aan kula ballamayay kulan, markaasuu kooxdiisa oo ciyaaraysay iga dooranayay. Waxa aan kula ballamayay wicitaan,markaasuu kubbad u ciyaar tegayay.

Waan ugu dulqaadanayay deelqaafyadaas uu ku kacayay,haddana aad ayaan uga xanaaqayay.

Show farqi ayaa u dhexeeya xanaaqa iyo cadhada.Xanaaqu waa in aad wax dhibsato adiga oo raalligelin yar iyo in lagu fahmo uun u baahan. Laakiin cadhadu waa in aad soo saarto go'aamo qadhaadh oo xaalmarin weyni uun ay baajinayso.

Marka aan kaga xanaaqo dayacaas uu sameeyay, haddana qayb iga mid aha ayaa ii sheegaysay in wixii uu qayrkaa kula qabouu qosolkaa ku dhan yahay, Deeqna uu waayahaas wiil dhallin ah u yahay. Sida aan

dumar ahaantayada u leenahay waxyaabo aannuxiisaynno00 aanay nala fahmayn, ayay nimankuna u leeyihiin oo aanaan la fahmayn.Marka uu i soo waco ee aan mar iyo lababa isu macaaneeyo ayua eraygiidii caanka ahaa ee "gacaliso" xanaaq walba igaga masixi jiray.Ma garanayo sababta ay nimanku isboortiga sidan oo dhan ugu jecel yihiin!

Tolow ma maykaabkooda ayaa?!Mise waa qaab ay u xarragoodaan oo ciyaar kastaaba waxa ay uga dhigan tahay sed ay qarxinayaan?!

Mooji!Waxa aad mooddaa marka uu kubbaddaas dhex galayo in aanan noloshiisaba ku jirin. Keligay ma aha ee noloshiisa ku xeeran o0 dhan ayaa si hakad u gasha. Haddana marka uu ka soo dhex baxo waxa aad mooddaa in cudurdaar kastaa uu u sii diyaarsanaa!

Si kasta oo uu aqoon u lahaa, garasho iyo ogaal buuranna uu ugu suntanaa,haddana dhacdhacyadaas insaan ayuu u ahaa, aniguna waan ka xanaaqi jiray, laakiin markan waxa uu i gaadhsiiyay heer xataa cadhadii xaalmarinta lagu xallin karayay ka taf dheer, kadeed aan anigi oo dhammi isku waayay ayuu gondaha ii geliyay, umana malaynayo cudurkani in uu dabiib leeyahay!

Maxaan ugu malaynayaaba sownigan ka soo googoostay isagii iyo wax kasta oo la xidhiidhayayba!

Ma jacaylka ayay dhibtu ku lammaan tahay?! Mise maadaama aynnu jacaylka mar walba wanaag uun ka filanno ayay dhib kasta oo dhankiisa ka timaaddaa buuro inoola le'eketaa?! Mise innaga ayaa marka horeba jacaylka dhibka dhinac wadna oo mar kasta oojacaylkeennu uu kobco dhibtuna way la koraysaa?!

Mooji!

Alla Ilaahayow...!

Waxa uu ogaa in ay mar tagto miyi, xilliyada fasaxyada, marna Hargeysa, inta kale se ay gurigooda uun joogto. Wuu hubaa in aanay xaafaddooda joogin,magaaladana aanay la joogin,meel uu ku sheegana garan maayo. Waxa uu u tuhmayaa in ay Hargeysa aadday. Xaafadda adeerkeed oo reer-Hargeysa ah ayay soo joogi jirtay intaas oo wuu ka war hayay, xalka qudha ee hor yaallaana waa in uu halkaas ka raadiyaa.

Maba xuma'e,halkaas ha ka raadiyo'e,laakiin sidee?!

Ma reerka ayuu irridda ku garaacayaa oo “Idil ma joogtaa?” Uu ku odhanayaa?! Ha ka yaabin!

Xal lama waayayo,ee horta ha iska xaadiriyo Hargeysa.

Go'aankaas ayuu qaatay, laakiin ma aha nin inta uu go'aan qaato iska dhaqaaqaya,ee waa nin masuuliyado badan.

Waa bare dugsi sare, maaddada Taariikhda ayuu dhigaa. Se inta uu ardaydiisa la wadaago casharradooda manhajka loogu soo gudbiyay waxa ka badan inta uu nolosha kale u diyaariyo. Wuu ka dheregsan yahay in manhajkan ay soo malmalluuqeen dar aan danta ubadkan iyo ta xigaalkood midna ka talinayni, sidii isaga wakhtiga loogaga soo lumiyayna ma doonayo in maskaxdooda adduunka indhaha u soo kala qaadaysa uu kaga shiiqiyo maalaayacnigaas la soo dhoobdhoobay.

Falsafadda nolosha waxa uu u daba fadhiistaa Alija Izetbegovic (Cali Cisat Begofij), waxa uu isku tiriyaa dugsiga falsafadeed ee Begovicism,manhajka waxbarista ardayda iyo guud ahaanba tacliintana waxa uu sees uga dhigtay hadalkii Cali ee ahaa: “ waxa suure ah in waxbarashadu ay noqoto tu aadamanimo-darro xanbaarsan haddii ay noqoto mid dhan ka raran oo ay jiheeyaan oo jidkana ay u jeexaan koox fekrado gaar ah laqimaya oo aadamanimada aan si uun ua jaanqaadayni. Waxa ay noqonaysaa tacliintu mid aadamanimada ku liddi ah marka ay noqoto tu aan qofka barayn in uu noqdo qof si madax bannaan u fekera, ee ka cuudisa in uu u fekero qaab isaga u gaar ah. Waxa ay noqonaysaa aqoontu aadamanimo-darro marka ay qofka siinayso jawaabo sii diyaarsanaa, iyomarka ay dadka u

diyaarinayso in ay noqdaan shaqaale kala duduwan oo qaabab kala duwan u hawlgala uun,

aragtidooduna aanay intaas dhaafin ee aanay kuboorrinin aoadooda fogeyan on daymadoodu ay durugsanaato, iodherpa oo ay xunbada degaankooda iyo dabcigiisa kaga xoroobayaan.danrooda tahay wa adamanimo-darro. In aad iyaga u fekerto on ipo arrimahan looga fadhiyana ad adigu ka furato oo ad qabara aanaynayaa waxa ay inaga dhigaysaa kuwo meel ku dheggan oo joogteeya hadba waxa ay ku fooggan yihiin."Sidas awgeed ayuu si walba isugu dayaa in uu atdayda garaadkooda loo qaabeeyay ay shaqale uun

nogdaan,fekerkooda naqdineed iso firadooda aadamanimana aan dugsiga lagaga xayuubin, ruuxda fannaannimo ee ku jirtana aan baallaha laga tifin oo aanay jiritaankooda dhabta ah ula falgeli waayin.Agoontu iyada oo magacaas maamuusan ay wada xanbaarsan tahay haddana way kala tahay. Aqoonta dugsiyada ardayda lagu baraa waxa uu aaminsanaa in ay tahay agoon aan dantooda iyo ta dalkooda midna ka talinayn ee labadaba lagaga mashquulinayo. Waxa uu aaminsanaa aqoonta midina in ay adiga ku anfacayso oo dantaada aad ku fushanayso,midina cidaha danaha kaa leh ay u fududaynayso in ay si sahlan oo aadan gocanayn kaaga labalistaan, aqoonta ardaydeenna la baraana waa tan danbe.

Sababta dalweynaha Soomaaliyeed looga dan leeyahay manhajyada waxbarasho ee ka jiraa waa in la soo saaro qof dhallin ah oo Muslin badhaxtiran ah, Soomaali saafi ahna ah, laakiin markii uu u fiirsaday manhajyada ardaydaas lagu qulaaminayo waxa uu arkay in waxa koowaad ee ay dilayaanba uu yahay Muslinnimada iyo Soomaalinimada!Manhajka noocaas ahi waxa uu inaga soo saaray ummad wada og in maskaxda laga gumeysto,laakiin qofna aanu u tafaxaydanayn sidii uu gumeysigaas isaga kicin lahaa.

Waxa uu dareensanaa in iskuulku uu yahay xabsi magac qurxoon leh!

Xabsi la gelinayo garaadka ilmaha yar ee wax walba in uu barto u diyaarsan!Haddii ilmaha uu aabbihii kabaha tolo ama uu tumaal yahay, oouu hal sano aabbihii la joogo isaga oo daadaawanaya oo gacanyare u ah,sannadka labaad isaga ayaa ama kabaha tolaya ama biraha tumaya,waayo; waxa khibradda tooska looga qaato ee u-goobjoogga lagu bartaa inta ay doonaan ayay ka qaayo badan yihiin wax lagaaga sheekeeyay uun, weligaana aadan iyaga oo la samaynayo arkayn.

Ardayga dhismayaasha qaabka loo dhiso soo baranaya ee 12 sano oo iskuul ah ka dib afar sano oo jaamacad ah u qaadanayaa, hal bil ah haddii uu kuuli galo, bisha xigtaba wastaadnimada wuu tijaabinayaa,muddo aan shan bilood dhammaynna si kastaba wax wuu u dhisi karayaa,marka foormaannimo uu gaadhana in yar oo xisaabaha u gaarka ah dhismayaasha ah ayuun buu u baahan yahay in uu dhawr yar oo bilood ku barto. Hal sano wax aan dhammayni wakhti ay kaga bixi lahayd ayuu 16 sano oo subax walba uu sii jarmaadsan yahay u marayaa,marka uu soo baxana la-qabsiga shaqadiisaas ayaa dhib ku noqonaysa maadaama sheeko mooyaane shaahid in uu u arkaa ay ku yarayd.

Sidaa awgeed;waxa uu Deeq aaminsan yahay in uu dugsigu yahay xabsi magac qurxoon loo sameeyay, haddii xabsiyada dadka ay maxkamaduhu u diraan wax ugu qaalisan qofka ee xorriyaddiisa ah lagaga qaadana, xabsigan dugsiga la yidhaahdo lagaga qaado ilmahaas wixii ugu mudnaa noloshiisa oo ah in garaadkiisa firfircoon ee wax walba qaban karaya halkaas xogo korkaxaadis ah oo aan noloshiisa wax weyn ku biirinayn lagaga buuxiyo, hal'abuurkiisana la dilo oo loo tababaro waxa loo yeedhiyo oo qudha in uu qaybo oo uu ka soo baxo,sidaasna awooddii uu wax ku halabuuri lahaa ay ku allaysato,fannaanka gudihiisa ku noolna lagaga takhaluso.

Ugu danbaynta waxa uudugsigaasi soo saarayaa shaqaale u carbisan shaqada loo igmanayo, laakiin hal'abuur, hoobal, abwaan, curiye, iyo qof dhankiisa ruuxiga ah kaga badan dhankiisa maaddiga ah way adag tahay in uu soo saaraa.

Waxaas oo kallahaad ah, kharash ku baxaya ardaygaas ah, caajis iyo daal uu fadhiga galaaska ku dareemo ah, dheemaalka gadiidka yoomayoomaha ah ee cadceeddu ay dhalada shiilayso uu soconayo ah,

canaan iyo cashar lagu khasbayo in uu qaybo ah..dedaalkaintaas le'eg ee imtisxaanku marka uu soo dhowadana habeen-soo-jedku us gelinka danbe haddii aad wax ka weydliso wax badan in aanu k xasuusan ayaa suure ah!Waxa uu daremay markaa Deeq in dugsigani aanu dugsi ahaantisg waxbarashada taalla iyo nidaamka loo dhigayaa ayyihiin mareg arday kastaa qoolasheeda qool ka mid ah uu madaxa kula jito, ka dibna qoolkaas uu ku weynaanayo oo uu ku naaxayo, marka ay geesuhu u soo baxaan ee qoolkii uu qoortiisa ku giijismana aanu iska saari karin, inta noloshiisa ka dhimanna qoolkaas uu ku jirayo, qaabka qudha ee uu uga bixi karaana ay tahay in uu gooyo... cilmi iyo aqoon in uu ku gooyo,deraaseyn iyo baadhitaan in uu ku gooyo, in aanu qoolkaas intii uu ku naaxayay wixii lagu shubayay uun isku hallaynin.Waxa ugu weyn ee uu ka dhaxlayo nidaamka waxbarasho ardaygaasi waa tartan hawo ah, tartan bug ah, tartan aanu garanayn sabab uu ugu jiro,tartan ah hebel ka sarree, ama galaaska ugu sarree, ama tartan uu wakhtiga la beretamayo oo “ dhawrkaa sano iska dhammee ” ah,laakiin intaas nuxur ka danbeeyaa aanu jirin.Sidoo kale; mid ka mid ah isdiiddooyinka uu ardayga Soomaaliga ahi la nool yahay, ha la badheedho oo su'aal ha ka keeno ama ha ismoogganaysiiyo'e ayaa ah, in uu dareemayo in diinta iyo noloshu aanay shaqo isku lahayn, marka uu arko diin shiikheeduna uu masaajidka uun ka xadiisayo, goobeheeda lagu bartana markasyo iyo maxaddo la yidhaahdo oo ay gaar yihiin, noloshii kale oo dhan aqoontii la xidhiidhaysayna rugaha laga maamulo la yidhaahdo Wasaaradda Tarbiyadda iyo Tacliinta Sare oo ay dawladdu toos u maamusho,halka lagu bartaana aydugsiyada tahay, waxa ardaygaas ku dhalanaysa caqliyad ah haddii aad aakhiro iyo janno doonaysana maxadka gal,haddi aad adduunka in aad u tabcato iyo horumar doonaysana dugsiga gall Waxa ardaygaascaqabadda ugu weyn ee uu waajahayaa ay tahay in cilmigii loo kala qaybiyay laba nooc oo la kala yidhaahdo diini iyo maaddi, laba qaybood oo aanu Islaamka dhexdiisa cilmigu

u kala soocnayn, ka dibna la yidhi midba meel ayaa loogu hagaagaa.

Islaamku waxa uu waajibiyay in qof kasta oo Muslin ahiba uu cilmiga barto,cilmiguna wuu kala fadli badan yahay, wuuna kala mudan yahay,laakiin mid diini la yidhaahdo iyo mid maaddi la yidhaahdo ma kala laha. Quraanku wuu ka mudan yahay xadiiska, xadiiskuna wuu ka mudan yahay siirada nebiga, oo wuu ka mudan yahay Bayoolojiga,Bayoolojiguna wuu ka mudan yahay Injineerinka maadaama isaga naf bini aadmi lagu badbaadinayo. Sidaas ayuun buu u kala fadli badan yahay cilmigu ee cilmi kala qeydan Islaamku ma aanu samaynin.

Waallida waxa ka mid ah in aad duul wada waalan keligaa ka miyir qabto'e, waxaas uu aaminsanaa waxna uu ka war hayay waxa ay u horseedeen in uu beddelo gebi ahaanba qaabkii ay ardaydu uga baratay macallimiintooda. Waxa uu isku deyay in uu noqdo shamaca keliya ee dugsigaas ka baxaya ee la xidhiidhsiiya dhankoodii ruuxiga ahaa,hal'abuurkoodu in aanu dhimanna ka hortaga, awooddooda isku-fillaanshaha ah ee iskood ay, aqoon ugu raadsan karaanna uu kobciyo.

Waa macallinka ay ardaydu ugu jecel yihiin maadaama uu siiyo fursad ay wax ku soo baadhaan, ku soo deraaseeyaan, kuna soo bandhigaan. Waxa uu siiyaa fursad aanay barayaasha kale ka helin oo ah in casharkaba inta uu arday soo diyaariyo uu dhigo, isaguna uu wixii naashnaashid ah u sii raaciyo, arday kasta oo fursaddaas uu siiyayna dhibcaha imtixaanka qaarkood ayuu siiyaa si ay dhiirrigelin ugu noqoto,ardayguna isku-kalsoonaan iyo dhiirrasho ayuu ka qaadaa, in uu iskii wax u baadhi karana wuu dareemaa.

Intaas markii uu ardayda ka dhisay waxa uu bilaabay in uu ka dhex sameeyo mawduucyo doodo ah. In waxyaabaha dhallintu ay hadda la nool yihiin ama sugaya mustaqbalka oo jacaylka iyo xidhiidhka laboodka iyo dheddigoodka ka dhexaynayaa uu kow ka yahay ay ka doodaan oo mid waliba falsafadda uu ka haysto uu ku soo bandhigo ayuu fursad u siiyay, halkaas oo marka ay dooddu kululaato ee carruurnimo badani ay dhex gasho, xeerarka dooddana in badan lagu tunto uu marba dhexdhexaad ahaan u soo gelayay oo uu xaalka dib u soo dabbaalayay.

Taasi waxa ay u horseedday in iskuulka oo dhan laga wada jeclaado,xataa ardayda aanu xiisadaha u galini ay hadalhayntiisa badan darteed

ku jeclaadaan, macallimüintana magaca ayuun buu kala sinnaa, laakiin miisaankiisu ka madaxweynaha wuu kala weynaa ardaydaas.Way buuxaan dadkii wanaagsanaa iyo wanaaggoodiiba, ee bulshada ayaa xumaan-tirinta ku xeel dheer, qof walibana waxa uu u eegmo badan yahay wuu arki og yahay!Marka aad habdhaqankaas Deeq u fiirsato ayaad fahmaysaa fursadda xiddig waliba uu kaahiisa rasmiga ah ku muujin karaa in ay tahay in uu xaalad mugdi ah ku soo aado, waayaha adag ee ay dadku ka cawdaanna waa fursadda halyeeyadu ay ku soo ifbaxaan.

In kasta oo qalbigiisu uu tiiraanyaysan yahay, socodkiisu uu tabcaan ticaya yahay,tamartiisu ay wiiqan tahay, tahlid (karaan) weynna aanuu hayn in uu waxbaba qabto maadaama garabkii ugu muhimsanaa noloshiisa aanu war iyo wacaal toona ka hayn,haddana taasi marnaba kama aanay horjoogsan masuuliyadihiisii.

Mabda'a ugu weyn ee noloshiisa uu ka duulaa waa caddaalad,caddaaladduna waa in cid waliba wixii ay xaqa u lahayd la siiyo.Naftiisa xaqeeda wuu siiyaa. Xaqa ay u leedahay in ay tiiraanyooto,murugooto,catawdo,tawaawacdo,oydo,lababogala yso,oo jiif iyo joogba ay xamili weydo kama duudsiyo ee fursaddeeda wuu siiyaa, habeen oo dhanna naftiisu shaqadeedaas way haysataa. Marka waagu uu dillaacana masuuliyadaha kale ee nolosha ka saaran ayuu xaqooda siiyaa.

Alla gocashoy gurigaa ba'!

Ma masiibadan ayay waayuhu iila soo giblanaayeen?!

Haddii aan ka sii gaashaaman lahaa ma ciil ayaan qabi lahaa?!

Haddii aan maalin uun ku fekeri lahaa in sidaasina ay dhici karto ma aniga oo isdhigtay ayuu danabkan i kala dhantaalay igu habsan lahaa?!

Waanigaa kubka iyo bawdadaba ka jabay ee kacaakufka ka bixi la'!

Marka aan murugoodo isaga oo qudha ayaan garabkiisa ku tiirsan jiray oo inta aan waxa i gubaýa u taanataaneeyo aan garabkiisa ku ooyi jiray,iminkana waanigaa crka iyo dhulka dhex maraya ee dhan aan u jeedaba garan la'! Waan jeclaa!

Wallaahay waan jeclaa!

Qalbigayguna si buuxda ayuu u doonayay, caqligayguna si buuxda ayuu ugu qanacsanaa!

Waan isku halleeyay oo dhankiisa kalsooni buuxda ayaan ka qabay!

Alla maalintii aan ku bartay barako ma aanay lahayn Deeqow! Tolow imisa xabbo ayuu gubay!

Haddii aan intaas uun ka soo dabiibi lahaa intiiaanan ka 800googoosan malaha wax dhan ayay ahaan lahayd!Oo maxaa iga galay ma isaga ayaa caano ii lisay?!Isaguba sidi an ugu lisay iguma anu hanbayn ee maxaa iga glay gubashadiisa?!

Laakin way i dhibaysan aniga oo aan akayn in aan ogahay isaga co murugo meel la fadhiya in uu baakidho gubayo!Maxay nimanku culaysyada nolosha balwadaha May sidayada qof ay ku kalsoon yihiin ugasheekeeyaan ha nefisaane?!Laakiin waa niman, waa noocad naga duwan, ugaga dhuuntan horta?! waayohooda u gaarka ahna way leeyihiin.

Markaas uu murugoodo am xaalku uu ku adkaado ayuu Baakidhka dhiniciisa ayaa iyada oo Soomaali ah loogu meel cida ah sigaar la fadhiisanayaa, haddana ma qoray:"tubaakadu aad ayay u waxyeellaysaa caafimaadka!" qabatimayo.Imisa jeer ayaannu dabeecaddiisaas darteed Haddana way cabbayaan!isugu dhacnay?!

Horta nimanka maxaa ka si ah?!

Laakiin annaguba sownaga maykaabka wejiga naga dilaya marsanna,kabaha sookalka (cidhibta) dheer ee muruqyada lugaha na daaliyana ku xarragoonna,wakhtigayaga ugu badanna ku bixinna u-firfiirsiga dadka iyo kutirikuteenta la isla dhex marayo?! Sownaga qalliinka bilaastiga ah samaynna annaga oo keliya qurux uun raadinaynna?!



Qolo waliba waayeheeda ayay leedahay.

Malaha Deeq sidan oo dhan uguma aanan murugoodeen haddii aan ogahay in aanu sigaarkaas weheshanayn marka uu murugoodo?!

Horta maxaan ugu werwerayaa ninkaas dilaydareenkaygii ugu qotada dheeraa ee laabxaadhnaanta ahaa?!

Laakiin maxay sigaarka heshiiska ula yihiin?!

Tolow ma in nooca oofinta ah ee ay doonayaan ay ka helaan sigaarka in ka badan inta ay dumarka ka helaan ayaa, waa kuwa ku tiraaba: "oofinta ugu mudani waa ta ka dhexaysa sigaarka iyo

sigaaryacabka,oo sigaarkuna dartii ayuu u gubanayaa, sigaaryacabkuna dartii ayuu u dhimanayaa?!"

Tolow ma waxa ay doonayaan in aannu dartood u gubannosi ay dartaya ugu dhintaan?!

Mooji!

Mise tolow waa in haddii ay bartaan aanay deyn karin,waa kii Mark Twain-ba lahaa: “waxa ugu fududi waa in sigaarka la iska daayo oo boqollaal jeer ayaan iska daayay'e?!"

Tolow ma saaxiibka ay ugu kalsoonida badan yihiin oo ay dhibkooda dareen aamus-hadal ah kcula wadaagaan ayaa?!Illaa hadda ma aanan fahmin!

Marka ay murugaysan yihiin sigaarku macne kale ayuu la leeyahay.Doodo falsafadeed in ay kula jiraan ayaad dareemaysaa.

Ilaahayow Deeq ka afqabo inkaartaas!

Horta maxaa iga galay ninkan aan isu dagaalayo dartii? Qaybtay ayaa u werweraysa,qaybtayna way ka tashanaysaa!

Waa qalbi xiisoonaya iyo caqli xanaaqsan oo heshiin kari la'!

Waxa ay ka fekeraysaa sida marka ay xaaladuhu ku adkaadaan ee wax uu ku xalliyo uu waayo uu dhoollacaddaynta isugu dhaafin jiray!

Waa mid ka mid ah habdhaqannada ragga ee aanay dumarku fahmin,ragga laftoofuna aanay fahanka buuran ka haysan sababta ay u sameeyaan,laakiin haddana marka ay quusta gaadhaan ay sameeyaan!

Ninka waxa ku abuuran ficiltan iyo loollan uu nolosha kula jiro,mar walba in uu ka adkaado oo aanu u liicinna wuu ku dedaalaa. Waa sababta aanu culaysyada nolosha sida gabadha ugu dhibsan. Laakiin marka uu dareemo muquunin,qahri, uu dareemo in talo ay ka baahday,uu arko in duruufuhu ay ka adkaadeen, uu ka bogto in haba yaraato'e wax uu qabtaa aanay jirin, keliya wuu dhoollacaddeeyaa ama uu qoslaa!

Ninku dareenka ugu qadhaadh ee uu dhadhamiyaa waa muquunsanaanta, in uu arko xeelad iyo awood midna waxa dhacaya in aanu ku lahayn. Waa marka uu xal kastaba ka quusto, in uu dushaas dhacdadaas ka arko mooyaane wax uu qabtana uu garan waayo.Marka la leeyahay rag ciil cadaab ka dooray, ninku waxa ciila si kasta oo uuu maarayn karaba wuu u maraa oo waata

la yidhaahdaba inan rag wax aan naftiisa ahaynba maaree, xataa haddii uu ku cadaab mudanayo

xalkas wuu ku dhaqaaqa, laakin marka uu kaasna waayo keliya wuy dareemayn aqbalaya laakiin xanftiisa isdhaafinaya.Illa hadda waa halxidhaalayaasha Cilminafsigu aanu weli sidamuquunsanaan waafiga ah uga jawaabin sababta ninku marka uu dareemo uu u qoslo!

Qosolkaasi waa ilmada ugu qulqulka badan ee ninka!Waa qaylada ugu dheer ee uu ku cataabo!

Waa ganeecada ugu weyn ee uu ka qaato masaladaas wax intaas ka hadhay oo uu ku khasaarayaa in aanay jirin!Waa burburka nafsiga ah ee uu gudaha ka dumay oo uu dahaadh adag nolosha dibedda uga samaynayo si aanu isu kabaraacin!

Waa marka uu ninku ugu dugaagsan yahay ee wax kastaaba ay ku riixayaan wax kastaba in uu u burburiyo sida uu gudaha uga burburay,waana marka uu isu arko looma-ooyaanka ee wax daba-ka-werwer ahi aanay ku hadhin,wax uu dhawranayaana aanay u hadhin!Waa hadalka xeesha dheer ee uu Dostoevsky isaga ooqodobkan cabbiraya uu odhanayo: "xaggee ayaynnu joognaa hadda?! Gunti miyaa?! HHaddaa ma aanu hadhin wax aynnu khasaarnaa!"WVaxa uu ku qancayaa wixii uu ka baqayay in ay dhaceen, welina uu ka nool yahay, karaar cusub iyo horusocod kale oo eber uu ka bilaabana uu ku samaynayo,karaarkaasna waxa ku lammaan dugaagnimo iyo awood-isbidis uu ka werwer qabo muquunsanaantan iyo burburkan oo kale in uu gondaha la galo, cid kasta oo ka carqaladaysana sidii awr qooqan oo cargaagtamaya uu baaddilka ku qaato! Jababka noocaas ah ee ninka heerkaas gaadhsiiyaa waa kuwa sheekooyinkiisa danbe iidaanka u noqda ee la yidhaahdo rag bi'ii ka sheekee dumarna badhaadhohood.

Waa sababta uu nebigu Ilaahay uga magangelayay in aanu rag muquuniya ku sababin!

Ka warran dhibaatada uu nebigii ka sii ducaystay?!

Idil waxa ay ka werweraysaa marka uu iyadii xog iyo xaalba ka waayo, ficilkiisaas xunna marka uu ogaado uu goomamadiisa dhex muquurto, in uu sigarkaas uu gubayo iyo qosolkaas muquunsanaantu ay u sababayso ka dhexaynayo.

Way og tahay in labadaasba ay hubaal tahay in ay ismudanayaan Deeq, waxana ay kala garan la'dahay ninkaas in ay u murugoonayso isaga iyo in ay ka murugoonayso waxa uu u geystayl

Waxaas oo cataw iyo calaacal haween ah ayaa laabta Idil Cabdillaahi ka hugmaya. Waxa ay falanqayn iyo falamaguris ku samaynaysaa sida ay waxani ku dhaceen, iyada oo si walba in ay cudurdaar ugu raadiso isku deyaysa. Dhacdadan lafteedu cudurdaar ma laha oo dhacday, ee waxa ay dhallil u raadinaysaa noloshoodii ay ku bahoobeen ee ka dhexaysay.*Ma jacaylka ayuu jilayay oo aan qalbigiisa u dbaadbacsanayn?!*

Ma khayaali ayuu kula metelayay?!

Ma waanu aaminsanayn jacaylkaba?!

May.../May.../May.../Ma waanu ku jeclayn ee wun ku maaweelinayay?!

Xaasba...!

Ha ka yaabin...!

Ninku waa Deeg!

Lafihiisa oo cadcad ayay garanaysaa.Xataa waxa uu jeclaysanayo iyo waxa uu diidayo indhihiisa ayay ka akhrisan jirtay.

Suuragal ma aha waxaasiba!

Dareenka aamin-ahaanshaha iyo dareenka baqaha ayaa laabteeda ku hirdamaya.

Ishii amniga dareensiinaysay waa tan baqaha ku ridday.

Intii aanay isbaran ka hor sas ayay muddo nimanka ka qabtay. Intii dugsiga sare ay ku jirtay waxa xidhiidhkeeda isku deyay dhawr wiil,laakiin waxa awooday in ay muddo haasaawaan Bashiir-Baaxeer.

Waxa uu ahaa wiil hiddaha (culture) Galbeedka aad ugu janjeedha,ilbaxnimadoodana ka dhinbiil qaata. Walow aanu aqoon badan iyo waaya'aragnimo midna u lahayn falsafadaha iyo saykoolojiyadaha Galbeedka, haddana intii uu ka gaadhayay haradooda ayuu dacal ka dhurtay. Naanaystan Baaxeer isaga ayaaba la baxay, waana Ilbaxnimo.

Lafteedu markaas ma aanay lahayn caqliyaddan xog'ogaalka ah ee sidan nolosha u fahantay, waxana ay ku jirtay marxaladda wax kasta oo jinsiga kale ka yimaaddaa ay qofka xiisegeliyaan.Si

kasta oo ay uga heshayba laabteeda wuu u dhaadhici waayay,isaguna ma aanu moogganayn ee wuu isku cidhiidhyayay qalbigeeda,

u1 dhex qulqulayaa in uu dibedda u soo tuuro ayaa abaal u ahayd.Oo maxaanay abaal ugu ahayn, qof doonaya qof kale dookhisa in derbigaas uu jabsaday derbiyada ka gadaaleeyaa

ma caabbiyayan?Gashaantinimada ay dheddigaanshaha la hanaqaadday ayaa u sababayay in ay haasaawe iyo kaftan aan badnayn la wadaagto Baaxeer marka uu wicitaan nafta kaga soo jaro, laakiin aakhirkii way iska soo taagtay.

Oo ma dheddig ayaa wax aanay doonayn lagu khasbaa?!.Xeerarka raganimada ee cid ku heshiisay aanay jirin haddana la isku raacsan yahay ayaa ninka u sababa in uu wax badan xeeriyo, qadafyo badanna uu aqbalo, rabitaankiisa shakhsiga ahna ay wax waliba kala mudnaadaan,laakiin gabadhu kadeedkaas waxa ay kaga badbaadday in ay dareennadeeda daacad u tahay. Wixii ay diiddo laguma karo, wixii ay doontana lagama karo. Gabadha qudha ee la marsiiyaana waa ta aan fahansanayn sirta dheddigaanshaha ee wax kasta oo ay samaysaba loogu cudurdaarayo.

Dheddigaanshuhu waxa uu leeyahay dabci haddii aad qancisana ku dhisanaya, haddii aad dayacdana dhaawacaas aan illaawayn ee kuu haynaya. Kama maaranto in aad hadba sida ay u socoto ula tallaabsato.Wiilkaas muddo aan sii ridnayn ka dib warkiisa way laabtay. Walow uu ka sii daba cataabayay, marar badanna ay dhankiisa denbi ka dareemaysay,laakiin marnaba muhiimad lama aanu yeelan.

Iyada oo qiimaynta aamusan ee dumarku ay ragga sida joogtada ah ugu hayaan khibraddeeda gaarka ah ka diyaarinaysa ayay Deeq kulmeen, kolkaasuu nolosheeda ka noqday kii ugu horreeyay ee macnaha raganimada ay raadinayso baray, iminkana waa kan noqday kii ugu danbeeyay ee ay rag baabkooda ku xidhay, walow aanay nin deyneyn, haddana wixii ay la wadaagi lahayd oo dhanba ay candhuufteeda dib ula liqday.Dhacdooyinku sidooda muhiimadda la siiyo uma laha ee cidda ay kaaga imanayaan ayaa muhimadda dhabta ah ee ay kula yeelanayaan u samaysa.Dhirbaaxada askari ku xidhaya kaaga dhacda iyo ta

saaxiib aad u laabfurnayd kaaga dhacaa magaca ayuun bay wadaagayaan.

In kasta oo jugtan ay si joogto ah dumarku ula kulmaan, haddana cidda ay kaga timi in ay Deeq tahay ayaa caadifaddeedii caws dab la sudhay ka dhigtay, dheddigaansheheediina injir bacad loo wadhay ka dhigtay,raaxadii ay filanaysayna raran adduun ugu beddeshay.Haddana si kasta oo ay qalbiga uga jibaadayso (taahayso), Deeq waa tusaalaha raganimada ay uga halbeegga qaadato.Qalbigeedu ma awoodayo in uu booskii Deeq nin kale geliyo,afkeeduna nin kale kuma odhan karo erayadli dhadhanka lahaa ee ay isaga kula haasaawi jirtay.

Xataa erayadii dabeeciga ahaa ayaa isaga soo xasuusinaya maadaama wax kasta oo ku saabsanba ay jeclayd!Waxa maankeeda ka guuxaysa, tolow sidan aan u dhaqaaq-joogsanayo ee noloshii ay iiga dhabaqday isagiina kadeedkan ma ila wadaagayaa?

Laakiin waxa su'aashaas ka daba guuxaysa jawaab ah, maya oo waa Deeq,waxana u dheer in uu nin yahay!Iswaayitaanku muxuu dumarka ragga ugaga saamayn badan yahay?!

Ninku waa caqlaani, si kasta oo jugaha caadifadeed ay qalbigiisa u wiiqaanna,caqligiisa ayaa noloshiisa kale kaga adkaada. Halka gabadhu ay mar walba caadifadda heshiiska la tahay,si kasta oo caqligu uu baraarug isug dayana ay caadifaddu cidhibta u saarto.Sidaas ayay riiqda iswaayitaanku dumarka ugaga saamayn badan tahay ragga, heer ay gabadhaasi derbiga ay eegtaba wejigiisii ka dhex arkayso, dhawaqii ay maqashaana uu codkiisii ula ekaanayo.

Yeelko'e xeedho iyo fandhaal kala dhace, waana in noloshan ku ugub ay guntida u gaabsataa nabar kastaaba ha hayo'e.

Waxa iyada oo hogol gu' curanaya ugu soo horraysa oo la wada saadaalinayay la moodo u dul heegaysay xasuusta galabtii xodxodashada iyo haasaawaha badan markii uu ku asqaysiiyay ay doodda gelisay si ay isaga yara mashquuliso. Galabtii ay ka waraysatay jacaylka laftarkiisa fekradda uu ka haysto ee inta ay wada falanqeyeen ay xogaha badan isku weydaarsadeen. Galabtii ay sii caashaqday ee caqligeedu uu dhankiisa sida aadka ah ugu janjeedhsaday.Waxa mar walba hor yaalla codkiisii ay ku murug-bixi jirtay iyo gacan-ka-sheekayntiisii ay ku dhaygagi jirtay.

Idiley;labood iyo dheddigoodba maayado khayaali ah iyohirar ay sawireen suugaanyahanka mala'awaalka ku xeesha dheer ayaynnu ka shidaal qaadannaa marka ay noqoto in aynnu jacaylka dhankiisa jalleecno. Iskuma dayno in aynnu sida uu yahay u baadhno ee waxa aynnu ka dhex raadinnaa mala'awaalka abwaannada iyo khayaalka heesaha,waana waxa ugu badan ee hummaageeyay jacaylka,marinkiisii qummanaana ka habaabiyay.

Hummaagayntaas jacaylka ee ehlu suugaantu waa in weyneysay oo gaadhsiisay heerlagu sigto in la caabudo, markii daraaddii wax walba loo sameeyay, daraaddii hadalka loo yidhi, daraaddii nafta loo kadeeday,ee isaga uun laga sheekeeyay, waxa uu qofku waaberiga ilaa gabbaldhaca ku fooggan yahayna uu noqday jacayl uun.

Sanàmka qarnigeennan la caabudo ee ugu weyni waxa uu noqday jacayl,iyada oo diintiisaas cibaadadeedu ay tahay in wax kasta loo dayaco jacayl dartii, wax kasta loo sameeyo jacayl dartii, wax kastana la qarribo iyada oo la aaminsan yahay in ajar iyo xasanaad diintaas jacaylka lagaga helayo oo caabidnimada derejo kore laga gaadhayo, qofka iimaankaasi uu idinka dhexeeyana agtiisa aad weli ka noqonayso!

Halka qaar kalena ay maqaamkiisii iyo maamuuskiisiiba la degeen ee ay ka dhigeen cadaawe colaad horkaca iyo nacab nabarro aan bogsan geysta,ay ka dhigeen dhiillasideen dhaawac iyo xanuun dabada ku wata,ay ka dhigeen Bermuuda ciddii ka soo ag dhowaataba liqaysa oo gunta hoose geyneysay oo aanay ciddaasi ka soo kabanayn waxyeelladiisa!

Labadaas qolo dhexdooda ayuu ku dayacmay jacaylku. Labadaas uu midina ka dhigay cadawga qarniga, ka kalena uu ka dhigay macbuudka qarniga ayaa jacaylka seejiyay jidkiisii qummanaa, waxtarkiisiina innaga ina seejiyay.

***

Deeqow;adiguna aniga ayaad wax walba i seejisay!

Waanigaa dagaalka iskula jira ee aniga oo dhammina ku doonaya,aniga oo dhammina ku diiddan!

Waanigaa dhankaaga u soo ordaya,haddanadhankakalekaaga si firdhanayal Waanigaa ku raba ee kaa rooraya!

Waanigaa qalbigayguna uu kuu ooyayo,caqligayguna uu ka irdhoonayo!Waanigaa kugu faanaya ee haddana kaa figsan!

Haamadda oo ku diiddan ayaan kuu hamuumayaa!Dakharki aad igu dhufatay ayaan dhaymihiisa kaa deyayaa,hadana danqashada xasuustaada ayaan nabarkaas kala cararayaa!

Deeq:

Hahankaas xagjirka ah ee labada daraf ee isdiiddan kala jiraa waxa uu meesha ka saaray in si dhow oo dhexdhexaad ah oo dhab'abbaar (objective) ah loo fahmo jacaylka. Intii ugu badnayd bulshadu waxa ay u qaadatay magac qurxoon oo loogu gabbado danaha la kala leeyahay,xoogaa xiise ahina ay weheliyaan, xunbo iyo xiisena way dhacaan'e aan sii waarayn. Il silloon ayaa markaaba lagu eegay. Waxa halkaasna ka soo daahirtay fekrad ugub oo ah in wax jacayl la yidhaahdaa aanu jirinba ee uu ku eg yahay khayaalkaas mala'awaalka ah ee ay abwaannadu suuraysigooda ka sawirtaan, awoodda cabbiraadeed ee Ilaahay uu hibada u siiyayna ay ku afshaxameeyaan.Waxa uu gaadhay heer magaca jacayl lala xidhiidhsiiyay hoosayn iyo cid la yasayo uun. Heer loo fahmay karaamada,qabka,anafada,iyo cisiga in uu liddi ku yahay.Heer xataa kuwa xiisaha badan dareema ee jacaylka aragtiyahaas khayaalka ah ka haystaa marka ay ciddaas kale u cataabayaan ay shaadhka aadamanimada, karaamada, xishoodka, aayo-kafekerka, iyo maamuuska meel iska dhigaan, maadaama ay si dadban u aaminsan yihiin in aanay labadaasi meel wada galin ee aad ama karaamadaada dhawranayso oo qalbiga aad dhagax saarayso, ama aad qalbigaaga nafis siinayso oo waxa haya aad ka soo hurgufayso, karaamada baas yeelkeed'e.

Hore ayaa loo yidhi, aadamuhu waa u cadaw wixii aanu aqoonin!Saddexdaas jaad ee bulshada ah ee midiba uu jacaylka qar kala dhacay,

mid ka dhigay sanamka la caabudayo waayahan,mid ka dhigay cadawga iyo nacabka ay tahay adduunka in laga qabto, iyo kan jiritaankiisaba aan aaminsanayni, waa saddexda jacaylka maqaamkiisa dhulka la simay ee meel la degay iyo digaabaasaha ka dhigay!

Iyaga oo mooggan xaqiiqada jacaylka iyo johoraddiisa dhabta ah ayay dameen in ay fekerkooda ku saleeyaan jacaylkaas ay aaminsan yihiin,illeen marinkiisii qummanaa uma aanay marine qaw iyo qarna way kala dhaceen, ka dibna waa kaas waxyeellada mooyaane waxtar la sheegaba laga waayay.

Waxa saaxadda ka baxay jacaylkii ruuxiga ahaa ee shamaciisu uu qalbiga ka oognaa, waxana booskiisii galay xiise maaddi ah oo muuqaalka guud aan dhaafsiisnayn. Xiise bilistiina legga iyo laabta oo ay giigiijiso ay ku cabbirayso, labkii bilis-bi'iyaha ahaana labeenta hayntiisa uu ku muujinayo. Xiise u midi jeebkiisa ku xoogsado midina jidhkeeda,iyada oo waxaas oo dhan magaca jacayl loo adeegsanayo!

Haddii goor hore fahan ballaadhan jacaylka aynnu ka heli lahayn heerkan maanta ma aanu soo gaadheen.Maadaama aanu maaddi ahayn ee uu qaybta ruuxiga ah ee nolosha la xidhiidho,gaal iyo Muslin,caddaan iyo madow, dadka adduunku way ka siman yihiin hadalhayntiisa iyo suugaanta ay ku cabbirayaan, qoloba falsafadda ay nolosha ka aaminsan tahay iyo qaab-nololeedkooda ha ku saleeyaan'e.Suugaanta adduunku afka ay doontaba ha ku hadasho'e waxa ay isugu biyo shubatay jacayl... jacayl...jacayl!

Ummadaha maanta nolosha iyo aqoontaba laga tixraaco waxa ka mid ah Giriigga oo ahaa ilbaxnimooyinkii adduunka ugu horreeyay,welina raadkoodii lagu dheggan yahay. Jacaylka waxa ay ka aaminsanaayeen in bilawgii adduunka la abuuray noole badhna uu nin yahay badhna gabadh, noolahaasna dhammaystirnaantiisa awgeed ay qab iyo islaweyniyi gashay, ka dibna uu kibirkiisii gaadhay Ilaahyadii,cadhadiina ay Ilaah Zeus ku kelliftay in uu laba qaybood oo nin iyo gabadh ah u kala jaro oo adduunka uu ku kala filqiyo, laga soo bilaabo maalintaasna badhba badhkii kale ayuu baadigoob ugu jiraa,raadcayntaas ayaana loo yaqaannaa jacayl!

Falsafadda ay ka aaminsan yihiin jacaylku waa taas, waana fasafad u janjeedha dhanka maaddiga ah. Waa habfekerka iyo falsafadda

waayeheennan lagu saleeyo jacaylka markafilin laga jilayo,riwaayad laga metelayo,sheeko-faneed laga gorayo,maanso laga tirinayo,amaud jidh raadinaya!jidhka iyoruuxda.Taas liddigeeda; Islaamku waa isu1-dheellitirka Jacaylkeennu waa ruuxi,gudashadisuna waa maaddi jidhka ah. Wa si jidhki la isugu xalaaleeyo oo maaddi ahaan jacaylkii loogu guto.

raadsado gof uu ku xasilo ka-ag-dhowaanshihiis.Qof uu ku raysto in uu heer ka gaadho ku garab gala oo rafiq dhabbaha nolosha ee adap la raaca u nogda. Qof ay adduunka uga wada shaqaystaan sidii ay jannada ugu wada caweyn lahaayeen. Qof ay nolol qoys oo naxli la'wada unkaan oo labadooda jidh ay xalaal ku laacdamaan.Innaga jacaylkeennu waa ruuxi, jidhkuna waa aaladda jacaylkaas ruuxiga ah maaddi loogu beddelo ka dib marka la gaadho heerkiilagu caddayn lahaa mugga jacaylkaasi uu le'eg yahay iyo midhaha uu dhalayo qaabka maaddiga ah.

Jacaylku waa tamarta naftau horseedda in ay wanaag samayso,galmada jidhkuna waa fulinta rabitaankii jacayl oo jidh iyo ruuxiba ay u oomanaayeen in ay ka dhabeeyaan, ruuxduna waa ilaaliyaha iyo indha'indheeyaha guud ee kala qeexaya hadba qaabka loo marayaa in uu saxan yahay iyo in uu siloon yahay.

,Haddii ay dhacdo in ay jacaylka iyo galmadu ruuxda ka xadhko furtaan,xumo iyo samo ma kala saarayaan ee sidii ay ujeedkooda ku gaadhayaanba way falayaan.

Haddii uu jacaylku gaarkiisa xadhkaha u goosto oo ruuxda iyo jidhka uu ka xadhko furto, sidii Qays iyo Cilmi ayaa waalli iyo miyirqab mid aad tahay cilinkaaga la saari waayayaa, oo waxa aad doonayso iyo waxa aad diidayso aan la kala kasayn,rabitaan aadan gaadhayn iyo qof dhintay ama qoys dhistayna aad u ooyaysaa.Haddi ay galmadu ruuxda iyo jacaylka ka xadhko furatana adiga iyo doofaarka ayaa sinmaya, oo wixii kuu raaxaynayaba waad ku riyaaqaysaa!

Haddi saddexdaasmisaan ee isu haya higilka noloshaada jacayl ay kala xadhko furtaan dhibbanaha keliya ee dhillo waliba ay ku habsanaysaa waa adiga uun.

Innaga jacaylkeennu waa ruux ruux jeclaatay, waa qof in aad shakhsiyaddiisa,anshaxiisa,akhlaaqdiisa, dadnimadiisa, damiir-wanaaggisa,habdhaqankiisa,xishoodkiisa,xildhawrkiisa,sharaftisa,iyo suubbanaantisa ku jeclaato, iyada oo quruxdijidhkana qaybeheedii aad danaynaysay aanay meesha ka maqnayn. Iyaga (gaalada)jacaylkoodu waa in aad qof ku jeclaato jidhkiisa dhiibsan,dhexdiisa dhuudhsan, kashkiisa kuusan, badhidiisa buusan, sii-socodkiisa uu gacanta saydhayo, soo-socodkiisa uu labaca lulayo ee uu dekaynayo,tallaabadiisa soo-jiidhashada galmeed leh, sinniqsigiisa uu hadba sal qaadayo, xoogaaga jeebkiisa ka buuran, hadba gaadiidka uu wato, iyo wixii maaddi ahaan aad qofkaas uga dheefayso, in kasta oo aanay qodobbadaas ruuxiga ahina ka wada maqnayn.

Innaga jacaylkeenna Idiley waxa u kala soocan hilinkii iyo higsigii.Waxa u kala soocan higsigii ahaa raalli-ahaanshaha ruuxeheenna iyo isku-xasilaadda qalbiyadeenna,iskuqanacsanaanta nafeheenna iyo isla-dhaqanka suubban, iyo hilinkii loo marayay ee ahaa in erayo jimcoon (debecsan) oo jeefaaf (naxariis) leh lagu cabbiro,jidhku marka uu isu xalaal noqdo ee midkeenba uu u arko in uu ka kale kaafiyayo uu dhanka shahwada kahaqabtiro oo godolka ceegaaga uu gaawe kaga maalo, iyo in nolol xaasnimo oo wada-dheel, wada-kaftan, wada-haasow,iyo wada-damaashaad ah aynnu wada qaadanno.

Dhibtu waxa weeyaan in jacaylkaas Islaamiga ah aynaan goobaha waxbarashada ku arag, inta diin-aqoonka inoo ahina aanay haabkiisaba haynin, si faahfaahsan, falanqaysan oo falsafadaysanna aanay u falamagurin... ama aanay awoodinba malaha in ay u balbalaadhiyaan.

Falsafadda maanta jacaylka loo sameeyay ee ay gaaladaasi calankeeda siddo ee maaddiga ahi waxa ay dhigaysaa in jacaylkuba uu yahay israadinta labka iyo dheddigga, waxana aad ka garanaysaa weydiimaha ugu badan ee la iska weydiiyo:Sidee lagu gartaa qofka ku jecel?!

Sidee qof la isu jeclaysiiyaa?!
Sidee qof kaa sii jeeda loo soo jeedsadaa?!

Sidee lagu kala gartaa in aad qof jeceshahay iyo in kale?!Sidee qof jacaylka loogu bandhigtaa?!

Sidee qof loo jeclaadaa?!Waxa uu qofkii u han weyn yahay oo uu u ham iyo dig leeyahay in uu qof jinsiga kale ah uun helo,laakiin iskuma deyayo in uu baadho oo udubdhexadka u ah, marka qudha ee uu fahan iyo xog ka qaataanawaa marka uu ka akhriyo sheeko-faneed ama uu flin ka daawado,amaba uu hees dhegaysanayo.

Idil:Afar sano oo aannu isku cindanayn waxa uu i baray xidhiidh milge iguma anu soo fidinin. Sharaftaydu waxa ay agtisa ka ahayd ta walaashii. Habeen arrinkan aan hadda kaga soo go'ay wax ku saabsani nama aanu dhex marin,umana aanan tuhmin.

Jacaylku agtiisa muqaddas ayuu ka ahaa, qofka uu jecel yahayna muqaddas ayuu ka ahaa. Arrimaha aanu ka kaftamin ayay labaduba ku.jireen. Sir iyo caadba taas waan uga daalacday. Ilaa hadda waxa aan xidhuidhsiin karin la'ahay shakhsiyaddii Deeq iyo falkan aan kasoo-kabashada lahayn!Ma biraankigii la sheegi jiray ayaa waxan dhacayaa?! Wuu ka weynaa Deeq nin aan sinbiriirixasho sidan ah ka fisho!

Sida uu u yaqaannay jacaylka,sida uu1ii baray,sida uu ficil iyo qawlba iigu muujiyay, sida uu naftayda ii jeclaysiiyay isaguna uu isu kay jeclaysüiyay, kaalinta aan agtiisa ku lahaa, iyo sida uu kashayda u makansaday... waxaas oo dhammi way ii diidayaan in aan rumaysto waxan i hor yaalla,laakiin haddana waa xaqiiqo aan gacanta ku hayo oo aanan sinaba isu diidsiin karin, sinaba aanan cudurdaar ugu samayn karin!

Sowkii igu yidhi: "jacaylku waa unugga ay noloshu ka biqlanto, mar kasta oo la wanaajiyo nolosha ayaa wanaagsanaanaysa, mar kasta oo la xumeeyana nolosha ayaa silloonaanaysa. Marka jacaylka sidiisa saxda ah loo adeegsado ma noqonayo sanam la caabudayo, mana noqonayo cadaab iyo cudur in laga takhaluso mudan, mana noqonayo wax aan jirinba oo la dafiro, ee sirtu waa qofba sida uu adeegsado,halbeegyada uu ku qiimeeyo, iyo hilinka uu u maro.”

Sowkii igu yidh: "astaamaha ugu badan ee aan kugu jecelahay waxa hormuud u ah qaneecadaada aad ku qanacsan tahay wvixii uu Ilaahay kugu galladay, iyo in aadan inannimadaada waxna dhaafsiisan oo sharaftaadu ay kaala weyn tahay waayitaanka qof aad jeceshahay?"

Sowkii igu yidhi: "sababta aan sidan oo dhan kuugu jeclaaday waa in aad ii dhasho gabadh sidaada oo kale ah. Gabadh wax walba hortood

sharafieedu ay muhim u tahay oo aan jacayl iyo adduun midna ku doonayo in aan dhalana wa maalinka uu kalgacaylkagu labrayd xulay sida aan u badinayo.”Sowki igu yidhi: "marka aad u firsato dhammanba siyaabaha ay u marto, waxa aad ka dareemaysaa in ay maaddiga, jidhka iyo hantidanafsaddii iyo qaneecadi ku wareegayaan ee aanay rooxaaniyaddii dadnimada

ka shidaal qaadanayn." Aaway rooxaaniyaddii iyo qaneecadii naga

Ninkii sidii aan ogaa jacaylka u yaqaannay maxaa dhexeeyay?!Maxaa asiibay Deeq?! haleelay?!Miyaa laga mooro-guuriyay wvixii oo

gacaltooyo ahaa?! Miyaa la raadqaaday mise waa la falay?!Ma sixir iyo sawaabid ayaa loola

Ninkii sidii aan ogaa jacaylka iigu sharraxay!habeen-dhaxay?!

Hoh iyo caku!

Waxa jiidhay laydh xasuuseed oo xanbaarsan galabtaas ay jacaylka lafagurayeen sidii uu u sharraxayay.

Deeq:

Marka uu qof qof kale la dhaco habdhaqankiisa ama hannaanka abuurkiisa waxa uu dhaadaa in uu baahi u qabo helitaankiisa, baahiduna badanka aragti taban oo dhanka xun u janjeedha ayay gudbisaa, oo waan baahanahay' garaadku waxa uu u fasirtaa 'dhibaato ayaa helitaanka arrin iga haysata', balse baahidan uu qofkani qaadayaa waa mid iyadu halkeeda ku wanaagsan oo uu ku faraxsan yahay in uu yeesho.

Waa baahi uu qofkaasi u qabayo in qof kale noloshuisa oo dhan iyo waayo iyo waxsoosaar wixii uu lahaaba uu ku aamino oo uu gacanta ka saaro.

Waa baahi uu qofkaasi u qabo in uu u furo qofka kale albaabo aanu weligii cid kale u furin, arrimo aanu weligii cid kale la wadaagin, iyo odhaaho aanu weli cid kale u quudhin ama aanu kula dhicin in uu ka hor yidhaahdo.

Waa baahi uu qofkaasi u qabo in uu siiyo sirihiisii aanu waalidkii dhalay iyo walaalihiisa la dhiigga iyo dhaqanka ahaa u quudhin in uu la wadaago.

Waa baahi uu u qabo in uu qof kale dharka ku hor dhigto oo jidhkiisa tan iyo maalinkii uu dab ka baydhay uu qarinayay uu hor wadho... waa ka dib marka ay guri xalaaleed isku hantaan'e.

Baahidaas waxa aynnu u bixinnay magac ah Jacayl.

Iyada oo ay sidaas tahay ayay haddana in badan o0 bulshadeenna ah maankooda ku soo horraysay falsafaddaas ay Giriiggu jacaylka ka qabeen ee ah in uu jidh jidh kale raadsado in uu yahay jacaylkuba, haddii ay labadii jidh is'helaan oo ay wada hawshoodaanna meeshaba wuu ka baxayaa, kolkaasay isweydiinayaan: "jacaylku ma jiraa mise waa mala'awaal?!”

Jacaylka Idiley shanta dareenwad midna laguma dhaado oo waa macnawi, wa wax aanay garan karin garaaddada maaddiga ah ee wax walba maaddiga iyo astaan la taaban karo in uu yahay uun ku garta ee ruuxda iyo macnawigu uu ka maqan yahay.

dinta u ahi waa sayriska.Saynisku waa waax ka mid ah agoonta,balke dareenwvad lagu dhadi karo, ee kama hadli karo wax la xidhidha farxad, xanaaq, qaneeco, damac, raalli-ahaansho,ka-biyadiid,samaxad,iyo aargoosi midna. Waxa uu ka hadlaa arrimahaa ruuxiga cabbiro ee jidhka dhex mara iyo siyaabaha ay u shaqeeyaan uun.Marki ay jihadas aan qummanayn golyahaasi jacaylkii ula kaceen dhegta ayaa laga cabbayaa xanuun ayuun baa looga dhacaaye. Markiay ayay dhibatadi soo gaadhay oo dhan jacaylka u tiriyeen oo ay ku ladheen, waxana ay ku sheegeen in uu yahay: kadeed, rafaad,silic balanbal,dhibaabo,hagardamo,oondiid,oon,iyo olol nafta omos geliya,cid kasta oo jacaylka iyaga dhabbohoodaas la martayna dhibtaas way la dhadhamiyeen oo cabashooyinkaas qaar la mid ah ayaa ka soo yeedhay!

Ka dib badiba dadkoodii way ka aaminbaxeen oo waxa ay ka aamineen in aanu jirin, intii aaminsanaydna waxa ay u arkeen in uu yahay cadaw waxyeello badan oo noloshooda baabi'iyay. Balse jacaylka jiritaankiisana tuhun kuma jiro, cadaw iyo nacbna ma aha,ee wax kasta oo jidkoodii jid aan ahayn loo maro wax aan iyagii ahayn ayaa looga dhaadhacaa. Waxa ay ka leexdeen jacaylkii xaqaahaa ee uu Ilaahay adduunka naxariista ugu soo dejiyay, markaasay jidkii ay qaadeen uga dhaadhaceen booraan hadimo oo uu shaydaan u qoday:

"Wax aqoon ah uma laha ee waxa ay raacayaan male,maluhuna xaqa waxba kama taro."

54

Waxba Idiley yaynaan ku sii tiiqtiiqsan falsafadaha dadkaas ee marinhabaabiyay jacaylka iyo wax kasta oo wanaagsanaa oo noloshan lagu dhadan jirayba'e, ina keen diinteenna suubban. Inoo keen Quraankeenna sharfan iyo xadiiskeenna maamuusan.Jacaylku waa dareen ku abtirsada qalbiga oo la xidhiidha ruuxda oo macnawi ah,jidhkuna keliya waa agab uu adeegsado oo uu isku muujiyo in uu joogo marka uu jacaylkaasi u baahdo in uu waaqica la falgalo.Yacni;aniga iyo adiga waxa inaga dhexeeya Idiley jacayl,keennu waa kii toolmoonaa ee ruuxda iyo macnawiga ahaa, waa kii ay ruuxdu ruuxda u oomanayd ee aanu jidhku uun jidhka u oomanayn, haddii uu oon u qabana uu xaddidnaa ee aanu xadkiisa dhaafsiisnayn. Meel cidla'ah ayaynnu labadeennu wada joognaa, waa hubaal in dareenka ninnimo ee aniga i soo cadaadinaya uu adigana dareenkiisii u dhigmayay ee dheddignimo ku soo riixayo,balse labadeenna jidhkeenna waxa ka adag jacaylkeenna, oo ma aanu ahayn jacayl jidh ku salaysnaa ee waxa uu ahaa jacayl ruux iyo macnawi ku salaysnaa,haddii uu jidhka u fasaxo in uu tallaabo dhanka jidhka kale u qaadana waxa ka qarribmaysa noloshii macnawiga ahayd ee uu dhistay oo miisaankeedii uu ka khalkhalayaa.Sidaas awgeed ayuu ugu adkaysanayaa in aanu jidhku xadgudub samayn, jidhkuna uu uga amar qaadanayaa jacaylka sidaas faraya.

Yacnii; jacaylkeenna oo ahaa kii asalka ahaa ee macnawiga ahaa ayaa doonaya in aanu jidhkeennu ka fasahaadinin noloshaas qurxoon ee uu unkay.Sidaas darteed ayuu midkeenba ka kale uga ilaalinayaa.

Taas liddigeeda; haddii uu jacaylkeennu ahaan lahaa jidhadhkaas isdoonaya,ama uu u jabi lahaa damaceennaas ina gubaya, waxa uu ka didi lahaa dabarrada ruuxda ee ay ku qeydeyso caadifadda jidhka ee ay ku leedahay: 'ha sinaysan! Sharaftaada dhawrl Mustaqbalkaaga ha madoobayn! Iyo ubad aadan nolol u dhisin ha dhalin!' Amarradaas ay ruuxdu siinayso ayay la dagaallamayaan oo intaas ay labada jidh isu baahi qabaan hadba way isku boodayaan, marka ay kala xiiso dhacaan ee labada jidh ay soo kala go'aanna jacaylkaasi wuu

qaatay cimrigiisii,qof walibana dhankiisa ayuu u raadsanayaa cid cusub oo uu habeenno la galgasho, oo dabeecadda shahwada ayaa ah in ay si degdeg ah ku kacdo, isla markiibana ay gammaarto, oo wixii ay xiise, hadallo qurxoon,iyo beeno wadatayna ay la gammaaraan.

Sid ayanu innagu ug sasyano in u jidhkenau inoo atiniyeng arrimiso oo aadamanimadi,xishoodkdi iyo anshaxi ay xasusiso.In aynau markas kaga dayanno iyaga jacayllu waa inoo lidashoino dullinimo.

Cadced soo baxday calaacali ma qariso'e, jacaylku wuu jiraa oo wu joogaa Idiley.

iyocidhifyada Waa johorad ka kaahaysa gudaha Waa macnawi maankeenna ku laaqan.Waa rays

udgoon oo ruuxdeenna dhex jifa, cid walibana jacayl maankeenna qalbigeenna. u gaar ah oo jid u gaar ah loo maro ayay leedahay.

Deeqi sidaas u fahanka iyo fekerka toolmoonaa... Deeqi sidass u yagannay jacayika ce sidaas oo dhan agtisa uo muqaddaska uga ahaa waa ka sidan ah!

Waa ka xogtani ay iga soo gaadhay!

Deoqui cid kastaaba xaqa ay ku leedahay iska gudi jiray walow isagu raanu beddelkiisaba helin'e..Deeqii cid waliba jacayika ay ka mudan tahay a quudhi jiray ee aan ka hagran jirin... Deeqii ay wax waliba u kala soocnaayeen ee cidna aan xaqa ay cid kale ku leedahay u huri irini...waa ka sidan ah!

Deeqii maalin aaminsanaa in'dhawaaqa qalbigaaga raac'ay tahay weedh iska hantaatac ah oo khaladyadiisa uu qofku ugu cudurdaaro,ce fahmay in qalbiga dhawaqiisu aanudhayalsi galin walow caqliga maalaayacni ha ula muuqataba'e, laakiin haddii dhawaaqaas uun la daba galo miisaanka noloshu uu dheelliyayo oo ay mahuraan tahay laftiisa in waayaha iyo waaqica la oggolaysiiyaa, ma dhawaaqa qalbigiisa iyo dhadhabka xubinkiisa ayaa ka xoog badiyay garaadkiisii baxsanaa?!

Sowkii maalin igu yidhi: "qiso kasta oo jacayl oo waalidku ay soo faragashadaan cedda iyo dhallisha waalidkaas ayaa la huwiyaa,haddana badiba qisooyinka waaqica ka dhacaa waxa ay ina bareen in badanka waalidku ay saxnaadaan, qofkaas kale ee uu lammaankiisu waalidkii uga go'ayna wax badan uu ka geddisnaado sidi laga filanayay,oo kan chelkiisa ay isku dhaceen uu tib iyo mooye dhexda ka fadhiisto, dhan uu miciin bidana uu waayo. Inta ugu yar ee dhacda weeyaan marka dhawaaqa qalbiga iyada oo aan caqli lagu darin la daba galo."

Waxa mar kale maankeeda ku soo duxay markii uu u balballaadhinayay sida uu kala yahayjacaylku,iyo cid kastaba iacaylkeedu sida uu jidka gaarka ah u raaco.

Deeq:Mid kasta oo ad jeceshahay si garah ayaad ujeceshany.Gielituhu Bahay hal jacay uun, ayay haddana cid waliba leedahay jaad u gar an marin u gaar ahna loo maro.

Jacaylka Ilaahay e: marka loo eegodiinteenna,Ilaahay aadamihisa wuu jecel yahay haddi ay ka kasbadaan,lana yimaaddan

“ Dadka waxa ka mid ah qaar samaysanaya Ilaahay sokadiisa wax ay Ilaahay la simayaan oo ay u jecel yihiin sidii ay Ilaahay u jeclaan lahaayeen,kuwa xaqa rumeeyay sida ay Ilaahay u jecel yihiin ayaana ka daran oo ka mudan sida ay iyagu waxaas u jecel yihiin."

Jacaylka rasuulka: nebigeenna waynnu jecellahay,wuuna inaga mudan yahay jacaylkaas, wixii rafaad la markiyay iyo dhibtii soo gaadhay oo dhanna darteen ayuu u soo maray, jacaylkiisuna waa inagu waajib oo inta aanu Ilaahay inagu waajibinba ka hor waayaha iyo waaqica ayaa inagu waajibinaya.

"Midkiin xaqa ma aanu rumayn illaa uu iga jeclaado waalidkiisa,ubadkiisa iyo dadka oo dhanba." Bukhaari: 15. Muslim: 44.

Jacaylka ragga: labka iyo dheddigga Ilaahay ayaa isu uumay si ay isugu ilwaadsadaan,mid walbana dhankiisa waxa ka jira jacayl uu ka kale u hayo, oo Suleekhi markii ay nebi Yuusuf jeclaatay,Ilaahay isaga oo astaynaya waxa uu yidhi:

“Jacayl ahaan wuu dhex maray."

(Shiqaaf) waa eray Carbeed oo qeexa xuub ku dahaadhan wadnaha,aayadduna waxa ay tibaaxaysaa in jacaylku uu qalbigeeda galay,halkaasna waxa ku cad in jacaylku uu qalbiga (wadnaha) dego.

Jacuylka dumacka: marki nebiga @ la toyday (weydiyay) dadka yand Dnra Ia is eegay aya agu yidhi: "nebi Allow;raggn ayaannu ka wadna?"Markaasuu yidhi:“aabbeheed!"

jedaanaysaa waa laba aad u kala duwan oo qoloba garkeeda uga munaasib ah.

Jacaylka gurboodka: ilma nebi Yacquub markii ay walalkood Yuusuf u arrinsanayeen llahay isaga oo sifaynaya waxa uu yidhi:

λ :-a,a,b=0"Xus (Maxamedow) markii ay yidhaahdeen (Yuusuf walaalladii)Yuusuf iyo inan-baheedkiisa (Binyaamiin) ayuu aabbeheen inaga jecel yahay,innaguna koox ayaynnu nahay, aabbeheenna baadinimo cad ayuu ku sugan yahay."
Jacaylka bulshada:nebigeennu waxa uu yidhi:

"Tlaaha naftaydu ay gacantiisa ku jirto ayaan ku dhaartaye, jannada ma gelaysaan illaa aad xaqa rumaysaan, xaqana ma rumaynaysaan illaa aad isjeclaataan. Ma idin tusiyaa arrin haddii aad samaysaan aad isjeclaanaysaan? Bariidada dhexdiinna ku faafiya." Bukhaari: 260.Muslim:54.

Lexejeclada:hantida mood iyo noolba waa la jecel yahay,laguna kala duwan hanti-jacaylka, weliba xilligan aynnu noollahay hantidu waa hoggaamiyaha maangaabka.

“Hantidana waxa aad u jeceshihiin si daran."

Wanaag-jacaylka: samaha iyo wanaaggu sheeggan, dadkooduna suntan'e, waa loo kala jacayl badan yahay oo loo kala jajaban yahay dhanka wanaagga,Ilaahayna isaga oo sifaynaya kuwa wanaagga u muhda ee jecel waxa uu ku xusay Quraanka:

Wita ku sogmn jmarfan Qulw) toe noel is af indedkeiion liasharma soo jecel rahey kows insshurn* ” Xamuan jicaylke inci yun no zumaha ay faiambe was hv gerd ts erlprhn't,dulla to dhaus re ku mokha 国 市 务 号 semo-is daireinigts.Xammo-u-doraliars lashay iags co sifntaers waxs uo Qananbe Co YaaY

"Reer-Samnanf ispa wsannu harainінry (Aagi E)Xnu sheegar hanund inafhar-bi'tants hasbremala sv ks rocieatren hamunka io ersnsairshgan re anni ku laninno snu 我量 u 得好



nwm r Corieed co resta jacaris hadhin 71 r jnssge mitin,ca

tt xaply noe Qorsanks iaainan pison en is nmmi leronns jaciyia is sor alshahniss

stmal oof i t jae jn

Sidaas oo dhan ayuu jacaylku ugu kala soocsoocnaaye muxuu aniga jacaylkayga u dulmiyay?!Ma sidaas ayaan agtiisa ugu fududaa?!

Ma afkiisa iyo aaminaaddiisa ayaan islahayn?! May!

Xaasha!

Ninku waa kii aan afar-gu'-ku-dhowaadka la soo qaatay,cid iiga agoon badanina ma jirto, dhacdadanna ma rumaysan karo, laakiin waa xaqiiq i hor taalla!

Intaas markii uu ii falamaguray sownigii ku idhi: "si wanaagsan ayaan u fahmay oo Ilaahay jacaylkiisa waxa aan ku muujinayaa cibaado iyo camal-suubbanaan. Rasuulka jacaylkiisa waxa aan ku muujinayaa jidkiisii oo aan qaado iyo hanuunkiisii oo aan baahiyo.Adigana jacaylkaaga waxa aan u marayaa in aan inta aynnu kala xaaraansan nahay iska kaa ururiyo oo raganimadaada aan qadderiyo, se kalgacayl, naxariis iyo dareen gacaltooyo oo shilis aan ku siiyo, marka aynnu isguursannana aan oori suubban iyo xaas aad ku xasisho kuu noqdo, oo jidh iyo johoradba aan janno kuugu noqdo. Adiguna waxa aad u maraysaa jacaylka aad ii hayso in aad ilaalo i noqoto oo wixii dhib ii lehba aad iga caabbido, iina arrimiso oo hayaan suubban iyo hir doog leh aad ina geyso, boqorad iyo taaj madaxa kuu saaranna aad iga dhigato. Waalidkayga iyo warasadaydana (ubadkaygana) mid waliba waxa uu iga tebayaa jacayl gaar ah oo danayn iyo daryeel gaar ah u baahan.”

Sowkii igu yidhi: "ha u jeclaanin wax maadaama ay dadku wax wada jeclaadaan. Ha u jeclaanin wax maadaama uu nolosha dabeeciga ah ka mid yahay. Ha u jeclaanin wax maadaama uu yahay waxa ugu badan ee ay cid waliba ka sheekayso. Ha u jeclaanin wax ibtaada daraaddeed.U jeclow wax aayahaaga iyo aayatiinka ubadkaaga dartood. U jeclow wax maadaama uu jacaylku kaa dhigayo haddii aad si san u adeegsato qofka aad doonayso ar danbe (mustaqbalka) in aad noqoto. U jeclow wax maadaama uu jacaylku yahay jaranjarta kuu jihaynaysa dhanka jannada.U jeclow wax maadaama aanay noloshu la'aantii tallaabsanayn. Jacaylku

waa rabitaan, rabitaanna waxa lagu rukuntaa00raafahalooga v hadba in dhanka san uun loo si duduuco.dabciyomug leh oo u →

rabitaankuu1Iha nd dand ues hadhat, sbeckdd dhan valbu ah and samaysar.onsii cegtana kun sii kobciso shakhsiyaddaada mooyaane in aad hoos jiro jacaylka waaritaankiisu."ninka kdisa ce adduunkanba ku noo,wuuna istaahilayay jacnyi kamana qoomamaynayo.Laakiin laabtaydan holcaysa maxaan ku samirsiiyaa?!Kubka iyo bawdada ayaad iga Imisa ayaad heeso ii qaadday oo aan hawada sare jebisay Deeqow! heegeeyaye!Imisa ayaad i dareensüisay in aan dhiggay ugu sarreeyo marki adeegmadaada cuddoo n abwaannimadaada, eraygaaga toolmoon,indhahaaga muxibbo-hadla, iyo araggaaga ay kashu ku degtaba an igu Macaanaydee heestii uu aniga oo baraadla' igaga naxsaday: koobtay?!

Waxa hadal daweyn iyo
Haasaawe guuniyo
Ammaan loo
hagoogshaa
Heeso loo tixeeyaa

Middii higilka eraygiyo
Hilawguu ku yimi iyo
Heelladu waxay tahay
Hubaal ugu khushuucdee

Adiguu Haweeyaay
Fanka haybaddiisiyo
Suugaanta hodanka ah

Hiyigaagu deeqaa

Hiinraaci maayoo

62

Hagoog ccgan maayoo 62

Kas habaabi mazyee
Wataad tahay bankaygfi.

Heepada naftaydaay
Haween ugu bilkooney
Hoobaan naqaadey
Halhayskeeda sharafeey

Hubsiimada kashaydiyo
Horjoogaha qudhaydiyo
Horscedaha jidkaygiyo
Hoygiyo hugaygaay

Harraad-bi'tyadlaydaay
I hamuuntiraysaay
Halbeeggayga noloshiyo
Heemaalka quruxdaay

Raxmaan haygu kaalee
Hibaaq-udug-cuddooney
Himiladaydu waa adi
Kuuna ogi huraalkaa.

Habeenkiyo dharaartii
Waxaa hawlo buuxihi
Hadday garab haween iyo Gabadh
hiil leh waayaan

Illeen hanadna keligi
Ma habeeyo reerkoo
Gabadhoon hareer qaban
Dhan baa haawanaayee

Habeendhaxa
rafaadkiyo Halhallawga
dunidan

Halkii igu bannaanayd

Haldhaadii gufeysaay

Habaqlihiyo daalkiyo Waxaan huq iyo ciil maray

Habarwacashadayd aay Adaan kugu hilmaamMa araggiisii a. aan ku ilwaadsan jirayayaan.ka samraa?!Ma abwaannimadiisi iyo erayadis cuddoonaa

Ma fahankiisii uu indhahayga akhriyi jiray ayaan ka ayaan ka samraaz! samraa?!Ma aqoontiisii iyo xog'ogaalnimadiisii

Ma huraalkiisii hagar-la'aanta ahaa ayaan ka samraa?!Ma ayaan ka samraa?! higilkiisii haybadda lahaa ayaan ka samraa?!Ma ninrageednimadisii aan indhihiisa ka dhex arkayay ayaan ka samraa?!

Ma Deeq ayaan ka samraa?!

In kasta oo uu yahay nin kulul, degdeg badan, xanaaq dhow oo fartu ay gaadho, warkiisu uu cad yahay oo madaxbuuxinta iyo la-saayiraaddu ay ku yar yihiin, haddana sifooyinkaas dhalliisha ku ah waxa ka badnaa wanaagyadiisa ay ku1 qabtay ee ay caqligeeda iyo qalbigeeduba raallida kaga ahaayeen,cid aan iin lahaynina aadame ma aanay soo noqon ee malaha makhluuqyada kale ee Ilaahay ayaa laga helayaa.

Hadal-boobista iyo in aanu kala-hanbayn ee wixii la odhan lahaaba uu isagu yidhaahdaa waa mid ka mid ah dhalliilaha uu leeyahay Deeq,haddana waxa ay taas ugu dulqaadataa in daqiiqad kastaba xog ay si uun wax uga dheefaa ay afkiisa ka soo fakanayso, taas oo dhallishiisaas hore asturaad u noqota.

Si kasta oo uu dhalliaahaas u lahaaba,haddana si walba way ugu xistay, walow xiisahaas dhawaga caqligeeda ee u diiddani uu ka xoogganaa.

Talo way ku fadhidaa!Dedaal kasta oo uu ku bixiyay Nuur Cabdillaahi meelmarinta gorshihisanba waa kaas haddana farta dhexda ka qaninsan ec waa soo aasay!

Ma ninka uu noloshiisa burburiyay ayuu ka qoomamaynayaa?!Ma walaashiisa nolosha baalleheedu ay isugu qoofalnaayeen ee uu ka kala qubay ayuu ka qoomamaynayaa?!

Dhambaalkan uu gacanta ku hayaa wax kasta oo uu wadayba wuu daba geddiyay.Waxa dhaawac aanu ka bogsanayn oo riiqdiisu ay
dheeraanayso u geystay weedha u danbaysa!

Weedha farriintaas lagu soo afmeeray!

Weedha damiirkiisu uu xejin waayay ee markii ay ishiisu dul carartay garüirkii saaqay uu ilaa hadda jidhkiisu la kurbanayo!

Alla illeen talo isuma kaa sheegto! Adigaa
gooyaye gallaji dee!

Jinni ninkii keenaa bixiya!

Canaanta uu damiirkiisu ku wado,qoomamada qalbigiisii uu la gaagaxay ee godol nafis ah uu iska waayay, iyo garaadkiisa gubtahanyoonaya ee dhan uu talo kaga hagaago garanla' ayuu qolkiisa la goxolyoobaa!

Illeen awr uu awr wado iyo nin ay naagi waddo midina kaa ma baydbo markii la yidhi tan oo kale ayaa la tilmaamayay! Bal qallad lagu riddaasi baxarka ay cagaba ii gelisay day?!

Bal sidee ayaan uga dabbaasbaa waatane?!

Waxa soo hormaray filin duuban oo ka soo bilaabmay markii ay warkaas u keentay! Markii ay dhiillada gelisay! Markii inta ay qorigiisa cabbaysay ay ninkaas ku jihaysay!

Shukri,fasalkeeda way ka sheeggan tahay.Waa afhayeenka ama aynnu nidhaahno'e, waa ta dumatka ugu afka dlheer.wakhtigeeda ugu badan waxa ay ku gaadataa mar ay laba habloo kol ay macalin ku taaran tahay oo ay la murmayso, iyo wax qulub io qas uun la xidhiidha!Saaxibad khaas ah ma laha ee waa la iska wada uruuriyaa, mata muuqeeda la arkana waa laga acuudubillaystaa.dhibcaha imtixaanka la yeedhinayaba waxa ay jeceshahay in ay nogoIlaafasalkaas iyadu ta la ammaanayo, imtixaankana ugu sarraysa.hal malinna intaas ma aanay helin, taas oo kol walba ay ciliyo gadood ka Qofka la ammaano way nacdaa, ka ammaanana way la

nacdaa!Wax kasta oo ay haysato waxa ay doonaysaa wax qaadaysay. ka badan in ay hesho,waxana ku xooggan dareen ah dheeraad-doon...wax walba inta ay haysato in ka badan in ay raadiso.

Qaneecada way isku dhibban yihiin, qaamuuskeedana kumaba jirto wax ay nafis ku dareentaana ma jiraan, marka laga reebo xaaladda ar gudaha ka dareemayso mid la mid ah kolka ay aragto qof ku jira oo holac aan lala arkayni uu ku shidan yahay, amaba marka qorshe ay maleegtay uu qof haleelo ee ay murugada wejigiisa ka akhrisato,markaas ayay qanancsanaan ugu dhodhowdahay.Waxa ay aaminsan tahay wanaag kastaba in ay iyadu mudan tahay maadaama ay Shukri tahay... Shukri Gurey. Waxa ay aaminsan tahay in ay tahay shakhsiyad uu Ilaahay doortay oo dadka wax

dheer,laakiin dadkan maangaabka ah ee fahanku uu ku yar

Sida uu llaabay ii qurxiyay ijo jidbkayga goran ee sooban bal day! Kunva yahay aanay meeqaamkeeda garanayn. *galaaska fadbiyana bal day! Waa kaafiyo kala-dbeeri! Markii ay beerkayga soo baweysan waayeen ayay boostaas iga wada bifayaan! Wallee idiinma liico! Xataa way ii quudbi la'yibiin bal marna in ay eray wanaagsan i yidbaabdaan!*

Waxqabadyadeeda ugu waaweyn waxa ku jira laba kasta oo ay madaxa isu gelisay maadaama ay leedahay awooddaas gaarka ah iyo hibadaas aanay yicistan fasalka fadhiyaa la wadaagin, ee ah in qof qof kale in uu naco ama uu qabsado lagu qancin karo! Waa in ay ku digataa oo ay ku wiirsataa! Waa in ay hibadeedaas hadh iyo habeenba soo bandhigtaa oo sida aanay cidina ugu gaadhayn ay muujisaa.Habfekerkeedu halkaas ayuu joogaa.

xoogsato wastaad ah oo yoomkiisa dhacsada,laakiintaytalkaas xoogsatanimada ah waxa ka weyn taytalkan muqayilnimada aah.Inta uu soo helo badigeedu waa qayilaaddiisa, wx faro guudkoodah oo nolosha goyskisa an ku fillyn ayuuna habeenki ishanta ku ag tura gurboodka baahidooda iyo darxumada qoyska apay suuga booskhudradba ku iibisa a,cidhiidhsatay, halkaas ayayna hilib iyo ubadkeedana ay ka Labadas walid ce aan ubadkooda dhex joogin, marka ay masruuftaa.u waxa dhexdooda ku dayacmay in badan oo ah tarbiyaddi iyo barbaarintii toolmoonayd ee carruurta.Intas ay la joogaan waxa ay ku jiraan canaan, hiif, haaran,cay,tuuryo,iyo mararka qaar oo ay gacan gaadho,ciyaalkuna maxabbo la sheego waalidka uma hayaan, ixtiraamna warkiisaba daa xoogaa in ay ka yara baqaan mooyaane.

Habeennada qaar ayuu odaygu ciyaalka sarfayn ka saaraa oo mid mid uu u dilaa inta ay buuqaan, marka ay islaantu la muranto ee ay istidhaahdo ka celina iyada ayuu xataa ku daraa!

Waxa guriga ugu weyn oo abbaanduul ka ah Shukri Gurey. Waxaay haysataa ciidan ka yaryar oo amarkeeda ku shaqeeya,dhammaantoodna ka baqa! Dilmada gurboodkaas ay ku haysaa xad iyo xisaabin toona ma laha, oohintoodana sida laxankii Maxamed Mooge ayay ugu raaxaysataa. Mararka qaar boholyow ay u qabto in ay dareento kelitalisnimadeeda iyo sida warkeeda aan war loo dul saarayn ee hadal aan loogu soo celinayn ayay maalaayacni ciyaalka u kala xarraastaa,markaasay qayladoodu u noqotaa laxan la soohay oo reen iyo jib hallaasi ah lagu tidcay.

Marka ay ciyaalka ka soo baxdo kelitalisnimadeedaas degaanka kale ayay la soo aaddaa, meel kalena ma tagto ee waa dugsiga'e,waa taas laga wada acuudubillaysanayo.

Markii damaceediiuu dadkii kale ku socon waayay kelitalisnimadeedaasi wejiyo kale ayay yeelatay. Waxa ay ku nafistaa in ay noqoto qofka galaaska ugu saamaynta badan ee loogu hadalhaynta badan yahay,indhuhuna ay iyada ku wada maqan yihiin xumaan iyo samaan ta ay ku kasban kartaba.

Macallin kasta waxa ay ardayda u dhex gelisaa in uu damcay oo ay ganafka ku dhufatay, arday kasta oo fasalka ka dhaqaaqayana isla beentaas ayay ka samaysaa, laakiin cidina ma rumaysato!

Dalkeenna ayaanay ka jirin cid ku xeel dheer oo baadhaa,dadkeennuna badanka waxyaabahaas doqonniimo ayuun bay u yaqaanaane, inantaasi way bugtay. Waxa hayay Nerjesi (Narcissism).

Waa khalkhal nafsi ah oo kaga dhashay degaankaas aan fayoobayn ee ay ku nooshahay iyo awooddaas iyada oo aan fahan shilis lahayn la siiyay ee ay duulkaas shanta ah ee ka yaryar ku kaarto-baxdo.

Weligeed jacayl ku filan ma aanay soo helin, wayna og tahay in ay u baahan tahay cid jeclaata. Cid ku indhakuulata. Cid dareensiisa in ay tahay ta keliya ee dunidaba ku nool. Cid ay iyadu indho iyo dhegaba u tahay. Cid iyada ku soo toosta oo ku seexata. Laakiin haabkeeda ma hayso,umana dhowa!

Hal dabci iyo hal dhaqan oo ay qofkaas qalbigiisa ku kasban karto ma laha!

Waa dabciga Nerjesiga'e, dhibaatada dhankaas ka haysata iyadu iskama raadiso oo in ay nolosheeda dhisto oo iyadu ay isfurdaamiso iskuma daydo ee booskii baahidaas jacaylka ee ku bannaanaa cid u buuxisa markii ay weyday waxa u beddelay nacayb! Ehelkeeda ayay neceb tahay! Intii wax u ah ayay neceb tahay! Asxaabteeda ayay neceb tahay! Macallimiinta ayay neceb tahay! Waxbarashada ayay neceb tahay!Nafteedana sidoo kale, aad ayay u neceb tahay, haddana aad ayay u jeceshahay, wax kasta oo wanaagsan iyo ka badan in ay heshana way la doonaysaa!

Naf aan wanaagba lahayn,maalinna aan la ammaanayn,laga yaacayo oo dadku ay ka wada biyadiidayaan, cid ay wanaag u muujinayso ama xataa ay u dhoollo caddaynaysana aan la arkaynin yaa jeclaanaya?!

Aad ayay isu neceb tahay,haddana ay isu jeceshahay!

Nacaybkaas ayaa noqday seeska ay nolosheedu ka duusho!

Niacay blas eyay ku sulaysan yihin wax kasta 0o ay samaynagno mn tallaabo kasta oo ay qaadaysaabal labo lasa o ay qagesan oo sy angfa wa cadyohow ku conayang ku ciideeyay!Dniterouyrdtca maugralad ug bodan ce ay ha clWan siudo nsd gof adame ah nafuddisa ugu vato, magalady waa Saykoolojiga Ma ow (Dark Psychology)!dheeldheli lahayd adiga oo u beenguuraya (manipulation)! faalloonaysasida qof Waa in inta aad soo akhrido xog ka hagardaamo nafsadecd oo aanu darecrmayn loogu geysto, ka dibna loo qiimeeyo falcelinta uu ka samaynayo!Main walha xeer ka mid ah qaacidooyinka Saykoolojigaas Madow carurtas yaryar ce ay cidlada ku heshay ku tijaabisaa, mar kasta oo ayay ku dareentaa.In kasta oo aanay badnaynba, haddana cid kasta oo uu xidhiidh kala dhexeepo waxa ay doonaysaa in ay iyadu xidhiidhkaas hagto,amarkeeda uu ku shaqeeyo, qofkaasina sidi addoon iyada loo abuuray rabitaannadeeda uu1 ku socdo!

Waa sababta ay Saykoolojiga Madow ee nafsadda dadka lagu dilo hadh iyo habeenba u baadhayso si ay u hesho dhibbanayaal badan oo ay iyadu hallaysay,bogagga waxqabadyadeedana ay ugu darsato!Xirfaddaas shishe ee ay saykoolojigaas u leedahay waa ta ay ku awoodday in ay Nuur Cabdillaahi garaadka ka qabsato, heer ay gaadhsiiso in ay ka dhigto qori ay iyadu leedahay, sifayn karto,cabbayn karto,isla markaana ay ridi karto goorta ay doonto!

Ha iska dhib badnaato oo bukaan aan la dareensanayn ha ahaato'e,way qurxoon tahay, waana dumarka nooca jinniga leh ee aad dareemayso wax quruxdeeda ka weyni in ay kuu jiidayaan.

Maalin ayaa loo baahday in ardaydii kaalmaha sarsare galay abaalmarinno la siyo. Waxa ardaydaas ka mid ahaa AxmedYare.Waxa loo sheegay in ay waalidkood keenaan maalinkaas.Aabbihii Cabdillaahi Geelle shaqo ayuu lahaa oo waa oday Soomaaliyeed oo camal ayuun buu aroortii u kacaa, mid aan rasmi ahayn iyo mid rasmi ahba. Hooyadii Ruun Calina waa waayeel iska juucjuuc badan oo xanuun aan weyneyn ayay ka cabanaysay,markaasuu walaalkiisii ka weynaa ee Nuur Cabdillaahi soo kaxaystay.

Nuur oo dugsiga dhex maraya,Axmed-Yarena garabka haysta ayaa arkay beertan wada bilcoonta ah ee ugubkaas soo kacaamayaa ay is'hor-iyo-daba-marayaan.Habluhu marka ay dugsiga ku jiraan waxa aad mooddaa in ay ka qurux iyo soojiidasho badan yihiin marka ay koraan ee heerarka kale ee nolosha ay u gudbaan!Waxa ay ishiisu ku nasatay inan socod wanaagsan, jidhkeedu uu israacsan yahay oo uu isla tallaabsanayo, soojeedkeeda in ay gashaanti tahay laga garanayo, sii-jeedkeedana in ay guurgal tahay laga akhrisanayo.Ishiisii way ka fuqi weyday, markii ay ka yara durugtay ee dhawr arday ay sokadeeda isdhaafdhaafeenna waxa uu dareemay in aanay taasi ahayn tu laga hadho.*Qoodh iyo xero'e waa fursad aan soo laabanayn ee yaanay ku seegin.*

Inta uu Axmed-Yare u sheegay in uu fasalka kaga daba imanayo isaga oo u iljebinaya oo dareensiinaya durba in shabaggiisii kalluumaysiga uu daadsaday ayuu dhankii ay ku carceertay afka saaray.Dukaan iskuulka ka ag dhow iyada oo wax ka gadanaysa ayuu arkay,markii uu ka bogtay in ay iyadii tahay ayuu dhankeeda soo abbaaray.Soo-bixitaankeedii iyo isagii oo dukaanka afkiisa maraya ayaa isha isku dhuftay.

-“Waan ku salaamay ina abti."Inta ay eegmo dumarnimo ku jalleecday ayay tidhi: "waa lagaa qaaday.”

-“Aar ii dhiib xabbad biyo ah.” Inta uu inankii dukaanka ku yidhi ayuu iyadii mar kale ku soo jeestay: "ina abti mar ayaad adiguna

isgaamayn gandhay anigana nad i gahafan guadhay marki aan isha yae kugu siiyay.” riyo ayaankuugu -"Oo hadda ayaaba iigu kaa horreysa'e ma hanjabay?”-"Sannadki imisa magood ayay reerkiinnu kaa bixiyaan?!""Hayin bipo-ma-daadshe ah ayaan ahay oo -"Ragga sidayda oo kale marka ay isha qac kugu la igamaba cavdo c yaan laayay!” sijyaan jugta kala kulmaya!”-"Dadkas xayeshka ah dee markii hore ayay naf bixi weyday /ku jirtay. Adigu se haddadan ayaadba i aragtaye goorma ayaad dutba dhaawaca tirsatay!"-"Haddadan igu kaa horraysa ayaad i sigtay, nin sigtayna ma nabad gelin!”-"Dee markii hore ayaanay naf la sheegaa kugu jirin marba haddi sidaas sahlan ay ku siganayso aniga oo aan warba ka haynin in ay jirto -"Laga yaabaa in aad adigu tahay middii naftaas tayayn lahayd kollay iminka adiga ayay dhibbane kuu iyo in ay joogto." tahay, jinnina ninkii keena aya bixiya'e. ” Cabbaar markii ay kaftameen ayay isbarasho rasmi ah u dhaadhaceen.

-"Magacaygu waa Nuur Cabdillahi, Nuur-Hanadna waa la igu naanaysaa."-“Shukri Keyse,Shukri Gurey ayaa se la ii yaqaannaa."-“Barasho wanaagsan.”

-“Wacan oo wanaagsan.”

Lanbarradii ayaa la kala qortay, waana la kala tegay.

22

Nuur waa ragga haddii ay haasaawe tahayna wada kaantaroolka iyo maamulka ah ee doonaya xataa dukaanka marka ay wax ka soo qabsanayso gabadha uu la haasaawaa in uu ogaado ama ay uga fasax qaadato.Haddii uu guursan lahaana indhihiisa ayayba ka muuqataa in uu noqon lahaa xilegubeu daran gabadhaas u gacan gasha.

Barbaarintiisa waxba kama aanay khaldanayn, waalidkoodna dad ilbax ah oo ubadka u roon ayay ahaayeen. Laakiin maadaama uu curad ahaa,oday Cabdillahi Geelle iyo Ruun Calina ay ku curteen,koolkoolinta iyo jacaylka ayay ka badiyeen.

Markii ay dhalatay Idil Cabdillaahi ayuu isaga oo dhallaan ah dareemay in dhankeeda wixii danayn isaga la siin jirayba loo weeciyay,ka dibna isaga oo yar ayuu qalbigiisa galay dareen xaasidinimo ahi.Dareen jecel wax kasta oo wanaagsanba in uu isagu helo,cid kalena aan waxba u oggolayn.

Markii uu weynaaday ee carruurtoodan uu Axmed-Yare ka midka yahay ay dhalatayna waxa uu helay xoogaa maamulid ah,maadaama uu ugu weynaana badanka isaga ayaa masuuliyad laga saari jiray.Maamulkiisaas kuma aanu xumayn oo Cabdillaahi iyo Ruun ciyaalkooda dhukhdhukhdaas lagu dili maayo, ee kaantaroolis ayuun buu ku ekaa.

Balse kaantaroolkaasi noloshiisii oo dhan ayuu qayb ka noqday.Ardayda ay wax soo wada barteen dabcigaas in badan way isku jiidheen,oo fasalka marka uu macallin uu jeclaystaa ku jiro haddii uu arday hadlo wuu ku qaylin jiray isaga oo aamusiinaya. Illeen waa laba nin oo isku fac ahe markaasay isku dhici jireen, dhawr jeerna gacan ayayba ka gaadhay.

Waxa sidoo kale kaantaroolkiisaasi uu u gudbay haasaawihiisii,badigan waxa ay hablaha uu la haasaawo isku qabtaan waa maamuliddaasaan u-meeldeyista lahayn, intii ay kala tageenna kaas ayuun baa sabab u ahaa.

Kama waantoobo oo waa dabci maankiisa gundhig u noqday,umana arko in uu xun yahayba. *Gabadha aan*

amarkayga qaadanayn ee eraygaygu aanu gelaynin waxbaba nagama dbexayn karaan ayuu taagan yahay.

in uuyahay,

waxa ay dareemaysaa markan nin ay si isu fhmi karayanNin si u yara baxdo oo xata dukanka ay wax ka soo qabsato u diidaya, kunain ay maalinkiiSOO dhammaysato. In kasta oo jacayl weyn oo la sheego aanay u haynin,ay nin la soo sheekaysatay oo ay ka la'aydna way ka dhex aragtay.shaafiday nabarkii Nuur isagu waxa uu helay gabadh horta boogta ku ahaa ee aha in anay dumarku amarkisa qaadanayn, wixi damqayso boogihisas ee marka uu amar

siyo way qaadanaysa,quruxna Shukri ayay u tahay.Wuu jeclaaday. Si weyn ayuu weliba u jeclaaday.Mararka qar baahi qoto dheer oo aynnu gudaha ka dareemaynno qadna inta aynnu ka tanaasullo

qotshayal badan oo jacaylka aynnu cid la wadaagaynnaa

Shurki way dareentay ninkani in uu si waalli ah u caashaqay,iyadu se wax aan xiise ahayn aanay u haynin. uu ka shidaal qaadanayay.

Iskama aanay waalin ee qalbiga Nuur ayay degaamaysatay.

Way isku hubsatay oo gacanta ayay ku dhigtay.Dabcigeedaas ahaa danaynta uu siinayo ee uu waxa danteeda ah ku amrayo sidisii ayay u deysay, laakiin dabciyadeedii bukaanka ahaa ee nerjesiga ahaa ee kale oo dhan ayay dhex marsatay. Waxa ay aragtay in uu yahay nin ay diri karto, inta ay cabbayso oo xabbadaha ay dhuunta u dhigto ay jihada ay doonto u ridi karto. Waa khasnadihii nebi Saleebaane qofkaas oo kale xaggee ayay ka helaysaa?! Sidaas ayuu xidhiidhkoodu muddo dhawr bilood ah ku dhisnaa.Inta ay isdagaalsanaayeen ayaa ka badnayd inta ay heshiiska ahaayeen. Laba qof oo fekradaha jacaylka ay ka haystaan ay sumaysan yihiin (toxic) ayay ahaayeen. Midiba waxa uu dhankiisa u aaminsanaa in qofka sida dhabta ah u jeceli uu yahay ka madaxa ka gala Ka la dagaala! Ka la

buuqa! Ka ay saacadna heshiiska yihiin 23 saacna colka.Sidaa awgeed; mar kastaba isxiisayntooda ayaa ku sii kobcaysay. Hadh

iyo habeen waxa la isku haystay, 'taleefanka maxaad iga qaban laba jeer oo qudha ayaad i soo wacdayl' Iwm.Midiba waxa uu doonayaa aanu u wada gacan galin.Waxa uu doonayaa ka kale in uu yeesho,isagu se aanu isu wada dhiibin.

Si kasta oo xaalkoodu uu isugu cakirnaa haddana ay isula fahansanaayeenba,waxa ay ku heshiiyeen in aanay xidhiidhkoodaas cidi ogaanin,gaar ahaan Axmed-Yare. Waxa soo-jeedintaas lahaa Nuur maadaama uu diiddanaa walaalkiisa ka yari in uu arrimihiisa khaaska ah ogaado, Shukrina halkaas fursad ayayba ka dhex aragtay oo Shukrida ay galaaska ka tahay iyo sida looga neceb yahay Axmed-Yare war kuma seeggana,haddii uu isu ogaadana warkeeda markaaba Nuur wuu u taanataanayn lahaa. Sidaas ayay go'aankaas ku wada qaateen.

Maalin iyada oo suuqa u soo dukaamaysi tagtay ayay isha qac ku siisay Nuur oo la socda gabadh!

Qosolka iyo farxadda wejigiisa ka muuqda, iyo sida kal iyo laabta ah ee uu gabadhaas ula sheekaysanayo ayaa masayr diirran daf siiyay.Haddii ay ka horka-wareegtay iyada oo ishiisa iska ilaalinaysa oo ay gabadhi wejigeedii ka ilsugatayna waa inan aan dherer la sheego lahayn,gaabnina aan lagu xaman. Wejigeedu uu qoran yahay. Indheheedu weynaan galac leh iyo yaraan dinniiq ah midna aanay ahayn ee ay ururan yihiin. Kamasta sanqaroorkeeda xagasha hoose u samaysay ee in laga dhunkado loo lahmadoonayaa ay eegmadeeda bilic gaar ah u samaynayso. Jidhkeeda isu qoran, israacsan ee aan kala waaweyneyn,dhan walibana ay muggeed u buuxdaana uu hummaaggeeda haybad u samaynayo. Waxa ay dareentay in ay xoogaa ka yara qurxoon tahay gabadhaasi.

Quruxdeedaba waxa ka darán aabbihii cunahani sida uu ula dhacsan yahay!

Sida uu ugu magan yabay day?!

Si dhib leh ayay iskaga qabatay in ay suuqa kalladhka ku qabsato oo uu masayrku maankeeda qabsado,laakiin way isqabatay.

Habeenkii ha wacdo iyada oo dagaaltag ah, bariidaba la islama sugine ha ku bilawdo cay iyo maagis:"khaayinyohow beenawaaska ahi!

Aniga ayaad habeen oo dhanna i leedahay'dumarwaa maalinkiina aad magaalada ka xamaalanaysaal"-"Naa maxaa baas ee dhacay?!""Yay ahayd nagti ad maanta ku loohnaydl ce sidli malaig ing loo soo diray aad ugu maqnayd?!"

-“Tee?! Halkee?!""Tung la gabtay talo ma ahal War ha ii

-"Ma meheradda cadarrada ee saldhigga dhexe u tee iyo thalkee lahaye sheeg naagta waxa aad ka ag dhow?l"-"Tyo meclaha kale ce aad la suuraafaynaysayba ti aad isku xoqaysay sidii in aad cadho iskaga reebaysaa maxay qabanaysay!" ahayd?!"

- “ Waa Idil Cabdillaahi. ” - “ Oo idlaato xaggee ayay inaga soo gashay?!"

-"Naa bal habaarka iyo haaraanka jooji!”"-"Waar -“Dee waa Idil Cabdillaahi Geelle!”-“Inteeda-ku-laablaabanto maxay laabtaada kaga loohnayd?!"

-“Dee waa walaashay!”-“Oo aad iga noqoto oo geel-ku-durduri yay noo ahayd?!"

filaysaa in aan kaa rumaysto!"

Waxa uu u soo diray sawir qoyskoodu uu ku idil yahay oo sida ay isugu da'xigaan ay isu dhinac taagan yihiin, Idilna ay isaga ku loohan tahay.Maalinkaas ayay baratay ehelka Nuur, Nuur Cabdillaahi waa nin shakhsiyaddiisu ay isku murugsan tahay.Waa nin aqoonyahan xeel dheer ku ah dhanka sidaasna xidhiidhkoodii maalinlaha ahaa ee maalinna

teknoolojiyadddagaalka ahaa marar koobanna degganaantu uu ku sii ,wakhtigiisa ugu badanna kumbiyuutarka hortiisa ku qaata. Sidii uu jaamacadda u dhammeeyay inta uu socday. qolkiisa ka baxaaba way yar tahay.Maalin kasta teknoolojiyadda cusub ee soo baxda ayuu isku dayaa in uu si qoto dheer u fahmo. Inta wakhtiga uga soo hadhayna xidhiidhadaas isjidjidadka ah ayuu ku qaataa, kan Shukri ayaana hadda rasmi u ah,iyadana wuu jeclaaday maadaama ay

amarkiisa qaadanayso, intaas ayuu wax kasta oo kaleba ku illaawayaa.

In aad cilmiga barato iyo in aad fahantaa waa laba marsalacood oo Wagjica kugu xeeran loo daymo badinayo, qofna waxa uu ku cegia waa dhab'abbaar ka duulaya maxaa saxan maxaa khaldan? Fekerkaas khaldan yahay? Xaqiiqada ayuuna raadiya,godka ay la gashana wuu ka daba galaa.Deeq iyo Nuur farqiga u dhexeeyaa waa intan, waana isla farqiga u dhexeeya Idil iyo Shukri.

Laba waxa ay daba socdaan xaqiiqadaxataa haddii aanay ku faraxsanayn,labana rabitaankooda ayaa halbeegga xaqiiqada u ah oo waxa saxan iyo waxa khaldan kefadda kala saaraysa ah.Waa afar aqoon leh, laakiin laba ay cilmiga iyo dhab'abbaarnimada u afduuban yihiin, labana rabitaankooda uu cilmigoodu u afduuban yahay.

In cilmi la yeeshaa waa mahuraan, laakiin in la fahmo biyadhaca cilmiga ayaa ka sii muhimsan.Labada Bayoolojiga ku takhasusay, ee midina uu ku samaynayo dawooyinka uu cudurrada kula tacaalayo, midina hubka

Bayoolojigaah si ummado loogu cidhibtiro, labaduba waa Nebiga ayaa maalin Ilaahay ka baryay in uu labada Cumar mid u soo Islaamiyo, Cumar Ibnu Khaddaab iyo aqoonyahanno,laakiin taytalka agoonyahannimadu kuma Cumar Ibnu Hishaam,labadaba waxa uu nebigu u filla qofku in uu maamuus ku helo. gacloonayay maamuus ay bulshada ku dhex lahaayeen iyo kaalin higilkeeda leh oo ay ku jireen, laakiin maamuuskaasi waxa uu ku danbeeyay midi in uu Abu Jahal noqdo,midina Cumar-Faaruuq.Kala-duwanaanshaha qalbiyada iyo habdhaqannada ee afaran qof ka dhexeeyaa waxa uu ka taagan yahay ma aha jaahilnimo iyo caado-dhaqameedyada bulshada ee kala-riixashada qalbiyada ah, ee waa cilmi la bartay oo qolana ay u ifsanayso in ay nolol xasilloon oo if iyo aakhiraba anfacda ku gaadhaan, qolana ay

u ifsanayso si ay damacyadooda shakhsiga ah ugu gaadhaan, cid kalena aanay dan iyo muraad ka lahayn.

Waa afar qof oo aftahannimadii reerBurco leh,laakiin afminshaamimadoodasi ay qolo u adecgayso khayrka,golana shatknhaasaawaha Deeq iyo Idil way s00mareeen dhallinyaranimo iyo hayn la wadaago, lakin waagica ku xeeran,xogaha ay helayan,kues iyo chab 'ab baamimadoodas ayaa ka dhigtay laba qof oo dhan wale oo intas dhallnyaranimadaah la wadagaa aanay arrimahaas indho daymo badiyan, sidasna ay afartas qof ku noqdcen kaaf iyo kala dheeri.

78

Ninba meeshii bugtaa isaga ayay belbeshaaye, Deeq hilawga hadba naftisa dhan ula heegaynaya isaga ayuun baa dareemaya. Dadku ninkaas qurxaanka ah ee muggii u buuxa, fekerka qotada dheerna ku maqan ayuun bay arkaan.Qof waliba adduunkan waxa uu ku jiraa dagaal ku keligii ah,haddii uu ka warwareego in uu waajahana weligii ka hadhi maayo dagaalkaasi.Deeq waa in uu arrinkan xalliyaa wax kastaba ha ku qaadato'e. Haddana waajihidda dagaalkaas waa in aanu noloshiisa oo dhan ku wada jihayn ee isaga oo goobta jooga oo jidh iyo johoradba dagaalkaas ugu jira haddana uu noloshii dabeeciga ahayd iyo masuuliyadihiisii sidoodii u gutaa.

Daaqaddii gaadhiga ee uu ku dhaygagsanaa ayay markan indhihiisu qabteen. Waa sabo-wanaagtii. Waa cimiladii uu u hiloobi jiray ee uu Jimceyaasha u soo laydhsi tegi jiray. Marka jannada laga warramayo waxa niyaddiisa ku soo dhici jiray maktabad ay buugaagi rasaysan yihiin iyo jawiga buuraleydan oo uu isla helay, ka dibna goor uu gadiidkii jeestay iyo xilli uu gabbalkii gaabtay midna aanu dareemin.

Waxa uu maagay in dareewalka uu1 ka codsado inta ay halkan marayaan in uu yara gaabiyo, laakiin ma habboona in rabitaankeenna aynnu dadka kale u afduubnaa.

Dawgii Shiikh ee buuraha gaagaabani ay dallaalimaynayeen,doogga ku dahaadhanina uu duddooda bilicda gaarka ah u samaynayay,neecawda nasashada Rabbaaniga ah xanbaarsanina ay nafta nafs iyo naruuro gelinaysay isaga oo maraya ayuu ku war helay.

Maxaa belay Idil?!

Aaway gacaladydii?!

Waa indheergaradnimo aftahamo huwan. Waa ilbax fiiro iyo feejignaan badan. Waa aqoonyahanad agnaannimo (jaahilnimo) ka caaggan.Afdheeraanta badiba dhiggeed ay ku sheeggan yihiin laguma xanto.Asluub iyo anshax in ay uurka hooyadeed kala soo aroortay ayaa la moodaa. Aftaag iyo i arkaay i maqlaay habeenna kama aanu dhadhansanin. Waa ugub indho-u-roon araggu uu ku nasanayo ah.

ismatidhaahdoeedanteedaay ay ku Dadka cajebi oo yaan lagu xaman i toostaa.*doonni*daryeel iyo Sidee ayuu uga samraa shakhsiyaddaas marla'aragga ah?l *Sowti igu tidbi:*

"badueynta galbigoyga waxa sabbaynaysa daadibin sidda dbankaaga

oSow dekeddati galbigaaga in ay kuigu tidbi deiso doonaysa."

nebiSaleebaan00*heepmageannirjmonar harhead may* tjo dong kago so scaroruan *keu timaamo m granayo. Waxa gudba ee ar ka* binaysan qasrigii*Sowti igu tidbi: ogahay waa in ay nootay nalalka ifiyaa ay naftaada* middi *korantada jo madinknimdayda ka soo daremayna aan sidi Mona-Lisa gidarkau*nuugaan,baddii aad kala *akbiraad qalbigayga ee ay ayuu* igu *sudban tabay ugnogonayaa."daabdidna daawanayay. xabaalo iyo baro reer*Noloshan ma ka uu gotku sidas ugu soo biiraba waxa hor yalla dagal nololeed oo uu tan adduun iyo ta aakhiraba ugu tabcanayo.Ta aakhiro waa nin iyo camalkii, tan adduunku se waa dagal nin iyo karaankii ah oo qofba si u waajaha. Qofku marka uu gacan-ku-haynta walidka ka baxo waa in uu tabcadaa oo wixii uu soo bartay intii lagu tabcayay uu ka midho dhaliyaa, laakiin marka la dhalanayo ayay noloshu dadka isdhaafisaa, oo qofna aabbihii ayaa dagaalkaas ugu soo guuleystay oo noloshiisa meel u sii saaray,werwer badanna kama qabo tabcasho adduun, qofna aabbihii ayaa dagaalkaas ku soo fashilmay,markaasuu isaga u dhalay si uu dagaalkiisa u gaarka ah iyo kaas aabbihii uu ku guuldarraystayba u galo ooisaguna uu iskaafiyo, waalidkiina uu kaafiyo.

Deeq aabbihii Maxamed dagaalkaas nololeed kuma aanu guuleysan,isaga ayuuna u dhalay in uu guusha soo hooyo, oo midigtana uu noloshiisa gaarka ah ku qaado, bidixdana ta ehelkiisa waalid iyo walaalba, taas oo tacabkiisa labanlaab ka dhigtay, adduunka soo gelayana

uusmiirad ku noqotay,dhigaal buuran in uu samaystana uu ka awoodi waayay.

Madaama dagaalka nololeed isaga oo labajibbaaran uu ku jiray,shaqadisa waxa ka soo galana aanay wax la sheegaa uga dhigmayn,

waxa ku adkaatay in uu samaysto dhaqaale uu ku guursado, waxana uu ahaa dadka nooca aan jeclayn in baahiyohooda shakhsiga ah ay cid ula tagaan,taas oo ku adkaysay in uu ehelkiisa kale weydisto kaalo dhanka guurkiisa ah, habdhaqanka bulsheed ee miisaanka guurka xaddiga dhaqaale ku xidhayna waxa uu Idil hooyadeed ku khasbayay si ay inanteedu miisaan inta taqaanna ugu dhex yeelato in wax weyn lala gole yimaaddo,waana sababta uu xidhiidhkoodu afarta sano u socday iyada oo ay intaasi uun xidhaysay.

Culaysyadiisaas oo dhan waxa u dheer masuuliyadaha dusha ka saaran ee aanu ka lug bixi karin.

tashanno waxaas ama qofkaas majecaannaa mise waynnu ka joognaaka dibayaynnu ka tashanna wixi aynnu samayn lahayn innaga oo jacaylanl Yacni; naoo wax jjecel ayuun ogin marka aynnu wax jeclaanaynno ee innaga baynnu is'arkaynnaa..Wuu kordhaa oo wuu dhinmaa,wuukobcaa oo wuu dhadhaa, wuu ina bagegeliyaa oo wuu ina faraxgeliya,haddana jacayl dareemaynno,ama raadkiisa iyo saamayntiisaayaynnu ku garannaa.Waa tabta korantada iyo cufisjidadka (gtavity) oo kale. Labaduba nolosheenna samaynáha ugu waaweyn ayay ku leeyihiin,haddana midna ma naqanno waxa ay tahay. Waxa aynnu ku garannaa raadkooda. Haddi aad wax kor u tuurto oo uu hoos u soo dhaco,macneheedu waa in meeshaasi ay leedahay cufisjiidad. Haddi dismis (kashawito) aad xadhig hoolan taabsiiso oo uu laydh bixin waayo,mnacneheedu waa in aanu xadhiggaasi koranto lahayn, haddii uu iftiin sameeyana macneheedu waa in uu danabaysan yahay oo uu koranto leeyahay.Labadooda mdina waxa uu yahay lama yaqaanno,haddana waa la qiyaasi karaa, waa la halbeegi karaa, waa la kordhin karaa, waana la dhimi karaa.

Jacaylkuna waa tabtoodaas. Ma naqaanno waxa uu yahay,cid kasta oo qeexitaan in ay u samayso isku daydana qeexitaankeedaasi dhan ayuu jin ka leeyahay oo weydiimaha lagala hor'imanayo ayaa burinaya.In kasta oo aynaan garanayn jacaylkaasi waxa uu yahay laftiisu,haddana waxa layaab ah in wax kasta oo jacaylkaas ku saabsani-ha galo qalbigeenna, ha kordho,ha dhinmo,ha inaga farxiyo,amaba ha inaga

bajiyo'e-ay leeyihin halbeegyo ay ka shidaal qaadanayaan ee aanay wax kediso ahi qaamuuska jacaylka ku jirin.

Jacaylku ma lahaqaab iyo hannaan la yaqaanno,mana laha qeexitan sugan oo lagu saleeyo, hal qaab oo uu ku yimaaddana ma laha ee nolosheenna tobannan qaab ayuu ugu yimaaddaa, tobannaan qaab ajaynnu wax u jeclaannaaa, tobannaan qaab ayaynnu jacaylkeennaas u

muujiyaan. Sida aynnu ula falgelaynno jacaylka laftisa, sida aynnu wax u jeclaanaynno, sida aynnu u cabbiraynno, iyo sida aynnu uga tilanaynno cidda ina jeceli in ay inoogu cabbirtana waxa aynnu u kala cuskanaynnaa tobannaanka qaab ee aynnu jacaylka u kala nagaanno,iyo tobannaanka xogood ee kala duwan ee qof kastaaba uu fekradda gaarka ah ka sito jacaylka.Laga yaabaa in ay inani u taqaanno jacaylku in uu yahay damac saayid ah oo uu ninku gabadha u qaado,gabadhna ay isu macaanayso oo dumarnimo badan oo ka buuxda ay ninkaas ugu dhoollatusato.Dhanka kalena; uu jiro nin u yaqaanna jacaylku in uu yahay gacaltooyo iyo naxariis la wadaago, ixtiraam iyo qadderinna lagu cimaamaday,milgo iyo maamuusna lagu meegaaray. Haddii ninkaas uu gabadhaas damac ka galo waa hubaal in ay u arkayso nin-jileec aan nacfi lahayn ee maqlay wax ayaa la jeclaadaal

Waa maxay bacoogan aan borraaddadaadaba ku soo gamaamayn ee aan dbunkasbada kula soo tigsanayni?! Ixtiraam iyo qadderin baddii aan u baahanabay aabbabayba waan ka belaa! Haddii un i jeclaaday muu i damaaciyo aan diido oo dumarnimadayda iyo diidmadayda aan jacaylka aan u bayo aniguna ngu *muujiyo'e?!* Iyo qaabab la mid ah ayay inantaasi u fekeraysaa.

Labadaas qof cilladdu midkoodna ma aha ee tobannaankaa qaab ee jacaylka loo kala yaqaanno ayuun bay laba dhinac oo kala durugsan ka taagan yihiin.

Mid ka mid ah dhibaatooyinka jacaylka inaga haysta ayaa ah in aynnu hal dhinac uun ku qiimaynno, sida daacadnimada qofkaas oo kale,innaga oo intiisa wanaagsan ee kale oo dhanna u aragna iidaan in ay u tahay daacadnimada. Haddii taas uu tuhun yari inaga galo wax kasta oo jacaylka la xidhiidhayayba waynnu nacnaa maadaama ay iyadu sees inoo ahayd.

Sidaa awgeed; Deeq iyo Idil markii ay isbarteen ee muddo afar bilood ah ay xidhiidh joogto ah lahaayeen ee labadooduba ay iska dareemeen in ay gudaha wax ka soo riixriixayaan ayay habeen isku afgarteen in arrimaha nolosha lammaanaha lafdhabarta u ah ee ka dhexaynaya ay ka wada doodaan, ka

sheekaystaan, ka faalloodaan,oo ay falanqeeyaan, si mawduucyada qaar haddii ay laba daraf oo kala fog

Yeidku fhni wagyan si dhexdhexad ah loogu wada dhaqmo,qonlagu

tixgeliyo .meel ku adkaystana halkiisas lagu ogaado Doodohoodaas badnaa waxa ay ka badbaadiyeen boholo badan o0hala dovan pihin Maru badan ayu midkoodba ka kale khaldfahanWaxa ay arrimahaasi weyn oo uu arrin ka haystay ka badbaadiyay.yareeyeen isqabqabsadkooda iyo iskudhacooda. dad badani In kasta go an si dhab ah loo

garanayn waxa uu yahay jacaylku,walow haddana waxa uu waanaruuro leeyahay sifooyin aasaasi u ah,sifooyinkaas liddigooda ay ka aaminsan yihiin.Jacaylku waa dareen ay naxarisi ku gedaaman tahay,irsagadda uu Iahay ®inoogu deeqay. Xasilloonidi, degganaanti iyo jacaylka.Jacaylku waa geed uu llahay a dhexdeenna ka biqliyay si uu boggcenna burcad isugu mariyo, isu-soo-dhowaansho iyo isjeclaanna uu inoo dhex dhigo, xumaanta, xasadka,xiqdiga,nacaybka,cadawadda, calool-xumada, cuqdadda, cadhada, iyo ciilkana uu dhexdeenna uga feydo.Nolosha gunteedu waxa ay ku qotontaa jacayl, wax kasta oo wanaagsanina jacayl ayay ka soo unkamaan, mana jiro qof jacayl la'aantis ay noloshu u dhadhamaysaa, nolol bilaa jacayl ahina waa jid bilaa abbaar ah,waa oon bilaa iidaan ah, waa buug bilaa qoraal ah,waa cadar bilaa udug ah, waa aqal bílaa saqaf ah, waa jidh bilaa ruux ah,waana aadame bilaa aadamanimo ah. Balse jacaylka ayaa waayo iyo wejiyo badan.Jacaylku waa aayad iyo calaamad ka mid ah astaamaha uu Ilaahay &uunka wax ku tusayo, awooddiisa iyo abuurtiisana uu ku muujinayo. 新距之丁正 3ǐ z dé èújí

"Ilaahay aayadihiisa waxa ka mid ah in uu nafihiinna idiinka abuuray lammaanayaal si aad u weheshataan, dhexdiinnana uu ka yeelay kalgacayl iyo naxaris, arrinkaasna wax-ku-qaadasho ayaa ugu sugan kuwa fekeraya.”Cidda aad jeceshahay waad ka haybadaysataa,qawlkeeda waad u dhego nugushahay,khaladkeedana waad dhaafi og tahay,oo waxa aad tahay ruux degganaan dubaaqa (xiska) ka dareemaya,haddii degganaan la waayana naftu wax walba way dhibsanaysaa.

Qofba qofka uu ka jacayl-yaqaansan yahay wuu ka habnololeed roon yahay, waayo; waxa uu jeclaanayaa Rabbigii e oo uu xaqiisa garanayaa. Waxa uu jeclaanayaa rasuulkiisii suubbanaa oo uu sunnihiisii raacayaa. Waxa uu jeclaanayaa naftisa oo uu cadaab kala cararayaa,camal sanna uu haanta u culanayaa.Waxa uu jeclaanayaa lammaanihiisa oo ay nolol ta ugu toolmoon ku wada dekaynayaan guur hortii iyo ka gadaala,gurboodkooduna baro jacayl ayay ku hanaqaadayaan oo fil san iyo fac roon ayay noqonayaan.Waxa uu jeclaanayaa bulshadiisa xidid iyo xigaalba, isagana waa la jeclaanayaa,oo dadkeenna dhaqankooda ayaa ah nin waliba inta uu kuu soo joogsado ayaa loo joogsadaa,oo maalinta aad la qososhana waydun wada qaxwayn,maalinta aad afka u taagtana waydun kala irdhoon.

Sidaa awgeed; mar kasta oo heerkaaga jacayl uu kordho oo aad dadka soo dhoweysato,adiga oo aadunkaaga (cadawgaaga) saydhmada kula goobayana il dheer iskaga ilaalaynaya, nolosha guul ayaad ka gaadhaysaa,uunkna Ilaahay ayaa jacayl iyo barako kuu gelinaya.

In aad jacaylka dheeftaas wanaagsan ka heshaa waxa ay ku xidhan tahay hadba mugga iyo sida aad u taqaanno jacaylka,oo haddii aanay aqoonta aad jacaylka u leedahayba gudashada shahwadaada dhaafsiisnayn oo ay ibtaadu kuu arrimiso qaw ayaad kala dhacaysaa oo xiisaha ayaa ku beerqaadaya, hadhowna wixii ku gaadhay jacaylkaas aan shaqada iyo shuqulka midna ku lahayn ee ay kuu horseedeen aqoonxumadaada uu xubinkaagu kuu fekerayiyo xiisaha jidhkaagu ayaad u tiirinaysaa isaga, markaasaad adiguna isaga cidla'ka nacaysaa,dadka kalena aad nacsiinaysaa.

Sidoo kale; nolosha wax kasta oo la ammaanay waxa ay salka ku hayaan jacayl.

Iscafintu waa jacayl.Wax-istarku waa jacayl.Xidhiidhka wanaagsani waa jacayl.Isu-dhibriddu waa

Isqadderintu waa jacayl.Wax kasta oo jacayl.

suubbanina jacayl ayay ku sal leeyihiin!

Waannu isla fahansanayn jacaylka.

Isku dhinac ayaannu ka taagnayn.

Sifo kasta oo wanaagsan oo ay leedahayba waannu wadaagaynnay.

Xataa waxa aan garaadkayga ka dhex raadinayaa hal sabab oo aan u aaneeyo waayitaankeedan kediska ah!

Hal bil ayaan la'ahay jaan iyo cidhib meel ay dhigtay!

Waxa qudha ee aan isku samirsiin lahaa waa in ay tii Alle u timi,gurigoodiina waanigan maalin walba hormara oo geeriyi kama muuqato!

Wax kale oo aan ku sababeeyo waayitaankeedaas ma garanayo!

Imisa ayaan arkay abwaan erayo qalbiga xuluulanaya ku cabbiraya dhool yar oo ka mid ah folkaanaha ka baxaya,iyo fannaan si qiiro leh oo indhaha ay illini isku soo taagayso cod iyo laxan ugu cabbiraya,oo inta aan dhoosha ka qoslay aan iskula shawray in uu iska kaftamayo!

Ma habaqlahan iyo haleeliwaagan ayay dareemayeen?!

Ma sidaydan ayay hore iyo gadaal halmaameen ka ay u jeedeen?!

Mar ayaadsabab eersataa oo aad dhibkaaga u aanaysaa, laakiin hadda wax aan xataa niyaddayda ilmaynaysa ku maaweeliyo ma hayo!

Naaso-Hablood markii ay marayeen ayuu ku hanbabaray oday leh:"waynagan Naaso-Hablood so0 gaadhnay."

Hargeysi ma aha tii uu yaqaannay, jewigeeduna ma aha kii uu ku damaashaadi jiray. Markan waa baafis. Waa baadidoon.

Haddii uu cagaha dhulka ku hubsadayba tagsi ayuu qabsaday oo halkii uu qoyskaas ku ogaa ayuu isu sii daaya,Goljannadii Maxamed Mooge uu gacalada deggan ugu galgacalgeeraarayay ayuu afka saaray,laakiin in yar markii uu socday ayuu sidii qof miyirbeel ka soo miiraabay shanta dhabanka saaray oo uu la yaabay sababta uu intaas oo dhan u xasuusan waayay!

Mid ka mid ah dabciyada uu ku sheeggan yahay ayaa ah degdegga,waa nin degdeggu uu mataankiisa yahay. Guul kasta oo nolosha uu ka

soo hooyo degdeg aya sees u ah, jab kasta oo u kala kulmana sidoo xad-dhaaf ah oo waxyabaha aan rasmiga ahayn ee noloshisa ku waxa uu salka ku hayay ilaw.Wax muhim ahaa oo uu llaway.In ay wicitanka oo uu ilaaway. Way ugu cudurdaari jirtay maadaama aand dhibsan jirin, haddana waa insaan nool'e mararka qaar ayay ka gadoodi jirtay oo ay ku canaanan jirtay.Waxa uu xasuustay ina adeerteed Raxma in uu lanbarkeeda hapay inantaasi joogto oo mar ay soo gadhay Idil qoyskan ay isbratay,labadoodana uu kaftanku isu qabtay. Waxa uu la yaaban yahay sababta uu muddadaas bisha ah u xasuusan waayay. Laakiin muxuu ula yaabayaa,in ay Hargeysa ama miyi aadi kartaaba sow shalay kuma aanay dhalan oo inta kaleba meeraalaysigii iyo meehanawgi maankiisu magaaladoodii iyo aqalkoodii uun kuma aanay ag wareejinayn?!

Taleefankii ayuu si halhaleel leh jeebka ugala soo haaday oo Raxma uu garaacay. Laba saddex jeer ayay ka qaban weyday. Kama aanu quusan ee wuu ku celceliyay. Qabashadii taleefanka waxa xigay hadal dheer oo wax uu ku tilmaamo iyo dhan uu u qaado uu garan waayay:"maxaad noo soo wacanaysaa ee nalaga kaa siiyaa?! Maxishoodeyohow aan waxba isku falaynin ee kala bogsaday! Ma il kalluun ayaad liqday indho adakidaa?! Wuuba na soo wacayaa oo taleefankayaga uu noo deyn la' yahay! War miyaadan dhiig iyo uus lahayn?! Mise nabsigii ayaa ku soo riday?! Ihiiii Waan arkayay Idil naag laga samri karo in aanay ahayn! Markii aad sidan isu kala guraysay ee waxan la ogaa aad samaynaysay Idil niyaddaada kuma aanay jirin?!Kama aadan fekerayn in Idil aad ku waayayso?! Ma waxa aad doonaysaa intaas oo dhan ka dib in aad maslaxato oo ay si fudud kugu yeesho?!Wallay kaa tahay! In aadan Idil taf ka rogaynin! In aadan naayaa odhanayn! In aadan shaf saarayn! In aanay naag kuu noqonayn! In aadan xataa dib danbe nuurigeeda u arkaynin! Ku quuso qudhaanjo!Marka sidan la isleeyahay ee sidii barkad lagu dabbaalanayo hadba

taleefannada dadka lagu waalanayaa?l Naayaadheheenl Annagaa wax nala tusay!"Dhuudh...Dhuudh...Dhuudh!Way ku dhigtay taleefankiil

Amankaag iyo shaamareer weynaa!

Maxaa baas ee kbaldan?!Waan dareensanaa in aanay Idil ciyaarabaas ku magnayne ay wax nun la magan tabaye,maxaa dhacay?!

Halxidbaalaban aan gondaha la galay ma kuvii Agatha Christie ee xallintoodu ay adkayd oo kalaa?! Mise waa kuvii Dan Brown ee si xal loogu raadiyo dalalka la isaga kala safri jiray ee derbiyada dugaaldhigyada (matxafiada) laga raadin jiray?!

Inan rag wax aan naftiisa abaynba maareeye waan xallin labaaye, borta dhibtan jirta ee aan dhayalka abayn ee ay Idil ku magan tabay maxay tabay?!Hayaanka jacayl fabanka aannu ka baysanno waannu ka midaysnayn.Habeenkii aannu ku mnartamaynnay googaalaysiga jacaylka ee qof waliba fekradaba uu ka baysto uu soo bandbigayay waa ti sbarraxaadda dheer ee fekraddeeda ay ku cabbirayso soo bandbigtay. Gabadbii sidaas oo dhan jacaylka iila tagaannay ma boodb ayaa la ii mariyay?!

Wuxuu damac u qaadoo
Qalbigu uu daneeyoo
U dinnaahinaayaan
Dabuub lagaga weecine

Damalkaan hadhsanayaay
Ma darraad libtaydaan
Dunida ugu faanaan
Maanta dawerinaayaa?

Ducuf maaha ruuxii
Lubbigiisu da'ayee
Dermadaan dingiigaa
Layga duubayaayeey

Adigaa daweyn kara
Naftan kuu dayaysan
Dakharrada ku yaallee Ku mee,mee Dabiibaay?
In kastoon nin daran ahay Dun gumeed ka dheerahay
Dulqaad aan u diranahay Catawgana aan diidnahay
Dareengujisku waa kaa Dacaydayda lulayee
Dibindaabyadaan qabaa Igu kaa dabraysee

Deyrkaan gabbaadsadaa
Iga sii dumaayoo,
Dabkaan diirsanaayaa Iga sii damaayaay

Adigaa daweyn kara
Naftan kuu dayaysan
Dakharrada ku yaallee
Ku mee,mee Dabiibaay?

Idil:Odhaahaha ay labada isxiiseeyaa ku haasaawaan ee mar ah hadallada aan la miisamin ee iga-geeda ah, marna soo-jidashada ah,matarka gaarna cabbiraadda dhabta ah ee waxa qofka noloshiisa ka dhacaya muujinaya ah,sida:'anfaciga ayuu iga jaray', 'oonta ayuu i nacsiiyay','waa cadaw jacayl', 'waa nacab nolosha u daran', 'eedaad ayuu i markiyay', 'ehel iyo asxaabba waan ka go'ay', 'meel aan u jeedo iyo meel aan ka jeedo ayaan kala garan waayay', iwm, markii aan weedhahaas iyo kuwa la halmaala ee silica ka tarjumaya isu soo xooriyayayaan deraaseeyay meesha ay sartu ka qudhunsan tahay ee jacaylka naxarista ah ay dadku waxan oo eedo ah uga tirinayaan.

Deeq:"waynaganel Faylasoofad ayaa reeraha u soo baxdaye waa in hal laguu qalaa oo laguu xabbado ridaa."Idil: “muxuu garaadkaaga igu maqan ee faduuliga ahi cadawga ugu yahay marka aan caqli-hadlayo?”Deeq: “macnaha saaxiibtinimada ayaa sidaas ah quruxey.

Oooh.Laakiin saaxiibbada ragga ah weeyaan, adiguna saaxiibadday ma tihid.Ma kala garanayo in faduushaydu ay cadaw ku tahay caqli-hadalkaaga iyo in ay caashaq ku tahay, laakiin waxa qudha ee aan ogahay waa in qalbigu uu xaalad walba jecel yahay haasaawintaada.”

Idil;sheekoy ku nacay! Adeer dhegayso xogta oo ila falanqee.Laba arrin midkood ayuun baa sababay soomalhaadka iyo kadeedka ay dadku jacaylka ka tirsanayaan, waana in xadkiisiila dhaafiyay oo laga badbadiyay,iyo in aan marin ku habboon loo adeegsan.

Jacaylku waa jid loo maro hadba wixii la doonayo in wanaag lagaga jibbo keeno,jid la canaantaana maan ay ka dhaadhacaysaa ma jiro.Jidka aad maraysaa marleyba canaan ma laha, ee cidda maraysaiyo ujeedka loo marayo ayaa eedda yeelanaya.Haddii uu shaygu xadkiisa ka bato liddigiisa ayuu isu beddelaa!Haddii wax waliba inta ay yihiin lagu ekayn waayo eedaad aan laga filanayn ayaa looga dhaadhacaa!

Je
a
n
yl
a
m
or
ka
bil
ok
ia
d
he
d
p
ua
p
ke

Marki uu nebiga warkaasi gaadhay wuu u yeedhay go isaga oo lu leh: "waar anigu habeenkii salaatulayl waan u ng kacaa oo aan tkada waana aan seexdaa. Maalin waan a. soomaa, maalinna waan afura Haweenkana waan nr guursadaa. Waar qofka sunnahayga ka baydha isma oc sheeganno! ” Waxa ugu mudan ee adduunkan la inoo ab io keenay waa cibaado,asxaabtaasina waxa ay yidhaahdeen nd waannu u go'aynnaa. Waa cibaado hadda! Waaba wixii ee loo abuuray! Haddana waa loo diiday iyada oo aan ka da xaaraansanayn. ad

ay
ug

gondo ba nud ch asuabul nebiga daya dancay in ay chandu,sunnayaashaahba go'aan oo intaas ku waajibtay

Ubuxu waxa uu ku nool yahay biyaha, haddii laga

iyo Boiaulabhan Sudderdas mid vaita waka lu sanaystay tanbadiyana xididkiisa ayay qudhmiyaan oo wuu chadh.a Mid aya yidhui: "anigu maalin kasta waan curdindhadhaa (siqiirsuujismaa).Sidaas si la mnid ah; haddii ubaxa waraabka laga yareeyo iyadana xididkiisa

soomayaa co bai"anigu haben oo dhan salad ayan u ayaa ooma oo wuu dhadhaa, wuuna dhintaa.Wax waliba tagnaanayal" Kii saddexadna wepwaxa ay leeyihiin xad iyo layn toosan oo ay raacayaan 靜 uu yidhi:"anigu

Deeqow, haddii laynkaas hoos looga dhigo oo la gabadhba guursan maayo ee Ildhimana ay oo la buunbuuniyana ay ka daraaan oo ahay dar diayan shahwadayda u1 xakamaynayaa!"liddigooda ay isu beddelayan!

Deeq:“sababma?!”Idil;ka-badbadis ayay sameeyeen oo xadkeedii ayay dhaafiyeen,waana loo diiday, sababtuna waa in haddii shayga xadkiisa la dhaafiyo uu liddigiisa isu beddelayo.

inteeda kale xeerarkaas lama-taabtaanka ah ee qofka xumaha ipo

dhacaya,haddi laga badbadiyana bayhoof ayaa looga dhacayal Markil ay jacaylkii ka dhigteen macbuudka qarnigan iyo sanamka la caabudo,ee darti wax walba loo sadqeeyo, darti hadalka loo sidhaahdo,darti ficilka loo sameeyo,darti nafta,ehelka iyo asxabtaba loo dulmo,dartii loo noolaado, dartiina loo seexdo ee loo soo tooso,waxa uu noqday alhuumo iyo ibtilo aadmiga kala irdhaysa oo loo gabbaadsado wixii xunbal Waxa uu noqday marinka loo sii maro Fumashada iyo magaalaysigal Waxa uu noqday jidka loo qaado dhanka cudurrada nafsiga ah iyo kuwa jismiga ahbal Waxa uu noqday wed aan tudhin!

Cilladdu dhankiisa ma aa ee waa qaabka ay bulshaweynta maantu isaga u adeegsatay!

Markii xadkiisii la dhaafiyay ayuu noqday lidkiisii ahaa nacabka iyo cadaawaha, mana aanu noqon jacaylka laftiisii nacab ee waxa uu ku noqday qofkaas sida ka-badbadinta ah u adeegsaday!

Kaasi waa qodobka koowaad ee sababay in jacaylka loogu yeedho weedhahaas arxan-darrada iyo eedaadka ka turjumaya Deeqow, dad badanna uu noloshooda karkar iyo kadeed u horseeday.

Qodobka labaadna waa in marinkiisii ujeed aan saxahayn oo kii u qalmayay aan ahayn loo adeegsaday!

Tii doonaysay in ay mid bakhaarrada jeebkiisa jabsato, kii doonayay in uu mid khasnadaha jidhkeeda ku galgalimaysto, tii mid ay danteeda ka dhex aragtay doonaysay in ay soo xero gashato oo lubbigiisa ay hanato,qofkii doonayay in uu mid uu xarash (cuqdad) u hayo ka aarsado... dhammaantood, waxa ay dadkaas iyo kuwa la halmaalaa ujeeddooyinkoodaas silloon u maraan hal waddo oo ah dhabbaha jacaylka. Waxa uu noqday jacaylkii gabbaad xumaha loogu dhabbacdo (gaatamo).

Kan tallaabadan qaadaya ee jacaylka u sii marayaa isagu wuu ka aamin baxayaa jacaylka maadaama uu hayo tusaale nool oo ah in uu isaguba jacaylka qof ku dagay (khiyaamay) oo ay suure tahay isagana berri in sidaas uu mid ku sameeyaa,eedda wixii meeshaas ka dhacayay ee isagu uu

geystay iyo mustaqbalkiisa dhib kasta oo kaga timaadda xidhidhka uu jinsiga kale la leeyahayba waxa uu tuurta u saarayaa

magacajacayl

haddin in dabinki ugu dhacy oo bals helay un sguna jaceykao42

aami

n intaas laga jaray in uu isaguna dad kale ka si jaro.D og

pada hbodasababood wa bladh horsecday in dath.g 00

ama Wgsudindl dhaafyecn oo sanamn ay cabudan ay ka

Idi: isha ayaad ka ridday. Jacaylku waa naxaris iyo digten,aney ka maydhantay!"samaan hadi Balse in badan oo duulasha wayhan nool ahi lix iyo laba ayay isuge madixisina minjo ayay u rogeen, naxaristaas iyo wanaaggaas jacayla lagu sheegayaana iyaga uma qudhqudhsana oo ka mellefan.Qolada intan sidan u dhaaddana badanka waxa ku dhasha dareen kale oo daarran in jacaylka iyo dantu aanay meelna iska soo galin,ee gofku ama uu dantiisa raacanayo oo danaysteuu noqonayo,ama uu jacaylka u go'ayo oo danihiisa uu ka tanaasulayo.

Yaa yidhi dantu waa ku liddi jacaylka Deeqow?!Marka uu qofku u sheegayo ka kale tobannaan wanaag oo uu ka arkay,tobannaan dabci oo uu ku gaclooday, iyo tobannaan arrin oo uu kaga helay, miyaanay ahayn waxyaabo dantiisa ah in uu ka arkooday oo uu ku raacay, ma qofkan uu wanaagyadaas ku sifaynayo ayuu dantiisa ka fekereyaa?

Jacaylkuba waa danaha kala duwan ama isku midka ah ee lammaankaas oo la isku waafaqay in la wada meelmariyo. Waa ii danee,aan kuu daneeyo'e. Waa dawo ii nogo aan dabiib kuu noqdo'e.Waai taageer aan kuu

hiiliyo'e. Waa i sii aan kuu dhiibto'e.Qof kastaaba dantiisa ayuu daacad u yahay, uu daba ordayaa,ee roorsigaas danta ayaa mar jacaylka loogu gabbadaa, marna jacaylka lagu lammaaneeya oo inta la isla fahmo la isla jaangaadsiiyaa,waana qof iyo sida uu u adeegsado, laakiin danta iyo jacaylku isma didaan Deeqaygow.

Hal mar ayuu nolosheeda kaah u baxay.

batbondidtecda nogon lahaa luysludl nafeodan gudaba iske cura ce

Macalliminta oo dhammi way neceb yihin, si ay iyaga iyo weowand ce samayso sisaduba inta zanay bilabmin,ardayda qrama saaray.Nooji meesha ay ka timi cigaabtan ah in ardayga loo dido cilmigi ha sugsago'e. Waxa loo samayn lahaa toban ciqaabood oo kale isaga

Wasa jira hal macallin, hal bare oo isku-kalsooniyi ay ka muuqato.Bate noloshu ay agtisa ku fududdahay oo aan waxba adkayn,cid aan ardayda cabbudhin, xorriyadda aan ka qaadin, sida askartana aan digtooni galin ookii jubu yidhaahdaba aan dibedda u eryin. Bate la wada jecel yahay, xiisaddiisuna ayba ka mid tahay sababaha ugu waaweyn ee arday badani ay dugsiga u soo xaadirto, maalinka aanu fasalka u lahaynna dhantaalnaan weyn la dareemayo. Deeq MIaxamed,macallinka Taariikhda dhiga. Macallinka sharraxaaddiisu ay tahay ta keliya ee dhegaysigeeda laga siman yahay. Macallinka aan malaayacniga manhaj-ku-sheegga ah ardayda ku maaweelinin ee waayaha nololeed ee sugaya u carbiya. Macallin ula dhaqma dhammidoodba sidii gurbood uu dhalay.

Marar badan ayuu falanqeeyay arrimo iyada si gaar ah u taabtay.Waxa uu galaaska ka furay doodo. Waxa uu ka sheekeeyay sida qoysas badan oo

Soomaaliyeed ay ubadku sida shilka ah ugu dhashaan iyada oo aan waxba loo qorshayn, ee hadhowna nolosha rarankeeda iyaga oo cagacad loogu sii daayo.

Waxa uu ka sheekeeyay jacaylka iyo sida uu qofku ugu baahanyahay.Waxa uu tabtay boogihii ugu xanuunka badnaa ee qalbigeeda.Waxa

ampy Shoakn deerd ah in auo an tunoatay muabuba olke cons,jacaylka holaca gudeheeda ka oogan hobote stothan af uL basana la goy beanaya cubyoradh men farta faraha ka dheer ka dhigay.relat yu boga on tan tiead a lahapn ce ofsla ioa hor rume oo iany oo dibecda magan. Ma aha macki koowad iso bi rubnan

- “ Ii warran Shukri?”-“Khayr -"Maxaa laguu soo saaray?”-"Ma garanayo! In ay macallin.” igu tacaddiyaan way ugu baxdaaba!"-"Hadda -dheriga karka waxa ka keenaa waa kulka!""Laftayda ayaa dherigaas ah oo xadgudubkoodasi uu karkan aannu maalin walba isku haysanno iga keenayaa!""Haddii aad dhanka kale iska taagto oo xaggooda aad ka eegto tolow iyagu garta ma yeelanayaan?!" _"Ha ka yaabin! Ma bahal ayaa isweydüinaya ugaadhiisu in ay ka xaq leedahay iyo in kale?”-"Hadda Shurkiyey intaas oo macallin kuma aanay heshiinin in ay kugu xadgudbaan!”-“Haddana ilko abeeso hoos ka xidhiidhsane waa kuwaas aad arkayso!”Markii uuarkay in aanay denbigaas qaybteeda marnaba in ay qaadato oggolayn ee si walba ay iyadu isula saxsan tahay ayuu sheekada beddelay.

-"Ma dhibaato dhanka ehelka ah ayaa jirta? ” -"May macallin." 'Haa' ayay se niyadda ka leedahay! 'Haal -"Ma ardayda ayaad qaar is'haysaan?"-"May

macalin."Haal Dhammaantood way i neceb yihiinl Iima Ehelkuba waa ka halkaa na dhigay! Aabbe iyo hooyo aannu ku dhaadanno ma aanaan arag! Degaan fayowna kama Dhammaantood cadaw ayay i yihuin! Hibadayda ayay ka aanaan iman!'
masayraan'

"Dhawr jeer ayaan ufirsaday oo aan idin arkay in aanu ardayda ho ntaealindina bndinia sidhidh wannagsant idina dheanp ard "Hadda waa til arawelo ay idinku habaartay waxa ad

-"Macallin waxba ma jiraan. Wax waliba waa cadi.”-“Buugta ma akhridaa?”

"Mayl Waan akh'akhriyaa laakiin kuma badni.""Ma og tahay hadba garaadkaagu in uu kobcayo in u dhiganta inta buug ee aad akhriday?”

_“Haa!”

-"Maxaad wax badan u akhriyi weyday markaa?"-"Nafsad ayaanan u haynin.”

_"Hoo.Qaado buuggan Maana-Faay.Waa sheekofaneed macaan oo qiso weyn xanbaarsan, macnayaal badarina aad kala dhex baxayso'e.Waa hadyad ee guddoomo."

-“Mahadsanid macallin.”

-“Adiga ayaa mudan Shukri."

Waxa la gaadhay xiisaddiisii oo inta uu macasalaameeyay ayuu iska kacay.

Hal mar ayay is'aragtay isaga Isaga00noqday nin500 noqdayqofka nolosheedaba ay si dhab ah u jeclaatay.doid nur to tenasiosio Nio hel mar nolosfa y quan la gy rejo u geliyay.

diirdiiman Laakiin higilkiisa, haybadda wejigiisa, iyo hadalkiisa mata b eago, nin ciarnhaas loogu dhacayo ma aha Nin x8.40Bray ku hapsau, dawladida ayaan war ka hayne madaxa sirdoonkgu loo magacaabi lahaaye!

*Waa kan ninkii aan intaas oo sanaba sugayay. Waa in aan borta Ninka qudba ee u galm hibadayda iyo waxgabadyadayda in uu ila wadaago.lanbarkiisa belaa.*Malinkii xigay ayay xafiska tagtay oo inankii gacanyaraha ahaa ar u sheegtay in uu macallin Deeq hawl u diray oo ay soo dhammarsay maantana uu xog ka Waa ardayad iyo macallinkeed ee ma jirto sabab uu gacanyarahaasi lanbarka isugu adkeeyaaye farta ayuu ka sugayay, isagiina aanu maanta u lahayn dugsiga 0o uu saaray.Haddii taas ay ka dhabaysay, waa in la keenaa maqan yahay, sidaas awgeedna ay lanbarkiisa u baahan qorshihii Deeq loola tegi lahaa ee lagu wici lahaa. Indhihiisa tahay. kulkulul, joofkiisa, wejigiisa kakan, iyo dabcigiisa dushaas marka laga eego qallafsanaantu ay ka muuqataa ma aha mid ciyaarahaas in loogu dhaco laga dhadhansanayo.

Maalinkii xigay ayay wacday. Bariido ka dib way isu sheegtay.Waxa ay uga warrantay buuggii Maana-Faay ahaa in ay ka takhalustay.Maana waa gabadh yar oo miskiinad ah, noloshana u cusub. Dabinnada loo dhigayo ma aanay fahmi karaynin. Ma aanay feejignayn oo cid walba way rumaysanaysay. Sidaa awgeed; wax kasta oo haleelayba

dhammaysay, in ay u so0 celisana ay doonayso. Balse taas ayaa sabab u ahayd.waxa uu u ballan qaaday in uu buugaag kale u keenayo.

Amgtay in uu yahay nin debecsan oo aan wada qallafanayn ce ugu Danayn aan yarayn ayay darentay. Ugu danbaynti in ay heshay gof Deeq u qadday ayaa si siynaday. Dhawr mar oo kale ayay soo wacday ay kala hadashay, isaguna hadalka wuu la waday walow aanay macne buuran u samaynayn.Maalinkii danbe ayay damacday sidi bisadaha in ay indhaha isku sii gabsato oo waxa kasheeda gubayaba ay Deeq dhabta u saarto. Waa mid ka mid ah go'aamadii ugu adkaa ee ay nolosheeda qaadato.

Ma iga agbalayaa tolow? Oo muxuu iga agbali waayay? Bal jamaalkayga ijo jooggayga day! Fifircoonidayda ijyo faridnimadayda dayl Aniga oo kale ma aba ti iyadu gof raadsan labayd ee waxa aan abay ti ay siddeeda bilyanba iyada soo raadsan lahaayeen! Jaaniskaas soo maraya iyo fursaddaas aan siinayaa miyay dib danbeba u soo marayaan?! Haddii uu isu kay xawaasheeyo isaga ayaa farta dhexda ka ganiini!

Hoteel ay ku ballansanaayeen ayay isugu yimaaddeen goor fidaddaw ah. Sheeko guud oo afbilaw ah ka dib, markii ay xoogaa cunto ah qac ka siiyeen ayay sheekadii isyara furfurtay. Maadaama ay iyadu kulankan soo agaasintay iyada ayuu ka dalbaday in ay warka soo deyso.

Wax ay isyara marmaroojiso oo madaxa ay warwareejisaba...wax ay xishood badan iyo khajilaad ka bixi weydaba, ugu danbayntii way badheedhay oo hal mar ayay iyada oo naqas kulul wvadata ka soo boodday weedhii adduunka ugu caansanayd, weedhii ugu macnaha ballaadhnayd,haddana sida loo adeegsadaa ay ugu macnaha darnayd.

"Waan ku jecelabay!"

Wuu ka filanayay intan. Wuu ka arkay habdhaqannadeeda iyo sida ay u soo dhoweysanaysay in ay wax soo riixriixayaan.

Si deggan oo debecsan ayuu isaga oo u dhibraya isugu deyay in uu u qanciyo, jawaabta ku habboonna uu siiyo.

Ma aanu ahayn jacaylkoodu kudanaysil Ma aanu ahayn wakhti-lumis!

Ma aanu ahayn maaweelo!Wuu hubaa Deeq in carshiga boqortooyada qalbiga Idil fadhiyo sida ay carshiga qalbigisaba iyadu u fadhido. uu isaguWaxa uu soo galay maqaaxi caano-geelle Casariye xoorka iyo qing odhan jirene markan dhako uu ku dhuftaba kuma tallo in wa kabkabo casariyahaasi mooyaane.Feker aanuI garanayn dhan uu ka bilaabmay ayuu galay. Waxa isjidhaya hummaggii Idil ee samaha iyo isfahanka ay afarta sano soo wada qaateen.

Sida ay u ahayd Mona-Lisa-da ku farshaxamaysnayd dhoosha qalbigiisa ugu qotada dheer ee uu ugu taamayay, markii uu helayna uu ugu fara'adaygay.

Sida ay ugu sheegtay in uu yahay halyeygii riyooyinkeeda ee tan iyo maalinkii ay dumarnimo iska dareentay ay ku hammiyaysay in ay la arrin-iyo-adduun wadaagto.

Haddii ay jacaylka sidan isula fahansanaayeen shaydaankan baas ee ka dhex adeegay muxuu ahaa?!Waxa ku soo maaxanaya hadalladeedii suugaamaysnaa,falsafadaysnaa,aqoomaysnaa,caqliyaysnaa,caadifadaysnaa,ee naftuay u riyaaqaysay.

Idil:

Gacaliye;jacaylku waa faro-ku-hayn,cid walbana jacaylkeedu weji u gaar ah ayuu leeyahay sidi aynnu hore isula soo aragnay marar badan,haddii aynnu sidiisas ula falgallana waynnu ku badhaadhaynnaa.

xaaska, xaajiga, ubadka,iyo qarabadaba'e, waa in aad joogtaysa

jacaylkooda,wixiiu wanaagsanna aad u samaysaa adiga ayaa dinbarsanaya'e (ka faa'idaya'e).Ilushay e waxa uu kugu jecel yahay wixii uu ku faray oo zad fartoonto, iyo wisi uu kaa reebay oo aad lka reebbanaato, haddi zad ku gefana aadan isku ilaawin ce aad degdeg uga soo laabato,addoonnimadzadaiyo isdhuldhiggaaga, in aad keligi caabuddana wuu ku farxza oo uu ku faanza!

Waalidku taag iyo tukur wisii ay hayeen adiga ayay ku dul toomiyeen, inti zad tabaha nolosha u tababaranaysay, taallooyinka carruumimana zad ka soo tallabaysay. Kolkii maanta uu tunkaagu weynzaday wasa ay tabanayaan in aad tigaad iyo meel uu tus ku hooray defiso, taaha iyo tawstana wehel taam ah zad uga noqoto,jaczylkooduna waa tabantaabintooda iyo daryeelkooda

Xoaskrigu wara ay kugu jeceshahay in zad la kaftanto oo zad koolkooliso, la qososho oo aad la quud-wadaagto, hadal wacan iyo hadyado kedis ah haba yaraadeene,iyo in aad saqceda masruuf,manin iro golyidba (galmo) u guddo, iyo waliba dhaqan-wanazg.Nebigeenu 흑 wana uu yidhi:

-Ka idinku wanaagsani waa ka chelkisa ugu wanaigsan, aniga ayzana chelka idiinku wanaagsan." Tirmidi: 3.895.

Ninkragu wara uu kugu jecel yzhay in zad ilqabatin u reelato oo uu quruxdorda ku ilwaadsado, in zad hawrzar samaato oo aad hif la'zato,in aad arzggiisa, urintiisa iyo ibtiisaba u roonzato,in johoradnimada:da iyo jamalkvga ishiisa mooyzane aanu 2admi kaleba ku indhodoogsin,in dhuunigragu uu dhadhan u yeesho oo waa ti la yidhi taris-run iyaduna ku was la,iyo in aad rugta nasashada ugu roonzato 0o gadin ku dinqiyin. Waxa intaas si dheer anshax-suubbanzanta iyo edboonzanta awalka horeba uu kugu sushay.

Ubadkragu haddi zadan taxdhigin (gaboobin) wasa ay kugu jecel rhin in zad maaweeliso, la biitaysato, oo aad la bardoodanto, in ead macmacaan iyo was ay u muhdzan hore ugu soo quaddo oo sad zlukooddo (baashirto), kolkaas awlaaddxada marka aad guriga ku soo raddan tahay dhegta ayaa tragan, mana aha in aad tadhihiso (kibriso)00 aad xumaha u horkacdo.

Sidna si la mid ah, ku dedaal sidü cid kasta oo xidhidhlahayd oo aanu u xagaldaaceen wanaagsani uu idinka dhexeeyo aad u sii joogtayn xataa haddii uu isagu gamashiyo (gaabiyo) dhankaaga ka gigtir(adkee)(maroorsani) uu idinkadhexeeyana cid kasta oo xidhiidh sirgacani naxariistajacaylka iyo saamaxaad iyo isu-soo-dhowaansho la samee,gacaltooyadana la wadaag.calo thu ma shu Degow war nin tro gabadh lau kooban,ce woauls hacauy goar ah apay xaq u leedahay oo gofha siyaa uu samaan unb dheefayo.

Deeq:

doanan, xata haddi baahiyohooda oo dhanba uu u dhanmaysio baahiyo aan jirin ayay abuurtaan.Wan hubaa in aanan ku talaxtegin wanaajinteeda heer aan gaadhsiiyay in ay iga xiise-dhacdo.

Wan huba in aanan u geysan dhib caadifadeed iyo mid nafsadeed oo ay ka xumaato oo in ay iga indhaqarsatou sababta.Handadaadda ugu weyn gabadh wax jecel waxa ku haysa gabadh kale oo seereheedas dhankooda soo eegta, taasna Deeq ayaan u ahay oo xata haddi la igu dul wareegayo in aanan dheg u jalaq sünayn sida ay wedkeeda u hubto ayay uga dheregsanayd.

Maxaa helay Idil?!

Aaway indheergaradnimadeedii?!

Xataa waxa dhacay la socodsiina ma garan weyday?!

Sownigii ku ammaanay indheergaradnimadeeda iyada oo ugub ah uuEebbe ku mannaystay, ma ugubnimadeedii ayaa indheergaradnimadeedii ka xoogganaatay?!

Intifaacsi nololeed

Aakhiro ayaankay

Aayaha naftaydaay

Adaan kaa arkoodee

Anna idibilkaagiyo

Inaan kuu ahaadoo

Ilays kuu iftiinshoon Kuu
igadh salaaxaa

Ashkir aragsan bilaney

Iinla'edebsan cuganey

Eray wacada weeyoon Axdi
kuugu marayaa.

Cawo iyo ayaaneey
Udug iyo
naqdoogaay
Ugub soo
kacaamaay
Indheergarad laftyey
Ehelkeed
aqooneey
Ardaageedu
gacaley
Agteeduna
nasiniyo
Xasillooni idiley
Weynihii ku uumaa
Idil bilay qudhaadoo
Iidaanka noloshiyo
Kaa dhigay abuur
cugan.

Sida uurkubaallaha
Anbashada ka dheer baa
Oogadaada garashada
Ifkeedii ka muuqdaa

Ururkii isyeeshee
Iska eeganaayee
Isu udubdhexaadee
Isu il iyo gacana

Ilaahayna eedaad
Arrinkood ka madhiyiyo
Aynnu noqonno aqalkii
Rabbi uu ammaanee.

104

”.

104

Riyada aan la dhiesayay sidas sahalada ah ee in hal mar la iswayo

Heerka ay iijoogtay iyo halka annu maanta joogno bal day?l Dunida meel ay kaga sugan tahay ma garnayo, aniguna xaaladda aan la difaysanahay xog iyo xal toona kama haysol

105

Galab barkhadeed,laakiin iminka galabbaasulamuuqata ayay mitid eholbals minla wasdarsthada n bachanmegro bogu.teal rectbo madama wax randhiis ah oo kale aanay badanka irtn.ahmaadaama dharki qoliniebinta ay xidhanayso saxibaddeed,xafladdeedaskandu-dhalashadaahayd aanay maqnaan karaynin. Iyada oo quruxdeedii Labis ku darsatay ayay xaadirtay hotelkdi xafladda. Mooji in ay indhaird marka aanay maykab marsan ee ay sidooda u dhaashtan way ka soo- ahaanba,oo dushaasna waxa aad ka arkaysaa abuurti Ilaahigaahayde qabto. Deeq oo isaguna saaxiibkii hore u soo raacay ayaa goobraa xaadir ku ahaa.Waxyabaha ugu qiimaha badan nolosheennu si kedis iyo lama-filaan ah ayay inagu soo galaan badanka. Haddii aad dib u firiso waxyaabaha aad ku dhaadato ee aad haysato ama aad soo heshay waa wax badanka aan qorshahaaga iyo ku-talagalkaaga ku iman ee si kedis ah kuu soo galay.Waa laba qof oo barbaarnimo soo maray, soo haasaaway,soona dhaafay marxaladdii in la haasaawo uun la xiisaynayay. Mar ayaynnu raadinnaa qof jidh ahaan buuxinaya halbeegyada laabta inoogu qoran,hadal ahaan iyo dhaqan ahaanna sida aynnu xiisaynaynno samaynaya.Waa marxaladda barbaarnimada ee qofka dhan aynnu kuqiimaynaynno 'kama aanan helin' iyo 'waan ka helay', ama 'waxaas oo aan xiiseeyo ayuu ii sameeyaa.'

Balse marka uu qofku dhawr derbi soo qaniino, waxaas hayayna in uu xiise ahaa uu fahmo, xunbo iyo xiiseba in ay dhacaanna uu ogado,waxa uu gaadhaa marxaladda taas xigta oo bislaanshiiyo ah. Waxa cadifaddeenna. Markaas uu bislado qofku, jacayi iyo xidhidh

Jammaane dhex mara marka ay noqoto, waxa uu raadiyaa qof bini xagga danbe marsado ayuu raadendaa qof wanaaggisu uu ka badan inta ay ku kala duwan yihin, noloshana ay isla fahmayaan,naftisa iyo xisayaashii iyo waxyaabihi aynnu ka helaynayba safka u danbeeyaayay marayaan, qofka aynnu intaas hore ka helno ee dadka ugu soo dhodhowaada ayuuna qalbigeennu dhankiisa u janjeedhsanayaa.

Labadooduba markan way ka soo gudbeen marxaladdaas ka-helitaanka iyo u-danaynta xiisaha ah, tobannaan qofna mid waliba wuu la soo haasaaway, laakiin ilaa hadda midina ma hayo qof qalbigiisa si dhab ah u dega oo uu aayihiisa oo dhanba ka dhex arko.

Markii uu arkay quruxleydaas dumarka ka dhex kaahaysa damac ayaa ka galay, in kasta oo aanu damacaasi ku yarayn oo uu nin u yahay,haddana wuu isceliyay. Cabbaar ayay inantii maankiisa ka bixi weyday,sidii kuwii horena ay dabayshu qaadi weyday. "War *waa intaas* oo ay *wax khayr leb la soo bagoogan tabay eemaad isu qaawisid?"* ayuu isyidhi.

-“Lagaa qaad.”

-“Lagu salaan quruxey."-“Ina abti wixii aan ku odhan lahaaba xilli ku habboon ayaan u dhiganayaa oo meesha aynnu joogno ayaan haasaawe badan inoo saamaxayne,haddii aad lanbarkaaga i siiso sida ugu qurxoon ayaan u qaadanayaa, weliba wicitaankana aniga ayaa kaaga soo horraynaya ee adiga kaama sugayo,haddii aad diiddana halkaas ayaan ka baxayaa."

-"In kasta oo aad ka soo boodday waddadii inan lanbar lagaga qaadan jiray oo dhanba, hadIdana cudurdaarkaagaasi tixgelin ayuu mudan yahay.”

-"Noloshu marar badan waxa ay ku dhadhantaa in rasminimada laga saaro. Xataa waxyaabaha inaga

qosliyaa waa hadalladii aynnu naqaannay uun oo sidii rasmiga ahayd ee aynnu la qabsannay aan loo odhan.”

-"Malaha waa sababta aan dalabkaagii koowaadba nafsad ahaan ugu aqbalay in aad u qalanto in aan xidhiidhkayga ku siiyo."

-"Kollay nin weyn oo aan cadkiisa dhacsan karayniwaa Allow wihale xobohudhe mfsudhands in andan ba goonamayn manls nin weyn ugu dedaalayaa."-“Aragnaa!”kukala qaateen.

Muddo Halkaas ayay lanbarradii ayay hag shedaysaauyen Midiba ka kale waxa uu ka arkay wasLuchaingka soowaayay.Bislaanshiiyo!badan oo uu damac ka galay barbaarnimadakacaakuf

Waaya'aragnimo! Haddii aynaan waayaha badan soo marin oo waayahu anay ina karin weligeen qaychin aan bislaanin ama Waxa ay bilabeen in ay siguud u wada falanqeeyaan yacyacood ayaynnu ahaanaynnaa.mavducrada dhallinyarada samaynta tooska ah ku leh, waxbarashada,siyaasadda dalka,iyo saamaynta ay dhallinta ku leedahay, mustaqbalka dhallinta hadda joogta sida uu u eg yahay, iwm, ilaa ay markii danbe u dhaadhaceen in ay si guud uga wada sheekaystaan arrimaha la xidhuidha jacaylka iyo xidhiidhada,kalsoonida,guurka,haasaawaha,isqadderinta,sif aha jacaylka looga dhigo mid midhadhal ah, furriinka, dabciyada ninka,dabciyada gabadha,isfahankooda,iwm.Waxa dhammaaday lix bilood oo midiba uu ka kale in ku filan kaga bartay. Maalinba maalinka ka danbeeya xiisuhu wuu ku si weynaanayay.Waa laba qaangaadh oo bislaaday. Waa laba doonaya qof insaan ah oo intiisa wanaagsani ay u cudurdaarayso intiisa xun.Waa dabci haweene, in kasta oo gacloodka Deeq uu iyada ku horreeyay,haddana digtii askarta ayay gashay oo in xataa wax laga dareemo ayay si walba isaga ilaalisay. Deeq oo dareenka kaga danbeeyay,laakiin u arkay in ay tahay middii uu intan oo sano sugayay ayaa damcay in uu soo dhiirrado. Waa laydhii caafimaad ee ka maydhi lahayd xusuusta inan kasta oo qurxoonayd oo inta uu ka helay uu dib uga hakaday markii uu ka arki

waayay bislaanshiiyo in ay gaadhay.Malaha haasaawaha dhallinta ee hore ee badanka ka xumaadaa waa dabka karinaya ee bislaanshiiyaha gaadhsiinaya, la'aantiina aanay sirta nolosha iyo jacaylkaba fahmeen.

Mooji!

Habeenkii danbe ayuu casuumay, maadama uu kalsooni badan ku aanay ku darcemin, si wanaagsan 0o ay cirkeeda ka bogatay ayay u wada galay:-"Ina Cabdillaahiyey; ina abti, inani waa sugto wilha waa sahan,innagu se hal mar ayaymnu sugitaan iyo sahanba ku wada jirnay.waa xanuun, weliba waa xanuun u dhigma ka marka meel laga wada bislaaday aad adigu yacyacoodka ama ceedhinka (qaydhinka) ka tahay.Waxa aan kaa arkay wax kasta oo aan doonayay, waxana aan kuu arkay in aan aayahayga iyo ubadkaygaba kugu hallayn karo. Waxa aan kuu arkay in aad u qalanto dareen kasta oo aan bogga iyo beerka ku sido in aan kaa waraabiyo. Waan ku jeclaaday, waana aan ku jeclahay!"

-“Waa markii iigu horraysay ee noloshayda aan arko nin sidaas isaga oo indhahayga u eegaya weedhaas si aan gabbasho lahayn oo cad iigu yidhaahda!"-"Malaha nin ay ka dhab tahay ayaadan hore ula soo kulmin!”

-"Waan ku jecelahay' ma og tahay Deeqow in ay masuuliyado iyo culaysyo badani ku lammaan yihiin oo aanay hadal si fudud afka uga soo baxa ahayn?!”

-"Waan ogahay in ay tahay mid ka mid ah ammaanooyinka iyo masuuliyadaha ugu adag ee noloshan inta la joogo la qaado. Waa sababta aanay sida dhayalka iyo kaftanka ah iigaga soo bixin.”

-"Haddii aan ka cudurdaarto ka warran?!"

In kasta oo uu ka naxay weedhaas, haddana warkiisu waa dalab yeelmo iyo diidmaba sugaya, isaguna wuu dhaafay waayihii digtaatooriyadda caadifadeed.

-“Arrinkani waa masalo qalbi ee ma aha masalo caqli Idiley,qalbigana go'aankiisa in la tixgeliyo ayaa marar badan ka mudan in doodda caqlaaniga ah lagu dhegganaado. Noloshaada adiga ayaa xor u ah,haddi aad diiddana waan kaaga mahad naqayaa,laakiin in aad xiise ii hayso in aad igaga aqbasho adiga oo isleh gadaal ayuu qalbigaagu ka oggolaanayaa ayaa igaga daran!"

Waan ku jeclahay' macneheedu waxa weeyaan in aan noloshaada dihib to dhechoaka oobiryo aran niboa,adigana dhibtuada man heh qaado,dheeftaadana aan kula qaybsado. nacasnimaday

da,Waxa aan kuula imanayaa doqonniimooyinkayga,ilnaiyo,

io silbon kasta oo aan aadame u ahay oo aan leerahayWasa aad ii nogonaysa hu' i astura, foolxumadayda astur,ceebahayga astura,xumaystayda astura, hammaddayda astura,goldaoolooyinkarga astura, indhaha uunkana iga qariya, aniguna tabtaas ayaan kuu noqonayaa. illin eenayaa,Tobannaan habeen ayaan indhahaaga dhabannadaadana ay qulqulaysaal Tobannaan habeen ayaad ka gam'i waayaysaa murugo aan ku baday! Tobannaan dabci oo aad leedahay ayaad dartay uga tanaasulaysaa! Tobannaan dbci oo aadan lahayn ayaad dartay u samaysanaysa! Aniguna intaasba sidaas

ayaankuugu noqonayaa!Waxa aan kugu soo biirinayaa uur iyo wallac, fool iyo soo-jeed aad ilmaha habto,iyo kadeedkaas dabada dheer ee nolosha xaasnimo ay leedahay, anigana intaas in u dhiganta oo nafsad ahaan aan ula rafaadayo ayaad igu soo biirinaysaa.'Waan ku jeclahay' macneheedu ma aha janno ayaan ku geynayaa,ee macneheedu waa in aynnu jidka isu fududaynno. Waa marinkaas dheer ee kakan ee wada qodaxda iyo qobtolka ah ee nolosha in aynnu isku dhaafno. Waa in safarkaas aan hakashada lahayn aynnu dhibaatooyinkiisaas sii wadaagno, dheefihiisana aynnu wada qaybsanno. Waa in aad noqoto udubdhexaadka noloshayda, aniguna aan udubxooggaaga noqdo.

Waxa iman doona mar aanay qaabka jidhka, midabka, dhererka,hantida, dahabka, iyo guryaha qurxooni waxba tarayn ee dareenka gacaltooyo ee naxarista huwan ee

laabta la isuguhayaa uun uu noqonayo sayidka mawqifkaas, waana marka lammaanaha midkood uu bukoodo, xaasku ay uur yeelato, ama ay foolanayso ee geerida iyo

nolosha ay u dhexayso.Ma garanayo talo nolol qoysnimo ku saabsan ho la sin karo qo f oo ka wanaagsan in uu guutrsado qof ay muuxchoodn tar kasta oo intas ka soo hadhayna ay jidka dhexe ku hadhayuan oo aanay higsiga guurka ka dhabaynayn.Nidkoodna ma doonayo jacayl inta hasawaha ku eg, ka dibna isaguna uu u quudho, in xata marka ay da'noqdan uu ugu heesoS uu waayi lahaa waxa dhici lahaa!

Qofnaba fudayd kuma nalloonayo 00 noloshaba wax fududi kama jirman,jacaylkna waa halgan iyo loollan ugub oo daba dheeran doona iminkaba iska sii ogaadaana waxa ay ka saacidaysaa in uu si niyadsami ah loollan kastaba ula noolaado oo ay noloshiisu habsami ugu socoto.Lammaanaha noloshooda qoysnimo sida ay tahay u wadaagayaa waa caqli caqli fahmaya, qalbi qalbi dareemaya, ruux ruux la jaanqaadaysa, iyo intaas oo dhan oo waxa ay isu hayaan jidhka isugu cabbiraya. Jacaylka ismoodsiiska ah ee jidhka ka bilaabmaa jidhkaas ayuun buu ku dhammaadaa marka la kala dhergo, laakiin jacaylka ruuxiga ahi ruuxaha ayuu la waaraa, ilaa aakhiro haddii ay jannada ku kulmaan ay halkii ka sii anbaqaataan.

-"Ma laga yaabaa maalin maalmaha ka mid ah in aad ka qoomamayso in aad jacayl ila wadaagtay Deeqow?"

- “ Mustaqbalku gacanta Ilaahay ayuu ku jiraa, innaguna waxa aynnu wax ku qiimaynnaa waa tagtadii hore iyo taaganteennan. Haddii aan jacayl kula wadaago, ama waxa aad ii noqonaysaa rafiiqii ugu toolmoonaa ee hayaanka nolosha aannu jidka isu fududaynnay, ama waxa aad noqonaysaa casharkii iyo khibraddii ugu weyneyd ee noloshayda soo maray

Idiley."

-"Mar kale aan ku idhaahdo'e, haddii aan ka cudurdaarto jacaylkaagaas ka warran?”

-nga niad onap diboprund prad Luabul naon ainenwax walba Waa hubaal in aanan sinaba u jeclayni.hep bvto bi golhogs go ankung uu dhankina ba rinu Hotelihiye,haddii aad did dom moan Xina shbob kuna wey dinapoe. Qof aool arad ateu aead tahay, in aadan aniga iga helin ayaaba sure ah in gof hoostunMaxaan kuugukhasbayaa kaaga calaamadsani uu jiro ayaa suure ah.mid ayaan kaa codsanaya, haddi ay jirto cid ad i barbar dhigayso oo Hadd ay jito wax ad salugayso ama aad igu diidi karto, amaba xata uu daba-ka-werwer kaa hayo 0o aad iiaragto in aan mustaqbalkaaga u daranahay, iminka ayaynnu kala bedqabnaa oo waxba aynaan bilabin ee 'maya'i dheh ina abtiyey.”

112

Waa markii ugu horraysay ee ay Idil aragto nin kudhac iyo in uu jecel yahay oo uu doonayo in uu nolol la wadaago, weliba haddi ay diddana nin ka tanaasuli kara uu yahay!Cajiib!

Si kasta oo sheekadaada iyo haasaawahaagu ay u badan yihiin,lammanka aad nolosha la wadaagaysana aad sifooyin badan ugu taxdo,shardiyo badanna aad ku xidho, waxa ad gaadhaysaa marxalad waxa qudha ee aad u baahan tahay uu noqdo qof aad isfahmaysan,qallafsanaanta noloshanna aad isaga hilisaan oo midkiinba uu ka kale garab iyo gaashaanu noqdo.Si kasta oo ay iminka u badan yihiin shardiyada aad hor dhigayso qofka aad nolosha isku darsanaysaan, waxa aad gaadhaysaa xilli waxa ugu mudan ee aad u baahan tahay uu yahay lammaane marka aad bukooto kula soo jeeda, marka aad kacayso aad cuskato, marka aad xanaaqdo aan kula qaylin ee ku maqla, marka ay u ubadkiinnu adduunka ku kala foofaan aad dugsato, marka aad da' noqotana aydinaan is'hiifin ee aad haamadda isku haysataan. Noloshaas marka laga fekerayo way yaraanaysaa saamaynta ay yeelanayaan wiil gadh weyn oo kaa qoslin kara, iyo gabadh horaaddo taagan oo qurxooni,shakhsiyaddaas cimriga lala wadaagi karayo ayaana halbeegga rasmiga ah noqonaysa.

Dumarnimada waxyaabaha aasaasiga u ah ee soo jita marka ay dhanka ragga noqoto waxa ka mid ah dhiirranaanta iyo kudhaca ninka,in uu warkiisu cad yahay, iyo in aanu sida hablaha foorfoororsan oo waxa laabtiisa ka guuxaya aanu u soo warwareegin ee uu toos u abbaaro.Way soo aragtay niman badan oo ku wareegi jiray,

laakiin aan weligood eray nool oo damacooda muujinaya ula iman.

Way soo aragtay niman badan oo inta ay waxba ula iman kari waayeen farriimo dhaadheer oo qalbigooda ay ku sharraxayaan u soo diray.

Bodho weld nmanes tina cedbatolog.brabuar.damaca haasaawe noqoto, qaanuunkii raganimadana way ku xadgudbeen. inwax ka didi kara

Gabadhu abuur ahaanwaxa ay jeclaysataa ha to ralla jog ninkdisa ah,co marka ty xishood nogotaunahabbing badheedh noqotana indhaha caddeeya oo galka ka saara.

Sida uu ninku u jeclaysto gabadha uu agteedaninka ayagtiisa ninnimadiisa ku dareemo ayay gabadhuna u jeclaysataa dheddigaansheheeda ku dareento.Barbaartu waayahan way deraaseeyaan dumarka iyo waxa ay xisaynayan, laakdin waxa ay ka boodaan barashada raganimada ipo ninnimadu shuruudaha ay kuansaxayso,

Maadaama badiba dhallinta hadda joogtaa ay taas ka arradan yihiin,heer inankii marar badan uu ka sugayo wax kasta oo ay gabadha darteeda u sameeyaanna taas inanta ayaa dhantaasha.ay isgaadgaadayaan in ay iyadu kaga hotrayso,kudhacaasna raggii hadda uu ku sii dabo yar yahay,waxa uu Deeq qalbigeeda ku yeeshay markaasba kaalin aanu nin hore ku yeelanin, si kasta oo ay nolosheeda u soo mareen niman ay ka heshay iyo kuwo iyada si waalli ah u jeclaadayba.

Isbarashadeennii ugu horraysay Deeqow sidii badheedhka ahayd ee aad ii soo damaaciday ayaa igaga weynaatay isbarasho kasta oo noloshayda aan soo sameeyayba. Maalinkaas ilaa hadda mar kasta oo haasaaweheennu uu sii koro, fekradaha inaga dhex guuxaya aynnu wadaagno,arrimaha mahuraanka u ah nolosha lammaanahana aynnu isla falanqaynno, fahankeenna iyo isfahankeennuba way iska sooag dhodhowaanayeen,qalbigaygana waad ku sii

dhibcaysay.Iskama aadan kay weyneysiin oo nus aan kuu dhigmayn iima aadan aragima aadan quudhsan ee agoontayda iyo aragtiyahayga waad tixgelisay, naxariis iyo dhibirsamaanna waad ii leedahay, intaasoo isku qoofalanna nin

ieala badan intada xun, waadna u qalantaa in an xas kuu nogdo oo wad istnalhishaa, Xishood dumar ayaa i xidhayay ee aniguba waan ku Garaadkaygu wuu kugu qancay, qalbigayguna wuu ku rabaa,filanayso iyo ka wanáagsanba in aan kuu noqdo, kaalin kasta oo aad ii buuxisana kaalinteeda u dhiganta in aan kuu buuxiyo. Waan ku nafisaa agtaada.Kalsooni ayaan ku helaa agtaada. Iskama kaa dhiso,iskamana kaa dhaadhiciyo ee xaqiiqadayda aan ahay iyo abuurtayda ayaan agtaada kaga dhaqmaa. Intayda wanaagsan iyo iimahayga midna kaalama gabbado.Waxaas oo dhan adiga ayaa iga kasbaday ee anigu kuma aanan siinin.Waan ku jecelahay Deeq.

Bartaas ayuu ku xaqiiqsaday in uu dhaawacyo badan baandhayskoodii helay, noloshii keligii cidlada la

kaashan jirtayna uu wehel ay iska dugsadaan u helay.

115

Tan iyo isbarashadoodii noloshoodu sidaas toolmoon ayay u socotay ilaa ay masiibadani soo dhex gashay!CHlar hagudhan tanay weligood ka fckerini Lla ay hamnq goay ki Diednt uu garan waay: Noloashoodu dhabbcheedi saxda ahua apy dhibteeda iyo dheefteedaba la raacaysay.

In kasta oo ay daagadda ku dhaygagsanayd oo xusuuseheedas wada qurxoon ee meel ay ka saluugto aan lahayn ay ku jirtay, haddana Laba xaladood oo kala fog ayay qalbigeeda iyo wejigeedu kala joogeen.Se hal mar ayay mahuraankii isugu yimaaddeen.Suuragal way tahay in Deeq uu

Waa dhacdo ku filan in ay Deeq goyso,laakiin qalbigeedu sidan falay oo waa inan rag uun,laakiin ilaa hadda way u marnaba tallaabadaas ma gacloonayo!Imisa jeer ayuu hees dhaadhici la'dahay Idil! u qaaday oo ay haweenkaba iskala sarraysay.Heestii uu curashada jacaylkooda ku soo dhoweeyay ayaa maankeeda mushaaxaysa:

Xidhkaa qalbigaad ku xuubantahoo Waan
ku
xarragiyo xanuunba jecloo
May xaalufin xadantadiisiiye
Adaa xaadiroo xubnaha
ku
tarmoo
Xilmeersaday xabagbarsheedaydaay

Haddii xoroddiyo xaabada olosha
Lagugu xeeraanan xaaleeyeen
Xad aanan arkayn ayay xidhayoo
Anoo xiimayaan xagaafinayaa
Xananka adduun xuluulanayaa

Xaqaaninimaan u xeer dhigtayee Xuquuqda jacayl u xaakin noqoo

Xaqiji Iahashadan
xaqsoorkeedoo Xannaani kashan
xaraarugaysoo
Xummadda ha ku daawane xasili

Markuu xul-rageed
xayoonaayoo
Xayaadsiintaa Xigaalo ku bidoo xikaayoodo u xusul
duubaniWaa loo xeel-dayaa laguma
xayiree

Xareed ii noqo Xayaadaydaay

Hadduu xarqayoo xinjiro
qubayoo Xabsiyo adag iyo xirsiyo
lagu xidho
Qalbigu xilihiisa uu xusayaay
Xaggaagaan laga
xidhiidhfurahayn
Xurmiyo waa kuu xaqdhawr cugan

Xasuuso cuddoon xarrago-hadal aan
Xifaalo lahayn xurgufo jiitama
Ayaan xifdiyaa kashayda xulee
Xakiimku ha sooro xaalkeenee Hadmaynnu
xeroon xaruuriyaddaay.

In aad wax weydaa way dhacdaa, in waayitaankaasi uu kugu habsado sabab-la'aani si ayuun bay samirsiis kuugu noqotaa, laakiin adiga oo doonaya oo aan deyn karaynin marka uu ku siiyo sababtii aad ku waayi lahayd laba dhardhaar ayaad u dhexaynaysaa, ma aqbali kartid in aad weydo,kumana sii dhegganaan kartid!

Marar badan ayuu khayaalku noqdaa albaabka keliya ee inoo furan ee qadhaadhka xaqiiqada waaqica aynnu kaga baxsan karno, markaasna khayaal suuraysi ah ma noqonayo

ee xaqiiqadii oo weji kale leh ayuu inoo noqonayaa, in aynnu ka baraarugnana ma jeclaysanaynno.

Mararka qaar sida aynnu ugu dagaallanno in aan xorriyaddeenna shakhsiga ah la inaga xayuubinin oo jiraalkeenna aynaan u waayin, si la mid ah ayaynnu ugu dagaallannaa wax kasta oo aynnu nahay ama

jimalkeenna ku lammaanaaba in aynnu ka baxsanno,walowqabriba aynnu kaga dhuumanno'e!kangy kalh mungdan ayoun bu gabbalku kun dumaya, matkaen?

Nolboshu ma naxartisato. Wax aadan galabsanin ayay kaa goynaysae kugu dhufanaysa, haddana falcelinta keliyva ee ad awooddaa va iro dhanka ay kaga imanayso uun, ee waa dhaawac qalan oo la wada qarsanayo.Waxa aad gadhaysaa xilli uu waaqicu ku baro in huga ugu mudan ee aad isku asturi kartaa uu yahay dhoollacaddaynta, maadaama jidh ahaan iyo nafsad ahaanba ay kuu asturayso.

Marar badan ayaad ku khasbanaanaysaa in jidhkaaguna uu dadka dhex joogo oo uu la hawl-iyo-hadal wadaago, ruuxdaaduna ay sidi Dajaal Cawar jasiirad go'doonsan ku faquuqnaato iyada oo labadible u xidhan oo aan ka soo fakan karaynin!Waalidkeennii dhalaannimadeennii xataa tallaabada aynnu qaadno inooga baqayay in aynnu nafteenna waxyeello ugu geysannaa tolow maxay samayn Marar door ah ayaynnu fekradaha mad eenna ka lahaayeen haddii ay ogaadaan in mararka qaar aynnu guuxayaa in ay staabtaan ma ay isu muuqdaan kala innagu nafeheenna isaga baqno?!ilaalinna , si aa ay iy una isu duqaynin, innagana aanay inoo halligin.

Marar badan ayay noloshu noqonaysaa cadawgaaga ugu weyn ee aad ka cararayso,geeriduna ay noqonaysaa gabbaadkaaga aad aaminka ku noqonayso, markaasay haddana noloshu sidii Bohol Madow kuu jidanaysaa,dhimashaduna ay sidii biciid uu dareen galay kaaga sii firdhanaysaa!

Marar badan waad u garaabaysaa dadka aan nolosha hammiyada sarsare ka lahayn ee sida dabeeciga ah isaga

nool. Laga yaabaa in ay goobjoog u soo ahaayeen riyooyin waaweyn oo ay lahaayeen oo markii

digrigoodu uu 100 gadhay uumibaxay iyaga oo aan waxba ka gaban karayn, rejadoodina ay la uumibaxday!Tooridi galka kuugu jirtay ee aad waayaha iskaga difaci lahayd kala dhex xululato, xanuunka uu nabarkeedu kugu qabanayo waxa kuu goysay!

Matarka qaar xataa haddii aad qari istidhaahdo murugada aad dareemayso,jalleecada dhaayahaaga, dheelliga tallabadaada, iyo dhawaaqa codkaaga ayaa kun iyo kow qaab u sharraxaya!

Ilintu mar walba kama tarjunto nuglaan iyo daciifnimo ama isdhiib ee marar badan ayay tahay dhabar'adaygga heerkiisa ugu sarreeya oo buuraha murugada ah ilmadaas yar ee dareeraysa ay dadka kale ka daalacanayaan!Dhibic kasta oo ilmo ah oo soo dhaafaysa indheheeda wiiqmay waa cutub ka mid ah buuggii ugu tifatirnaa ee uu aadame qori lahaa ee qiso nololeed oo lammaane dhex martay laga allifi lahaa, laakiin qaabka qudha ee buuggaasi uu ifka ku arkayaa uu noqday illintaas dareeraysa ee daqiiqad kadib uumibaxaysa in uu noqdo!

Ma garanaynno safarkan dheer ee noloshu meesha uu inala saldhiganayo iyo cidda uu inala kulansiinayo midna, waana mahuraan in goor iyo goob kastaba aynnu shakhsiyaddeenna dhabta ah lahaanno innaga oo sii kobcinaynna uun, si aynaan dabaylaha wakhtiga ee isdhirbaaxaya ugu dhex habaabin.Deeqa ay iminka weyday waa nin waayihiisii carruurnimo iyo barbaarnimadaba sidii ay ahaayeen u soo qaatay. Rubuc qarni ayuu hadda jiraa, laakiin waa waaya'arag. Derbiyo badan wuu soo hirdiyay,dalawyo badan wuu ka soo dhacay, hantaaqooyin bdan wuu la soo kulmay, laakiin mid walba cashar iyo khibrad ayuu hore uga soo sahayday.

Waxa uu noqday nin-rageed debciye ah ee aan didiye ahayn, aayo-reeb ah ee aan eel-reeb ahayn, soofeeg ah ee aan suul'eeg ahayn,bogsiye ah ee aan beleliye ahayn,xeerla-joog ah ee aan xoolo-la-joog ahayn, arrin-keen ah ama aqbal-keen, talo-keen ah ama talo-rac,xalaal-miirad ah ee aan xaaraan-maag ahayn, xoogsada ee aan

seeladysi ku qadhaaban,agonyahan ah ee aan agnan(jaahil)ahayn oo ciiltire ah ee aan ciildhaanshe ahayn.Bate to Galbedla, mugti miday naysay Yurub iyo Aasiyas,barhodang dami ka dib lagu rumeesay, magaladi dawladaha waawrerai ay edisbeddelka dawlado iyo hirdameen. Magaalo goobjoog u ahayd bogorro waweyn,isbeddel bulsheed,dineed,iyo luugadeed,isbeda xuddun u ahayd,marna Muslimiinta Istanbul,hooyadi Aaya Soofiyamidaynaysay.Hoygii Caasimaddii u danbaysay ee

Muslimiinta Diyaaraddi Saleebaan ayaa degitaan Alqaanuuni isu diyaarisay, iyo Cabdilxamiidkii Dhawr saacadood oo safar ay hawada sare ku soo qadatay oo

Labaad.daruurihii ay weligeedba kor u eeg jirtay ay hoos u daawanaysay ah ka dib,waxa ay soo gaadhay Istanbul.Haddi ay qorraxdii Afrika u nuurinaysay ka dhacday qorrax ugub oo ay dhogor cusbooni kaga soo baxdaa in ay Yurub iyo Aasiya dhexdooda uga soo mudho ayay doonaysaa.

Haddii dayaxii adduunkeeda bilcinayay uu dayaxmadoobaad kaga dhacay in ay nafteeda uun shamac ay nolosha ku ilaysto u shiddo ayay doonaysaa.Haddii ubaxii udgoonaa ee ay ayaamaha badan ilaashanaysay uu ka

dhadhay in aanay nafteeduna la qaadhin ee ay

Qurbanimada degaanka ay timi waxa u dheer isdabaqabato oo dalkaas abaaroobay ay doonni kaga

qurbanimada ruuxdeeda. Waxa ay ku jirtaa xaalad aanay u hayaanto ayay rabtaa.baran, wax walibana ay qariib ku yihiin... xataa nafteedu ay qariib ku tahay!Way og tahay in ruuxdeedu ay xaalad wallac iyo waleecaad ah ku jirto,uur

sidkiisa in uu gaadhaa ay mahuraan tahayna uu sugayo, fool waaqica dhabannaanadisa aan uga tudhayninna ay uga danbaynayso,intas uun ka dibna ay dhalanayso Idisha cusub ee nolosha halkaas ka bilaabmi doonta la jaanqaadi doontaa.

loogu soo dhibay ayaa ama kala bakhayla, ama sikhaldan ugu adccgsada,amaba si aan habboonayn ugu sandulleeya."Markaa iminka waxa ad ileedahay waad isku kay khasbaysar Ayay tidhi iyada oo oohini ay ka soo dhowdahay."Hadda waxa qudha ce aad danaynaysaa waa cadifuddad mun oo an nolol kula wadago,si aad taas iga

-"Maya'e way ka yihine qalbi ku jecel ayaa dabada iga heshana waadiga waxas o agtaada muhim kama aha?!”

riixaya ce maxaan sameeyaa?!"-"Jugtu way inagu wada dhacdaye wuu iskala qabsanayaaye wakhui sii.”

- “ Laakiin aniga naag aan ahayni ku yeelan mayso! ” "Taasi waa marka aynaan doonayn riyada khayaalka ah in aynnu ka toosno!”

-"Kaalay! Wax dareen ahba iima haysid miyaa?!"-"Mar ardayaddayda ayaad tahay, mar kalena bahda akhriska ayaynnu ka wada tirsan nahay hadda, macaariif aan isku xeel dheeraynna waynnu nahay. Dareen intaas dhaafsiisan - “ Markii aan qalbigayga ku siiyay ayaad sidaas i leedahay sow ma aha?! Aniga ayaa doqon jeclaaday!"-kuuma hayo." "Hadda waad igu xadgudbaysaa, anigana dulqaadka iyo ixtiraamkuba way igu sii yaraanayaan haddii aad sidaas iila hadasho."

-"Maxaad samayn kartaa?! Ma ii gacan qaadaysaa?! Mar iyo laba iyo tobanba waan ku leeyahay,aniga ayaa doqon jeclaaday!"Wuu kacay Deeq isaga oo xanaag la gaw ah,meheradda gashigeedii (kharashkeedii) ayuu bixiyay, toosna wuu u baxay isaga oo aan dacalna eegin.

Cabbaar ka dib ayuu isbadhqabtay oo xanaaqiisa uu dareemay,markaasuu shaydaanka naaray oo uu isdejiyay.Digtaatooriyad ayay Shukri madaxa kaga qabsan gaadhay gebigisaba. Waa gabadh caadifadootay oo wax

weyn ma aha. Way iska xasili doontaa ayuu isku samirsiiyay.



Inti ay guriga u sil socotay iyo habeenkii oo dhanba waxa helay caqligeeda way geli la'aayeen.*BelJjidbkea,joogsa jyo jamalkea can eyabayee ant xatoa xitaba i munjin*

Bal badalkaygsa toosan ijo sida warka cad ab e dan max ugy tbeeggy eaanu tixgelin day!Bal sida aan u maamuusay ee aan meesba mabnida ab ugula kulmay ee aanu in yara ii jixinjixin day! Aniga aya jecele sidee ayayba naag kale galbigisa u labaan kartaa?!

Aniga ayaa jecele sidee ayuuba afkiisa naag kale u soo marin karaa?!Aniga ayaaba jecele sidee ayuu xidbidb kale u labaan karaa?!

Aniga oo qudba ayaa iska leb, wallaanay naag kalena u calfanayn!

Cadyobow ama ku cunay ama ku ciideeyay!

Ma waxaas oo qurux iyo gaab ab ayuu naag kale kala soo ag toosayaa aniga oo nool?!

Naagtayda waxgabadyada iyo hibooyinka marla'aragga ab u dhalatay ee wax la mid ahiba aanay jirin, aniga oo kalena kunkii sanaba uu mar dhasbo ayuu aayar ku leeyabay gabadb kale ayaan jecelabay.

Haddii anigaba caqligaygu uu nin aan isaga abayn ku qanci waayay,galbigayguna aanu gof aan isaga abayn doonayn, xasilloonidaydi gudahana uu iragu sidan u kala daadiyay, isagana maankiisa, qalbigisa iyo damirkiisu toona xasillooni kuma noolaanayaan!

Waxa ay bilawday in iyada iyo Ibliis ay isla debberaan tobannaan gorshe oo midiba uu mid ka daran yahay.

Gebigisaba dil!

U kaadi!

Sidee ayaad u dilaysaa ninka garadaas iyo quwaddaas leb?!

Bijo karkaraya ku shuboo quruxdaas yaanu sii labaanin!

Oo *ma adiga ayuu caano kuu lisayaa?!*Ta *labaad,xaggee ayaad iskala heli biyaba karaya iyo isaga oo u sallaxan in lagu saydbiyo?*

Wuu i kufsaday dheb, maalmabaas xabsiga lagu baynayo iyo badalbayntaasi sumcad-dil ugu *filane!*

Laakiin ma kol ayay kuvi ku wada Lsag ana *necbaaku rumaysanayaan?!may wada jecel yibiin oo tubmi maayaane!*Horta *naagtan ninka falatay ee gebigiisubauuku magan yabay maod* ogaatid?!

*Intee ayay ninkan isjecel yibiin?!*Wa'ayo?!Xagg Xogtaas raadi, ka dib ee ayay *ayaad joogtaa?!*go'aan gaadbiye.Waxa ay fahantay in gaabka qud/ha ce ay gabadhaas ku ogan lathe ay tahay in ay isaga ka ag dhowaato.Dhinac kalena waxa iska tusay haddi ninkas ay la heshiso co ay u geysataba in aanu iyad ka shakiyayn.Marki dugsiga la yimi ayay nusasaacihii isaga oo meelsheeka faneedda

Aanadii Negeeye ku akhrisanaya ugu timi.

-“Waan ku salaamay gacalle.”-"Waan kaa qaaday." Isaga oo aan kor u eegin.-"Ma khaldame waa Ilaahaye xaal iyo boolajis ayaan bixinayaa."-"Way dhacdaa ee ha u bixin. Waadigaa durba caadiga ahe. Sow kuma aanan odhan jugtu way ina soo wada martaye yara xejiso.?" Isaga oo weli isdiidsiinaya in uu indhaha siiyo.

-“Caqliga kaa maqani walaalkaa ayuu ku jiraa sowta la yidhi."- “ Caqliga kaa maqani waa sida uu kaaga maqan yahaye waxa qudha ee aynnu isku biirinnaa waa in dhanka uu kaa jiro uun aynnu isu tilmaanno." Isaga oo indhaha ku gubbaya markan.

-"Taas lafteeda ayaa caqli ah.”-“Laakiin waa caqligaygii ee mid adiga kaa soo lumay ma aha."Isaga oo markan wejigiisii isfrfuray oo caadi ula hadlaya.

-"Inta aanay caqliga inta kalena iga lumin yaanan warkayga kala illaawine,horta raalligelin dhan walba ah ayaan bixinayaa. Marka xigta,xaalka sidisi aynnu ku soo dabbaalno, ardayad iyo macallinkeed oo xoogaa dareen ah u haysa aynnu noqonno, intii iga dhacdayna nin raga ayaad

u tahay dee."-"Waddo halaq-mareen ah uun yaanu dareenkaasi noqon oo mar danbe yaanu soo labakaclayn!”



"Ma ballan, qaadayo laakiin waan ku dedalayal"

dhicisobay uu ku soo afineerman, dib danbena anu iftinka uang"-"Kakanidaa horta oo qallafsanidaal"

ballqmaan in wixdi kaaga 50o baxabaaad aragto uun mooyaane waxba kama qaban kartid. ” -"Miyaanay albaabadaas qarkood wax aad ku faraxdaa kaag1 800bixi karin?”

- “ Mustaqbalkayga nasiib kuma hallaynayo."-"Ma dadka wax baasaysta ayaad tahay?"

-"Maya'e dadka mustaqbalku sida uu ka mudan yahay uga fekera ee wax walba kaga xisaabtama ayaan ahay.”-“ Daba-ka-werwerkaa kugu badan malaha?"

-“Goormuu nolosha werwer ka dhammaaday?l Adigu wax jooga iro wax soo socda midna kama werwvertid miyaa?!"-"Maxaan uga werwerayaa dunida Ilaahii lahaa ayaa sida uu doono ka yeelaya'e."

-"Taasi dunida iyo Ilaaha leh ayay ka dhexaysaaye, adiga iyo nolosha sidii aad ula falgeli lahaydna?!"

-"Ilaahay ayaan u wkiishay oo sabab aan ugu werweraa ma jirto!"-"Hadda 'Ilaahay aan ku bariyo'e meel baydhsan seexo'ayuu yidhi ayay odhan jireen waayeelku."

-"Ilaaha halkaas baydhsan igu barinaya ayaa halkan baylahsanna igu barinaya."-“Ilaahay in uu taas awoodaa waa muran-ma-doon,laakiin ma og tahay in uu Ilaahay qofka wax isugu qummiyo in u dhiganta hadba inta uu -

"Adiga oo aan far taaginba Ilaahay wax walba wuu kuu fududayn karaa!”-"Ilaahay awooddiisa su'aali kama taagna niyaddeeda wanaagsan iyo dedaalkeeda la yimaaddo?"

ee adiga awooddii uu ku siyay meeday? Ilaahay inta uu kaa qaado karaanka, laxaadka iyo garashada uu ku siiyay muu irsiqa adduunka yaallaba afka kuugu guro?Muxuu awooddan nafsad ahaaneed iyo jidh ahaaneedba kuu siiyay haddii aadan waxba ku qabanayn?!"

-"Int aadan dhiman ka hor maxand doonaysaa inaydooddaas badiba dadku aadnoqoto?lyada oo doonaysain ismoogganaysijyaan ka baxan si aanu ugu odhan'doqon qadderay baratay lagama gar helo'. uucodkiisu hoos - “In aan noolado!" Isaga oo dhawaqii kululaa uga soo degay.

-"Oo ma iminka ayaad meyd soconaya tahay?!”'Tbidhigsi kasta oo i dhafa masaafada aniga iyo wedka ni oo dhan ugu xawaaraynayo waxa aan doonayaa in aan u noolado qab goomamayn. Ma doonayo tagtadaydu in ay i eryato noloshayda danbe qaabka aan doonayo aan u noolaado - “ Oo muxuu yahay qaabkaasi? ” -"In aan no laado caqligayga oo qanacsan, qalbigayga oo raalliah iyo aniga oo ayaan ku dedaalayaa."
xasilloon."

-“Oo ma iminka ayay intaasi kaa maqan yihiin?”-“Waan - “ Ee acallin dee! Waxan aad sheegsheegayso waannu ku wareernaye raalli ahow oo caawa kulan ma haystaa badigooda, laakiin adiga ayaa hadda doonaya in yeelan karnaa?”aad ii jeexdo dhabbihii aan ku waayi lahaa!"

-“Maya!”

-“Waayo?!”-“Maya qudha kuma qanci kartid miyaa Shukri? Ma khasab ayaa in aan wax walba sababeeyaa?"

-“Deeqow;ina abti; sababta haddii aad ii sheegi weydo maanta oo dhan wax kale kama fekerayo ee waxa aan ka fekerayaa inta sababood ee ay suuragalka tahay in aad dartood maya u tidhi. Markaa ii tudh oo ii sheeg sababta aan nafiso'e."



-“Dumaashidaa ayaannu ballansan nahay."-"Hagag, Kaa jidhi maayo haddaba ee wakhtigaaga qaado.Mar kale ayaynnu is'arki idam Alle.”

Waxa ay u fekertaa sidi in ay tahay qof doorran,dadka laga doortay,al adeegan oo ay fuliyan. Waxa aad mooddaa in ay meel Yuhuudiyad iyadu ka sii tahay qof doorran!Waxa ay isu aragtaa qof dadka oo dhan ka duwan, si gaar ah iyada loo farsameeyay, cid wax la wadaagtaana anay jirin,dadkuna ay u qaybsan yihiin cadawgeeda ka-xunta ah ee quudhiwaaga ah, iyo shacabkeeda taabacsan ee nuurkeeda adduunka ku ifsanaya. Haddi labada kooxood mid ahaan ay qofka ka weydo qolada kale ayay ku xisaabisaa.

Haddii ay aragto qof la talinaya ama doonaya in uu wax ka toosiyo waxa ay u aragtaa qof aad u karaan yar oo aan fahmi karin shakhsiyaddeedan marla'aragga ah ce jaadgoonnida ah, fahan-darradaasina ay sababtay in uu siiyo talooyinkaas uu ku doonayo isaga iyo dadka kale in ay kula mid noqoto.

Anshaxyada diiniga ah iyo huritaanka ay diintu amrayso waxa kaga xooggan aragtiyaha maaddiga ah ee siyaasadaha iyo dhaqaalaha caalamkan lagu saleeyay, loollankoodana looga shidaalka qaato,sida Aragtidii Darwin ee ahayd in ka rooni uu reerka u hadho oo hadba ka xooggani uu badbaadayo. Ama aragtida kale ee garsoorka la xidhiidha ee dhigaysa, in qaanuunku aanu ilaalinin moogganayaasha.Aragtiyahaas maaddiga ah ayaa marin u ah oo ay nolosha ku salaysaa,laakiin amarrada diiniga ah iyo huritaanka la amrayaa iyada kuma socdaan.

Waxa hilin iyo higsi u ah sidaas ay dugsigaba caanka uga tahay in ay adduunka oo dhanna caan uga noqoto, maadaama higsigaasi uu ku adkaadayna, cid kasta oo dad badani ay yaqaanaan oo iyada ka caansanba hoosta ayay ka kahataa oo ma jeclaysato, haddiiba caannimada

qofkaasi ay wanaag ku salaysan tahayna qofkaas lama tuso,xataa ammaantiisa ayaa dhibta. Waxa ku soo aaraya markaasba xanuunkaas nafsiga ah ee nerjesiga.

Ginea dhi vase of higpnrses in tu tny wi nad u quenet baber ₀ mapi'si waliah isu casliagas heer uu gradhay qanecco ah in pan iminbda ahi Wilkdas wasa Ia odhan jiny Narcisus,marki ay hoopuan wilkedu uu cimri dher noolanayo haddi aanu wejigisn arkin.Sidun awgeed;hooyadii muraayadaha way ka ilaalin jirtay.ka qaaday,dadka ku xeeranna wuu yasi jray,qofka wanaag u muujiyana in uu ka daba dhacsan yahay ayuu u arkayay.

Dadku dhankooda kama aanay dareensanayn kibirka galay ninkaas yar ee maxabbo iyo soo-dhoweysi ayay kala dul daadanayeen,isaguna qab ayuu ka sii qaadayay. Dumarkaas badan ee ka daba dhacay mnarki uu barbaarka noqday waxaa ka mid ahayd Echo. Gabadhani waxa ay ka cadhaysiisay ilaahadda Hera, waxana ay ilaahaddaasi ku ciqaabtay in ay hadli kari weydo, laakiin ay ku soo celceliso erayada u danbeeya ee cidda la hadlaysa.Maalin ayay daba gashay isaga iyo dhallin ay isku ayni ahaayeen oo wada ugaadhsi tegay,markaasay kala fogaadeen barbartaas. Waxa uu u yeedhyeedhay saaxiibadi, markaasay iyaduna erayadiisa u danbeeya kaga daba celcelisay, markii ay isu soo dhowaadeen ayay u malaysay in uu iyada u yeedhayay, markaasay gacmaha u kala furtay oo laabta ay kula soo carartay, isagiina inta uu dib isaga riixay ayuu ku jeesjeesay,markii ay dhacdayna si kibir leh ayuu u eegay oo uu ula hadlay, in aanay u qalminna wuu u sheegay. Ayda ayay murugadii la gashay Echo,halkaas ayayna cadho iyo caloolxumo kula noolayd ilaa ay silicaas u dhimatay,ka dibna danbaskeedii ay dabayshu buuraha ku kala firdhisay,sidaasna uu ku dhashay jabaq-noqodka codka ee iyada loogu magaca daray,Echo.

Ka dib Ilahyada Olympus aya ka xanaaqay ficilkiisaas,Ilaahadda gadderka iyo abaalmarinta ce Nemesis ayayna u xilsareen in ay ninkaas harada ayay dul taagtay biyo fadhiya oo saafi ah oo uu si wanagsan

bae anayay ce ut haradaas u dud fadhijay aru ku chinay, meyduinu

bataleyrdas Giriggu, wana quab ay usavirtay xanunkaasi sida uo

Neriesigu waa khalkhal nafsadeed oo ka dhasha qofu in uu naftisa isga lftisuna uu dedaalkisa iyo wakhtigisaba ku bixiyo wax qudhisa u daran oo uu wanaag u arko.In kasta oo ay isu taqaanno caalamkeedas kooban ee guriga iyo dugsiga ka dhexeeya in ay tahay qofka dhan walba ugu sita,guuleyste waxgabadyo waaweyn ka dhabeeyana ay isu haysato, haddana iyada iro nafteedu marka ay haasaawayaan waxa ay dareensan tahay in nolosheedu ay madhan tahay oo macne ay cuskato iyo qiimi ay sheegato aanay lahayn, raallina aanay ku ahayn sidan ay tahay,oo dadka kale guuleheedaas ay isku qancisay uma muuqdaan ee iyada ayuun bay ku eg yihiin. Balse dhibkaas haysta marnaba xalkiisa nafteeda kama badhayso, daakhilkeeda kama eegayso, mana fahansana in mushkiladdani ay ka taagan tahay jacaylka barkumataalka ah ee xadkabaxa ah ee ay isu hayso.

Dadka iyo waaxaha kale ee nolosha marka ay ka fekerayso,waxa ay u dhaqantaa sida duqsiga nabarka iyo iinta eegta ee uma dhaqanto sida shinnida udugga iyo wixii san eegata. 99ka wanaag ee qofaas waxa iyada kala weyn halka ceeb ama iin ee uu leeyahay, kaas ayayna si walba u qiimaysaa. Sidaa awgeed; waxbaba ma cajebiyaan, aan ka ahayn cidda sida ay ka doonayso ula dhaqanta ama u

noqota.Halbeegga looga qiyaas qaadanayo xaqiiqadu waa iyada, waa rabitaankeeda. Ruuxa sida ay doonayso noqda way malaa'igaynaysaa,ka ay ka weydana way shaydaamaynaysaa, xataa haddii qofkaas wanaaggiisu uu 99% yahayna iyada eber ayuu la yahay.

129

Gogosheennu waa halka aynaan qurux iyo haybad midna ku ilashan ee aynnu sida dabeeciga ah shakhsiyaddeenna ugula dhaqanno.Dadka badigoodu marka ay gogosha ka kacaan ayay shakhsiyaddaas kag kacaan oo weji bug ah inta ay xidhaan ay caalamka kula foofaan.

129

Ieypenfen torse do de td cnd t t.Shukri sikasta 0o dul leeyihiin caalamka lyaga y shakhsiyad mamus leh dibedda uga samaysto,markaaydhabanka cil la gan' weyda waxa ay ka murugoonayso iyada00aangaranayn laakiin wax walba ka murugoonaysa!

Tolow ma habfahanka iyo aasaaska jacaylkooda ayay wax ka si

Doodihii ku saabsanaa jacaylka iyo wixi uu cago ku wato ee dhex maray Deeq iyo Idil way ku filayeen in fahan ay ka midaysan yihin ka iyagu ay ka midaysnaayeen.Mid ka mid ah arrimaha ay digtoonida ugu weyn ka qabeen ayaa ahayd, in aanay isku iimaan qaadin wax aanay agoon u lahayn,mawduucna aanay dhex muquuran iyaga oo aan baadhin oo aan xogtisa intii karaankood ah ururin, ka dibna aan ka doodin oo caqliyadooda aan isugu celcelin.

Marka aad xirfadda dareewalnimo barato ayaad haweysataa gaadhi in aad kaxayso. Waa hubaal haddii fureheeda laguu dhiibo in inta aad gasho aadan badhinna taabanayn, dhaqaajinteedana aadan isku deyayn diyaarad,adiga oo aan xirfadda duuliyanimada agoon. Sidaas si la mid ah, haddii aad jacaylka madax-madax isugu tuurto adiga oo aan xirfaddiisa aqoonin,si aad dib-dib ugaga baxdo ayaad garan waayaysaa,waxana aad noqonaysaa qof duuliyay diyaarad aanu wadisteeda iyo dejinteeda toona garanayn!

Qaabka qudha ee aynnu jacayl waara ama midho dhala ku helaynnaa waa in aynnu jacaylka u aragno waax cilmiga ka mid ah,ama fan ka mid ah fananka nolosha, ka dibna aynnu u deraasaynno sida aynnu cilmiyadaas u derisno, sidaasna aynnu fahan qoto dheer kaga hello.Laakiin inta aynnu heesaha caadifad-hadlaya uun ka baranaynno ee marka aynnu wanaaggiisa dareemaynnana aynnu heesaha ammaanaya dhegaha ku culaynno, marka aynnu dhib ka tirsanaynnana heesaha maagaya ee dhalliilaya, jacaylka sida aynnu uga salgaadhnaa dheer oo dhib leh.

Kuma eka keliya fahan uun, ee waa in sida cilmiyadaas kale aragti ahaanna loo fahmaa, ficil ahaanna loo dhaqangeliyaa oo wanaaggiisa ciddii kaa mudan lala wadaagaa.Jacaylku waxa uu noqday maanta gaadhi iyada oo aan geerka hore iyo

geerka danbe la kala garanayn uu qof waliba dareewal ka noqdo oo

uu detbipo idhadiroa hndhovore cgo ran go oanuaha ro beahing uu ku nacsiiyo.yahay bishanshipo iyo in aad faban buuran ka hapsato,hadi tan weydisa,ce madama ay yihin wasa ugu weyn ce caquiguaga tan Doollar u dhiganto.Xata cilladdu ma aha in aan agoon uun loo lahayn ee waxa ka si fadhisto jacaylka. Mar ayuu Deeq saaxibkii weydiyay sababta abwan oo saxibki uu ugu jawaabay:“sababta jacaylka qof kastaaba sida uu doono uu ugaga hadlaa waa in uu og yahay in aanay cidina ku qabsanayn maadaama aanu jacaylku sida aqoonta kale lahayn xeerar cadcad oo lagu saleeyo, qof kastaana in uu isagu khabiir ku yahay ayuu isu yaqaannaa!"Digtoonidas way qabeen mar walba. Waa sababta mawduuc kasta oo noloshooda lammaananimo-ta ay hayaan iyo ta sugaysaba-uga doodaan, wax kasta oo jacaylka ku saabsanna ay miiska wada-hadalka u keenaan ee ay qalliinka ay cudur noolba kaga gubayaan ugu sameeyaan.

andame nalay, welina aynnu noollahay. Waa irrdda jacaylka iyo waa waxa dhadhanka u sameeya cidda ama waxa aad jeceshahay joogitaankiisa iyo maqnaantiisaba.Waa barbilaw wanaagsan, albaab qurxoon, iyo marin habboon oo jacaylka iyo isjeclaanta loo maro,laakiin ma aha jacaylka laftisii

Ma laha xiisuhu halbeegyo iyo qiyaas ka baxsan rabitaanka caadifadeed ee qofka. Cidda amawaxa aynnu ka hello waxyaabaha caadifad ahaan aynnu u jeclaysanno waynnu xiisaynnaa, xiisahaasna marka danbe ama waxa dhalasho siiya oo salka u dejiya caqliga marka uu arko in uu hannaanka noloshiisa ku habboon yahay ciddaas ama waxaas uu xiisaynayaa, ama isaga ayaa laala oo diida in xiisahaasi uu laabta sidaas u sii mushaaxo.Dhibaatadu waxa ay marar badan ka dhacdaa in qofku uu xiisahaas isu dhiibo, uu isaga u maleeyo jacaylkii, aqalkaas jacaylkana uuirriddiisa fadhiisto oo aanu gudahaba ugu dhaadhicin.

Isla marka uu qofkii isha ku qac siiyo qof leh sifooyin jidheed ama dabciyeed oo uu jeclaysto oo ka mid ah halbeegyada uu lammaanihiisa ku xulan lahaa, qofkaas xiise ayuu u qaadayaa, laakiin isagu xiise uma agoonsanaanayo ee waxa uu markaaba siinayaa aqoonsi jacayl,dhalasho jacaylnimo,heer loola baxayba Jacaylka Aragtida Koowaad.Marka aad aragto qof la jaanqaadaya halbeegyo jidheed ama dabciyeed oo aad niyadda ku haysatay waad ka helaysaa.Haddii wada-hadal uu idin dhex maro,ka-helitaankaagaasna uu ku samaado xiise ayaa kuu gelaya. Marka aad macaamil samaysaan ee aad wakhti wada qaadataan ayuun buu jacayl imanayaa haddii uu qofkaasi halbeegyadaada la jaanqaado, adiguna aad kuwiisa la jaanqaadid.Laakiin qac isha la isku siiyay oo la isjeclaadaa xayawaanka xiligii qooqa ku jira ayuun bay ka dhexaysaa, iyaga laftooduna tijabo uu labku ku eegayo dheddiggu in uu riman yahay ayay ka horraysiyaan.Jacaylku ma aha baadi hawadaa

heehaabaysa ee waxa uu leeyahay halbeegyo uu ka shidaal qaato oo lagu kala duwan yahay.

jicartha kowzand waa beenta ueu weyn ce ay heesaha to rheaeabi.,dihab sh Jacaylla 16-jirka iso 17-jirku wa dareen faduulnino thoWaahorusocod aadan wax walba si lahmad leh looga daba dhaco.hugu rixayo. Waa jacasl ka madhan dookh io doorasho oo dabcigaeg Khulwada iyo isla-gaar-noqoshada ayaa xaddidaysa. Qofka qorsk ahayn in uu yahay qofkaasi hebel ku sifaysan shakhsiyad u gaar ah oo lagu jeclaado. Heesaha iyo riwaayaduhu waxa ay mindiyaha u soofeeyaan faduulnimadaas, waxana ay labadaas qof eeyaryarba u sifeeyaan janno indhasarcaadisa oo aan hore loo arag, raaxo been ahna ah oo aan jirin. Marka uu ninku gabadha u sheegayo in uu jidhkeeda bilicdiisa u ooman yahay waa faduulnimadaas oo xadhkaha goosatay uun. Suuraysigaas ah in xubin kasta oo jidhka inanta ahba ay janno ku hoos laaban tahay waa uun faduulnimo jidhka loo hayo iyo illin sabab keensatay aanay jirin oo dareeraysa. Waa kaas jacaylka koowaad."Markii qofka dhallinta ahaa uu aaminay in qacda isha lagu siiyo qof ku soo jitaba sidaas lagu jeclaado, waxa uu kaalintii ka-helitaanka iyo xiisahaba gashaday jacaylka laftiisii. Jacaylkii isku-hallaynta iyo isu-dhiibidda cidda aad jeceshahay ahaa.Jacaylkii aad darafka kale samaha iyo wanaagga uun ka filanaysay. Ka dib waxa uu qofkaas ugu xisaabtamayaa sidii qofkiisii. Sidii qof ay axdi iyo ballan dhigteen.Sidi qof inta uu isaguba kasha ugu hayo ugu haya. Sidii qof ay isku cindan yihiin.Wuu isa siinayaa qofkii.

Hal mar ayuu qofkii sidaa lagu caashaqay ka soo dul dhacayaa qofu sheegaya in uu jecel yahay oo aanu ka maarmayn, ayna mahuraan tahay in uu wax la qabtaa. Waa qof ku cusub. Qof aanu xog iyo xaal toona ka hayn waxa uu yahay. Qof aanu kala garanayn dhabtisa iyo dheeshiisa. Qof aanu kala ogayn in uu run ka hadlayo iyo in uu damac kale ka leeyahay. Waa dabeeci markaa sida badanka ah in uu ka diido ama uu ka cudurdaartaa.

mmn ku coladinaraa, wuu kaga xumaanaya,hagardaamo iyo dhibi in edi in nabsiguba uu yahay ciqaabuu lahay si gar ah ugu qorsheeyay cod ayuu qofkaas kula kacayaa Waxa uu gelayaa xaalad digtutooriyad ow isku dirqiyo, isaga oo aan tixgelinayn xurmada, xuquugda iyo

Markii la aarinay jacayl ayaa aragti koowaad ka dhasha,halbeeggi jacaylkanadabageddigaas lagu sameeyay, wax kasta oo la xidhidhayayba way isbeddeleen. Waxa maanta dhexdeenna ka buuxa dhallin wada kelitalisyo caadifadeed ah oo dadka kale rabitaankooda ku muquuninaya, qofkii ka aqbali waayana dhib iyo eed ka tirsanaya oo ku duraya in uu jacayl kaga baxay iyo in uu wax la qaban waayay Waxa fekerkaasi uu dhalay dad wada dhibbanayaal jacayl ah. Dad ka wada cabanaya in jacayl lagu dhibay, cid dhibtay iyo wax ay ku dhibtayna aan bayaamin karaynin, ka dibna cidda ay jeclaadaanba naca, jacylka laftiisana la naca!Deeq iyo Idil midkoodna ma aanu ahayn kelitalis caadifadeed oo ka kale rabitaankiisa ku sandullaynaya, mana aanu ahayn qof uu xiisuhu beer qaaday oo qofka kale isku dirqiyay, amaba fadhiya irriddaas jacaylka ee kahelitaanka iyo xiisaha ah. Waxa uu xidhiidhkoodu ku dhisnaa aqoon iyo ogaal, isfahan iyo isudhuundaloolaan,iyo in si waafi ah wax walba la isula fahansanaa oo la isula jaanqaadayay.

Mid waliba wuu garanayay waxa isaga,lammaanihiisa iyo jacaylkaba la gudboon ee uu geyo, waxa aan u cuntaminna sidoo kale. Qof aan naftiisa aqoon fiican u lahayn oo aan si dhabah isu garanayni in uu jacayl iyo nolol kale toona guul ka gaadhaa way adag tahay.Qof aan naftiisa u caddaalad samayn karayn oo caqligiisa iyo caadifaddiisa aan isu dheellitiri karayni qudhiisa iyo cid

kasta oo uu wax la wadaagaba wuu dulmiyayaa. Wax waliba waxa ay leeyihiin gundhig iyo sees barbilaw u ah, iyo marin ay qaadaan oo haddii lagaleexiyo ay dheelliyayaan.

Hore ayaa loo yidhi reer in uu guuna waa gar, sabanlican in ou Enbboigt. Noloshoodu sahamin iyo si dhow in la inu baray apuy ka salaysnayd.gooyay. Wuu ka weyn yahay in loo tuhmo xtise uu midkood qabay, la shinbito isku fac ah feker ahaan iyo ficil ahaanba oo isla duulay.

waddayba oo wuu ka dhex baxayaa.Marka ay gabadhaasi hadalkeeda dhammayso haddii ay weydiso bal wixi ay uga sheekaysay laga yaabaa in erayo kooban oo inti aanu bixin ay dhegtiisu qabatay uu ka soo xasuusto.

Wansatbabta ay dumatku upe cavrdban in taoy rimankeu dhepapnam antnkanina was un ku jirna hadba labadans qf sida ny isu tahane yihiin.

Marka ay noqoto sheekaynta iyo sheekaysiga,gabadhuwaxa ay jeceshahay in ay sheekayso ama loo sheckeeyo, sida badanka ahra uu xaqigo yahay, iyo in uu macne sidaas u si weyn samaynayo midha soo wareegan iyaga oo maantaba ka sheekaysanaya wax aan sidas u iyo barqo ayuu dhashay. Marka inta joogtaa ay ismati weydo xataa kuwa ka maqan ayaa la wacayaa oo muranka laga qaybgelinayaa,ugu danbayntana mid ayuun baa la qancinayaa ka dib sacado xiiqis iyo xarraan ah.

Taa liddigeeda; nimanku hadalka badan way neceb yihiin haddi aanay kaftamayn ama aanay barayaal ahayn oo cashar aanay bixinayn.Haddii ay dhacdo oo uu ninku isku dayo in uu hadlana sida ugu koobkooban ee uu awoodo ee uu u soo ururin karo ayuu samaynayaa.Waxa jira halkan qodob yara khaldan ooay badiba bulshadeennu aaminsan tahay.

Marka aad doonayso in aad dhacdo hore war buuxa ka hesho oo aad ka haqab beesho waxa aynnu u naqaannaa in ay aabbayaasha iyo awooweyaashu xogtaas hayaan, iyaga oo qudha ayuun baynnuna weydiinnaa. Sidoo kale; marka aynnu doonaynno in aynnu afkeenna waaweyn baranno odayada ayaynnu u tuhunnaa. Haddii se aad doonayso in aad afka ururiso iyo in aad arrin soo dhacay xog ka heshidba ayeeyooyinka iyo hooyooyinka ka ag dhowow,islaamaha ayaa arrinkaas kaa haqab tiraya'e.

Fekraddan waxa xoojinaya maadaama gabadhu marka ay sheekaynayso si tafaasiil hoose oo qodob-qodob ah ay ugu dhaadhacdo xogta ay ka warramayso,sidoo kalena ay ka hadal badan tahay ninkain badan, taas liddigeedana uu ninku hadalka soo ururijo,

278

intiisa koobaneee kaalingalka ahna uu atrin walba ka sheego. Mar walba Dae con ms bo we anos oo bsagu shelbodias soo chacd.yoin saykoolojiyade.Socha auged;inta aad odayga ka ag dhowanayso in ka badan kag dhowow islaanta oo warayso oo ka hadli.

Gabadhu ninba ninka uu ka sheckada badan yahay ec uu ka hadalka ay beegsanaysomaahmaahda Soomaaliyeed ee ah gabadha ninkii afeeda fura apaa lugeheedana fura, rinka u sheekeeya ee ka gosliya hadalkaba xamilin.

Marka ay nimanka saaxibbada ahi kulmaan waxa ay wakhtigooda inta ugu badan ku qaataan gorfaynta dhibaato jirta iyo xal-u-helisteeda,dhibatadaasi ha ahaato dhaqaale, siyaasad iyo mid bulsheedba'e. Halka gabdhaha asxaabta ahna ay ku qaataan xoojinta xidhüidhkooda,maxabbadooda oo ay wadaagaan, iyo sheekaysi,yaanay wax macne buuran lehba ka hadline.

Caalamka raggu waa wada kadeed iyo rafaad, ninkuna waxa uu raganimadiisa ku qiimeeyaa hadba sida uu ugu guuleyto in uu ka tallabo oo uu xalliyo isaga oo aan cid u kaashan,gabadhunaiscaawinta way ka heshaa, taas oo keensata in ay gabadha kale caawiso iyada oo aan ka dalbanin, waana mid ka mid ah isfahandarradaugu weyn ee lab iyo dheddig dhex marta.

Waxa ay gabadhu ku dhaqantaa aragti ah, wax kastaaba in ay ku jiran horumarin joogto ah iyo in sidii

uu ahaa marba laga sii qurux badnaysiiyo, guriga iyo agabkiisu si kasta oo ay u qurxoon yihiin in ay haddana beddelaan oo in sidan laga sii qurxiyo ay doonayaan.Halka taas liddigeeda uu ninku aaminsan yahay aragti ah, haddii arrin si

dabeci ah oo ku habboon uu u shagaynayo in an a farugahan eh

Gabadhii iyada oo aragtidecdaas ka shidaal qaadanaysa ayay idka ay si hagajiso, isaguna illeenwixi xumaada ayuun buu bedelaoge hagajiyo,waana mid ka mid ah sababaha keensada isfahmiwaag ay labadaas qof isjiidhaan.

Marka uu qof magaalo ka tago ee uu muddo ka maqnaado,xata haddii uu ahaa qof magaaladas kaalin muhim ah ugu jiray,magzaladu sida uu isagu u xiisaynayo uma xiisayso, sida uu isagu u jecel yaharna uma jecla ee isaga ayaa mar walba kaga badan xiisaha.Gabadhuna maadaama ay ninka feedhiisa ka abuuran tahay 00 ay tahay qayb isaga ka soo dhanbalantay, sida ay isaga u jeceshahay mar walba way kaga badnaanaysaa sida uu isagu u jecel yahay, oo isagu waa kulligii laga soo jeexmay, iyaduna waa qaybtii ka soo dhanbalantar,qaybtuna mar walba way ka xiise iyo gacaltooyobadan tahay kulliga Waxa taas u horseedaysa maadaama ay gabadhu tahay caadifiyad,ninkuna caqlaani. Si kasta oo uu u jecel yahayba marar badan ayuu si caqlaani ah ula dhaqmayaa, laakiin iyadu haddiiba ay albaabada qalbigeeda u furto mar walba way la caadifaddhaqmaysaa,haddana marar badan jacaylka ragga ayaa ka qoto dheer oo ka rungalsan ka dumarka, waana sababta aynnu mar walba u maqallo nin jacayl dartiiu waashay, u kadeedmay, ama u dhintay, laakiin gabadhaha qisooyinka jacayl lihi xataa haddii ay ninkaas laabta kalgacayl ugu sidaan ay noloshooda iska wataan ee ay guursadaan ee ubadka ay dhalaan.

Marka uu ninku daallan yahay wax kasta oo in uun uu yara dhibsado wuu ka dheeraadaa, ha ahaato buuq, qaylo, muran,dood,iyo xata sheekaysiga uu cid la hawraar wadaago'e, waxa keliya ee uu doonaana waa in uu raaxo iyo xasillooni helo, waxana uu ka raadiyaa buug uu akhriyo,

telefishanka oo uu daawado, barnaamij uu ku xidhnaa oo uu daawado, in uu meel cidla' ah fadhiisto oo nafis uu isdareensijyo,iyo xataa in uu seexdo.

Gabadhuna waàtaas liddigeeda oo waxa ay jeceshahay marka ay hn sher oel o hahua a gabo oo aylascheekaymaa,La aeunfa an ar culayska nadaygta,sidas ayayina raaxada ku heshaa.me gbodhurs of hodka u soo dhes gustho ce macka hore na sita ay fahmeen haveenka indhcerparadka ah

oo hu dhacaan. ce fahansan Mrkuu seexdo sanqadhaa laga

aayaraa, sarirtuu ku seexanaayaa loo saxar tiraa.Halka gabadha aan indheergaranimada lahayn ama aan fahansanayn saykoolojiyaddauu ninkuu fekeraa ay aamusnaantisaas iyo iirurintisaas u qaadanayso mid

iyada ka dhan ah oo aanu iyada,cuntadeda,hadSidoo kale; ninka waaya'aragga ahi xataa haddii uu lkeeda,iyo raggeeda midna doonayn.daallan yahay waxa uu isku dayaa in uu gabadhiisa hadalka ka dhegaysto oo uu ka guro,iyadana uu la hadlo dhibtiiba ha ahaato'e, uuna fahmo in uu daalku ka hadlinayo oo ay nafis raadinayso.Taasliddigeeda; ninka aan fahansanayn saykoolojiyadda gabadha ijo qab-fekerkeedu waxa uu markiiba isku qancinayaa in ay tahay gabadhiisu mid waalan oo yooyootan badan oo qaylo iyo yulqan ku dhego tiraysa oo aan agteeda nafis lagu dareemayn, ka dibna ama 'naga aamu aannu kaa nasano'e!' Ayuu ku odhanayaa, ama wuu iska unurinayaa oo wuu ka fogaanayaa, labadaasibana gabadha way sii dhibayaan.

Ninku waxa uu gabadha u hagarbaxaa oo wax walba uu u huraa oo uu hil iyo hooba isla garab taagaa, garab iyo gaashaanna uu u noqdaa,marka ay dareensiiso in ay u baahan tahay oo ay wax ka sugayso ama ay ka naawilayso. Marka ay dareensiiso in aanay ka maarmayn ayuu bad iyo betriba u jidhaa

sidii uu u haqabtiri lahaa ee aanay sinaba baahi ugu dareenteen.

281

iyo tusaloypnisu bu birian on aty dhanlccda nans ka durenstien mruad aeynegrina u a hayo, hadalkeeda iyo hawsha ay cabatana ay aedio qiimo ka leeyihiin.

ka kale hankisa rpo himiladisa wun isku garab taagayaa oo gurnad iyo

Balse haddi ay isla fahmi waayaan intas mar kasta oo ay gabadhu muujin weydo arrin iyo adduun,galmo iyo danayn midna,isaguna wunu mayo. Gabadhuna mar kasta oo ninka agtisa qadderin-la'aan iyo in aanu qiimaynayn ay ka dareento oo ay aragto in aanu hadalkeeda dan ka gelayn,hawsha ay qabatana aanu ku mahadinayn oo aanu ku qiimaynayn,way hawl iyo hadal gabtaa, way talo iyo tamarin deysaa,way ka durugtaa oo digtooni ayay ka qaadataa, wayna ka agab-iyo-arrin ursataa.

Waxa lammaankaas soo kala dhex gelaya engeg caadifadeed iyo qallaf qalbigu uu qonbobo, noloshoodana isqalluuf iyo isqallac ayay ku qaadanayaan,midiba ka kale ayuu wixii khaldama qoorta u sudhayaa gogol lagu gelgelimaysto iyo goor baas oo la isguulguulo oo muran madhalays ah lagu hawllanaado ayay noloshoodna ku soo ururaysaa.

Ninku waxa uu gabadha wax uhuraa marka ay u muujiso in ay u baahan tahay, halka mar kasta oo ay u muujiso in ay isku-fillaanshüinyo joogto oo isaga aanay waxnaba uga baahnayn uu irridaha noloshiisa mid mid uga xidho. Way jirtaa maahmaah ah baryo badan iyo bukaan badanba waa la isku nacaa, se ta lammaanku baryo ma aha ee wax kasta oo ay isaga baahan yihiin kalgacaylkoodaayuu kobciyaa oo labada dhinacba kor ayuu uga qaadaa. Xataa haddii ay gabadhu shaqayso mushaharkeeda iyada ayaa leh, sida ay doontana way ka yeelaysaa,se marka ay ninkeeda u bandhigto in ay

arrin ka doonayso isagu waxa uu dareemayaa in ay qadderinayso oo ay ixtiraam u hayso,

meodhinadisana ay bou gi woan bibag, waxinn u ku clednalaygaindanaynta ay gabadhu ninka ku uu nijaddeeda kalgacayl isu-booddo ah ayaa ku dhalanaya.gaclooto,sidaasna dadhmatha in ay u marto candifad ah naxatis ama cadho iyo wadla ,waasababta ay raggu u dagaalka badan yihiin,wax ku xalliyo,gabdhuhuna ay u muranka badan yihiin Galmadu waa waxa ugu horreeya ee uu ninku ka fekero marka ay gbadhi niyaddisa ku soo dhacdo,waana mid ka mid ah waxyabaha soo dhaco.

Waa sababta ka-sheekaynta Xuuralcaynta dheddig ay diintu aadka ugu qadaadhigtay, Xuuralcayn niman ah oo ay dumarku helayaanna aanay badanka u soo hadal qaadin maadaama aanay dumarku dhankaas galmada sida ragga u xiisayn, ama tobannaan arrin oo uga horreeyaa ay u jiraan.

Ninku waa ka mar walba wax hororsada ee raadsada,waa ka waxa uu doonayo gacmihiisa ku qabsada, waana ka aan wax sugin,ama waa ka mar walba sahanka ku jira.

Gabadhu waxa ay doonayso inta ay helayso way u dulqaadan karaysaa,samir ay wax ku sugto way leedahay, in iyadu ay wax raadsato oo ninka ay hororsatana waxa ay ka doorbiddaa in iyada la daneeyo oo la raadsado.

Diritaanka galmeed marka ay nogoto, ninka waxa ugu filan in ay ku soo dhacda, eray galmo la xidhidha oo uu maqlo,gabadh yara

Halla gabadha salaax muddo qaata, xamxam hadal, xoodamin gacmeed,xaradhaamingacantogaalays,xiisagelin galmeed,

283

grenagxemaon dhan valba ahs bo galgalasbo ugu yatan dayjinuah.qooyo oo la qallajiya ay badan qaadanaysa oo kor iyo dareenkeeda soo wada jeediso.

shaqera Gadhiga baadroolka ahi wax kululayn ah uma brahna had beahan yahay in la kululeeyo oo leewar (sheellare) Ia siyo oo ha ding gaadhigas baadroolka ah oo haddi furaha lagu rogo toos ayaa loo furaha lagu rogo waxa uu doonayaa muddo in la kululeeyo.Waa sababta uu nebigu u amray ninka in aanu gabadhisa sida u gudbiya u diro, farrin-sidahaasi ha ahaado dhunkasho amaba gacantogaalays'e.

Galmo ahaan,ninka raaxadiisa iyo biyabixiisuba way soo degdegan,marka uu kala dego ee shahwada dhibaysaa ay ka soo faaruqdana in uu jeegada u jiifsado oo uu baxardaadsado ayuu jecel yahay.

Halka gabadha shahwadeedu ay soo daahdo,gaar ahaan haddiiaan gacantogaalaynta iyo qashqashaadda galmeed loo barrimin galmada ka hor, ayna doonayso ninku xataa haddii uu isagu dangaadho in uu iyadana u daneeyo oo aanu ka faaruqin ilaa ay ku diirsato.

Waa sababta uu nebigu u amray ninka in aanu xaaskiisa ka dhammaan marka uu biyabaxo ee uu siiyo xilli ay iyaduna ku raaxo-gudato oo wixii hayay ay kaga soo faaruqaan, intaas ka dibna uu weliba laabta ku sii jiifiyo oo uu danayn dareensiiyo.

Xilliga galmada, ninku waxa uu doonayaa in uu galmo raaxo leh dareemo oo uu ku nafiso, gabadhuna waxa ay doonaysaa in ay gacaltooyo (roomaantig) raaxo leh hesho o0 ay ku nafisto.

Labadan qof midiba ka kale wuu u hayaa wixii uu ka doonayay,oo gabadhu waxa ay ninka gacaltooyadaas iyo roomaantigas kaga kasbanaysaa in ay galmada ugu raaxayso oo urtiisa, ibtisa iyo araggiisaba ay u roonaato,ninkuna gabadha waxa uu galmadaas raxada

leh kaga ladunagnat in tu graloor badan byo danayn u muiyo,mu godlo uu gaaxda ka liso.Haddiise amn o la helo, bogana damacisa ma daweynayo, vaxa ou ke bale an doonayana kama helayo.

dd(dijpxa Dayuxu wuu dhinmaa,wuuna kordhaa,wu wada baab'aa,ko jiraa. Gabadhunawaa la mid oo waxa korukaca darecnkeeda chan ay ku jirto, sida in ay caado leedahay iyo in ay ka dahirsatay,in ay uur wallacahleedahay iyo in ay wallac-ka-baxday, iyo hadba dhecaannada uu jidhkeedu soo daayo. Qodobbadaas oo ay u sii raacaan nafsad ahaan jacaylka uu ninku dareensiiyaa heerka uu xiseheeda galmeed geynayo oo ama dhulka dhigaya ama kor u qaadaya,araa sababa in ay sida dayaxa marna bilaa shahwo noqoto oo sida bishu ayu ribbato loo waayo, marna ay dayax 15and ah noqoto oo ay xiddigaha guud marto.Halka taas liddigeeda ninku uu yahay sida qorraxdaas joogtada aha ee maalin walba soo baxaysa ee kulaylkeeda iyo wakhtiga ay joogayso midina aanu isbeddelayn. Waa mid ka mid ah sababaha uu ninku mar kastaba galmada uga fekerayo, gabadhana ay mar walba galmadu u tahay waxyaabaha ugu danbeeya ee ay ka fekerto.

Nafsad ahaan,gabadhu waxa ay ugu jeceshahay in danayn dheeri ah la siyo, ninkana waxyaabaha uu dhibsado waxa safka hore kaga jira danayn dheeri ah in la siiyo iyada oo ahmiyadda iyo danayntu aanay marnaba meesha ka maqnaanayn, haddana gabadha mar kasta oo dheeraad looga kiilo oo ay saayid ka dareento way ku faraxdaa oo niyadda ayaa ugu xasisha maadaama ay qof qalbigiisa sidan oo dhan ugu weyn tahay.Halka uu ninku marka uua dareemo danayn dheeraad ah iyo isaga oo sidi ilmo dhallan ah-ama dabcan sida ay gabadhu jeceshahay-loo

285

daryeelayo uu dareemaa in cidda sidaasu yelaysaa gabadhisa yo xitna Arimihisas yaryar debberan karaynin,raganimadisa iyo karankisanu qaadaya waa in uu gofkaas hoosta ka dido waxaas uu u sojecdinag uu qaato isaga oo il quudheed ku cegaya, sidasna wanangga u gofkag qalbiga ugu hayaa uu u yaraado.Waa sababta nimanku marka ay qaangaadhaan wixi ka danbeeyaayagtooda,00uga dheeraadaan guryohooda iyo hooyooyinkood hooyadiina ilmeheedii yaraa ayuun buu u yahay oo sidii marki aan kaadida ceshanayn ayay doonaysaa in ay u daryeeho illeen waa hooyo'e,isagana qodobkaasi cidhiidhtoon iyo nac ayuu ku beerayaa oo waxa uu u arkayaa in loo malaynayo in aanu iminka isku fillayn. Sidaa awgeed;intii uu hooyadii niyadda ka karhi lahaa ee uu habdhaqankeeda dhibsan lahaa waxa uu doorbidaa inta ay wada joogayaan in ay yaraato.Ka
wvarran bal gabadha ay meherka iyo waayaha adduun isu keeneenna?!Waxa iyaduna ka sii daran haddii uu danaynba waayo oo qofkaas agtiisa in aanu maqaamba ku lahayn ayuu u arkayaa. Qaabka ugu wanaagsan ee nin loola dhaqmi karaa markaa waa in wax kasta oo isaga ku saabsanba dhexdhexaad laga ahaado oo aan aad loogu talaxtegin,aadna aan loo yaraynin.Halka taas liddigeeda gabadhu ay doonayso wax kasta oo ay ka helaysaba in uu ninku heerka ugu sarreeya ka joogsado.

Ninku maamuuska ugu weyn ee uu isu hayo ee naftiisu ay agtisa qiimiga kula leedahay waa hadba karaanka uu u leeyahay gudashada waajibyadiisa iyo in uu ku filan yahay masuuliyaddiisa. Sababta Ilaahay uu dabciaas ugu abuuray waa in uu ninku masuuliyadihii nolosha intoodii badnayd isagu hayo.Haddii lagu faragashado masuuliyadihiisaas oo gabadhiisu tusaale ahaan ay isku daydo in ay qabato waxyaabihii isaga u yaallay ee qabashadooda uu uga qiyaas

qaadanayay mugga raganimadisa laba qaab ayuun buu kaga falceliyaa:

In uu u daayogabadhaasarrinkaas oo aanu kula murminba ee Dinae Dea h adisiogfd wogdhey to tr u den vesdry nos.to iskasoo agmadoobeeyo oo uu galmo aan dhadhan lahayn M Audon anuu dhafin,so nsn gelbocha gru kn chibeolahag Bedfodi bueadba ypiba ny magalka mushanxayan, iyagana orod no tacab ku1 jira,bilaabmay.Ino in a gabarhaas isqabsadaan 0o uu raganimadisas ou u arko in tn sinag ku bero,isaguna uu ispidhaahdo gabadhu yanay gacanta clano ayuuba kaa ifiyay" Khayrba ha samayn sharba kuuma pinaaddo'e!?' Bal maxaa baddaa i geliyay?!' Iwm.

Qabka ugu habboon ee ay gabadhu ninkeeda u caawin karto,agisana ay qimiga ugu yeelanaysaa, waa in ay dareensiiso in uu u baahan yahay caawimaaddeeda.Tusaale; nimanku kuma fiicna in ay guriga dhexdiisa wax ka badhaan. Marka uu ninku waayo mid maryihisa ka mid ah ama furayaasha gaadhiga iwm ee uu gabadha weydiiyo,haddii ay markiiba u soo saarto wax sidaas u weyn u arki maayo. Haddii se ay ku tidhaahdo 'dee baadhbaadh' kollayba cabbaar marka uu hadba qol isdhextaago ee uu eeg'eego ee uu ka waayo gacanta ayuu taaganayaa oo iyada ayuu garab weydiisanayaa isaga oo ku raalli ah. Yacnii;ninkaaga saacid,se marka uu isdhiibo ee uau caawimo u baahdo la sug.

Halka gabadhu iyadu dhankeeda ay kufaraxdo mar kasta oo ninkeedu masuuliyaddeeda uu caawin ahaan faraha ula soo galo ee aanu xisabin ahaan u soo faragashan.Haddii uu ninku gabadhiisa cuntada la kariyo, ubadka la dheelsiiyo,dharka la dhaqo, nolosha masuuliyadaha ay ka haysana uu caawimaad ahaan ugala qayb qaato, marba marka ka danbeeya qalbigeeda wuu ku si weynaadaa.

Narkan tu ninku dhibaato xallinteedn bu dhes liro 95%o manhindhibaabahaas,noloshakale 6o mn waxa uu ku maqan yahay xallinta uu u soo jeedayaa keliya 5%. Marka ay gabadhuaragtoninkii oo maqane-jooga ah iyaduna haddi anay fahansanayn supkooloiau isu maahinayo oo aanu iyada danaynayn,halkaasna cdhibaato kale aom looga dhacayaa.

Maadama uu ninku yahay caqlaani gabadhuna caadifiyad,attmaha ay dareemayaan ama ay dhaaddan yihiin heerka ay ka istagayan ayny aad ugu kala taggan yihiin.Ninku waxa uu jecel yahay iyo waxa uu neceb yahayba si dhexdhexaad ah ayuu ula dhaqmayaa, oo waxa uu neceb yahayma dhulka ma wada dhigayo, waxa uu jecel yahayna cirka ma wada geynayo,si dhexdhexaad ahna labadaba wuu ula dhaqmi karaa marka laga reebo gabadha uu sida dhabta ah u jecel yahay.

Gabadhu iyadu waxa ay jeceshahayna way jeceshahay oo dhankooda lagama marayo, waxa ay neceb tahayna way neceb tahay oo lama tusayo,sida badanka ahna ma laha xaalad dhexdhexaad ah 00ay labadaas kala durugsanba isku si ugula dhaqmi karto.

Luuqadaha ay wax ku kala cabbiraan ninka iyo gabadhu way kala duwan yihiin. Gabadhu marka ay arrin ka cabanayso ama ay diiddan tahay waxa ay iska taagtaa halka ugu danbaysa ee arrinkaas laga joogsan karo,waxa ay jeceshahayna sidoo kale halkaas u danbaysa ayay ku cabbirtaa. Taas liddigeeda;ninku labadaba si dhexdhexaad ah ayuu uga hadlaa.Tusaale;marka ay gabadhu doonayso in ay ninkeeda uga cabato in aanu badanka la hadlin iyada ama aanay guriga tartiibsanaantisa lalin isaga iyo ubadkiisu, waxa ay u cabbiraysaa qaab ah:"weligaa aniga ilama aadan sheekaysan!"“gurigaas oo kala habaysan weligaa ishaadu qaban mayso!”Iwm.

Labadaas weedhood waxa ay muujinayaan in ay gabadhaasi dafisan tahay in ninkeedu uu weligeedlba sheeko la wadaagay, iyo in

gurigecdaasiBalse marka ujeedka ay gabadhu ka leedahay loo aanu ubadkeedamidna.eego waxa ay badanka2ay para dhibsanaysokala-daadsanaanta guriga oo badanka aanay ninkeedaiyoubadkeedu daryeelin.

ama ho jecnd ba ay cabbirayaanba waxa ay ku cabbiran darec bute ah oo aan kala dhinnayn.

ainlayaxa ayku odhanaysaa:"adiga ayaan adduunka oo dhanba kunga jecelabay!" Iyo "waan kuu dhimanayaal"Kama aha iyada hadalladan kuwooda xanaaga ah iyo kuwooda jaylka ah midkoodna in ay been sheegayso, ce waa in qaabka ay dhinnayn,dhexdhexaad iyo dhimidna aanu lahayn.

Waxa se ay dhibaato ka taagan tahay marka aanu ninku fahmaynin sapkoolojiyaddaas gabadha ee uu erayadeeda sidii ninku marka uu hadalladan oo kale ku yidhaahdo u fahmo, uuna u arko in ay isaga duudsiyayso oo wixii uu weligiiba wanaag soo tarayay ay dafrayso,tasina ay u horseeddo in uu ama difaaca giijisto oo gabadhaas ay ismutaan,ama in uu u aamuso oo wanaagyadaas uu u sameeyo ee uu hadalladeedaas ka dhadhansaday in ay.dafirsan tahay uu kaba joojiyo oo aanu dib danbe ugu kala furin.

Ninka fahansan saykoolojiyadda gabadha ee marka ay qaabkan u hadlaysaa waxa uu dhaadayaa in aanay dafirsanayn wanaaggiisa ee ay cabanayso,se cabashadeedaas ay sii marinayso jid ah in ay muujiso sidii inay waxtarrada uu ugu jilan yahay qaarkood dafirto. Ninka xaaladdaas fahansani markaa waxa uu isku dayaa in uu tabashada gabadhiisas shaafiyo isaga oo aan erayadeeda raacraacayn.Waa sababta marka ay ninka iyo

gabadhiisu isqabtaan ee loo gatnaqayo haddii uu ninkua yidhaahdo:"waxan iyo waxaas ayay igu tidhi ” looguyidhaahdo: “ maxaad gabadha xanaaqsan ka dhegysanaysal!" Ee isaga sanka lagaga tolo gar iyo gardaraba in uu arinkas liqo,weliba gabadhana uu raalligeliyo!

Wax ayrnu markan fihmayminae sababta u nebigu u tibaaxay in ou ka xanaajiyay ay u dafirayso weligiiba in ay ka waxwanaagsan aragtay!Bathijahu u ammanla midkood a lie botle ka doonana wanks Beide Nackanu ka dounaso in ayaghabadu redato in u almon ls Marka uu ka doonayo in ayisaga la dhacsanaato ooaanu rnin kale u Maudgan in uu byada ku ekado ao aanu gabadh kale la wadain raue saman iyo weyneyn ka helo rumaysi iyo in uu was ka maqlo aruy lea in ay ka hesho ayay doonaysaa.

Dhammaan qodobbadani waa wada wanagisla halmaala,se midiba qayb ayun u janjeedhaa. Haddi uu lammaanka midkood ka kale ugn xataa haddi aanu ka helinna qofkaas waxa uu qalbigiisa ka hananapa kalin aanu qof kale ka gaadhin. Marka ay lammaanku sidan arrinkanu fahansan yihiin midiba ka kale ayuu ka haqabtirayaa baahiyahas,noloshooduna wax kale oo haleela mooyaane hoodo iyo hodantinimo jacayl ayay ku Ninku jacaylka waxa uu ku cabbiraa falaad iyo dekaynaysaa.ficillo,gabadhuna odhaaho iyo erayo.

Ninku inta uu jeclaado gabadha jecel waxa ka badan inta uu jeclaado gabadha ixtiraamta ee qadderisa, taas ayaana kashiisa hanata oo aanu ka dul dhaqaaqin.Gabadhuna inta ay jeclaato ninka jecel ka badan waxa ay jeclaataa ninka danaynta,ahmiyadda iyo maamuusidda siiya.

Loollanka raggu dil ayuu ku dhammaada, loollanka dumarkuna isximin iyo xasarad,sidas ayuu loollanka ninku mar u soo

afmeermas,loollanka gabadhuna uu u aalaaba u waaraa.

Ilaxa ugu w casa g wegn ce iu gahadha ugu deqpa wa dan siud

ninka uga f 3fadhido in uu fahmo niyaddecda tyo ujeadkeda,ninkand waalagu dhibayisfahmiwaagasi waxa uu horseeda khilaaf iyoxanaaq waradagtahay,inahos gof bog cusub oo boodhkail laga hufoy apa u fug ie

Hadalka iyo erayada la adeegsanayo gabadhu xotriyad buuxda ayay wa l yidhahda, halka rinku eray kasta oo nu yidhahdo misanka ino xoolihiuu xoogsaday oo inta xeer lagaga qaado bankaas cad loogala marayo.

Ninku jacaylka waxa uu ku cabbiraa dhoollacaddayn uu u muujiyo lammaankiisa iyo werwer-la'aan uu mar walba niyadda u dejiyo isaguna uu ku dejisto,halka ay gabadhu jacaylka ku cabbirto werwer iyo danayn dheeri ah oo ay lammaankeeda siiso, labada qofna midiba ka kale dabcigiisaas wuu ku raalligeliyaa haddii ay isla fahansan yihiin.

Marka ay dhibaato dhacdo ninku canaanta dadka kale ayuu saaraa oo eedda wuu iska durkiyaa, gabadhuna iyada ayaa eedda isa saarta ha ku saxsanaato ama ha ku khaldanaato'e, garawshiinyana waa gar badhkeed.

Ninku waxa uu jacaylkiisa ku soo bandhigaa waxtar iyo ilaalin, in gabadhaas uu baahiyeheeda kefeeyo

oo uu waxtaro,iyo in uu dhib oo dhanba kaga dahnaado oo uu gaadh iyo ilaalo u noqdo.Halka

gabadhu a ku soo bandhigto caadifaddeeda dheddignimo, u-werwer iyo qadderinta shakhsiyaddiisa,odhaahihiisa iyo ficilladisaba.

291

Ninkon wax wu ilawan, se waxba ma cafiyo.Gabadhuna wau nug cafidaa,se waxba ma illawdo.

Nimanka, ninna nin kale qoyskisa iyo xaaskisa faraha lama gulo danbeeyaan,se dumarku way isfaragashadaan,gabadhana gurigecth in dhisatay iskeeda ugu maamulan karaysodaasisida ay doonayso uu ugu ahaan karayaana waa in ay haweenka ku xernani magaamka ay mudan tahay ay ku maamuusto, reerkeedana ay iyadu u tashato.Haddii ninka iyo gabadhu ay sku mid ahaan lahaayeen waxa ay u kala firdhan lahaayeen sida labada daraf ee magnadku ay u kala firdhadaan,sirtuna waa in la isla fahmo kala-duwanaanshaha oo mid waliba uu ka kale xaqiisa siiyo.

Gefafka ugu waaweyn ee xidhiidhka lammaane ku yimaadda waxa hormuud u ah in gabadhu ay ninka ula dhaqanto sida ay iyadu jeceshahay in loola dhaqmo, ama sidii ay gabadh kale ula dhaqmi lahayd. Ninkuna uu ula dhaqmo gabadha sida uu jecel yahay isaga in loola dhaqmo,ama sidii uu *** isagu nin kale ula dhaqmi lahaa.Waxaas oo arrimo naga dhexeeya lab iyo dheddig ahaan waannu isla fahansanayn,xogahan dheeraadka ah markii aan la wadaagayna wuu ku farxay sida aannu fahan ahaan isku tareenka u fuullay, wax walibana si qurux badan oo ku habboon ayay u socdeen ilaa uu adhaxda iga jebiyay!

Adhaxda ka jab kaasow! Istaaqfarallaah!

Maxaan u habaarayaa!

Seao alia se me bod n bove o an beg aoyra dhu bhasinr

293

Deeq:Qof kasta oo dhallin ahi wuu ku taara in uu helo lammuane way dhanna uu ku halleeyo, isaguna tisa oo dhanba uu la wada qado.

karaana waa guur,higsiga haasaawe kastaana waa guurkaas.Marba haddi uu yahay higsiga ugu sita ee nolosha, uuna yahay waxa mahuraan ah in u-kuurgalkiisa,kabaaraandeggiisa iyo u-firfirsigisa loo daymo bdinayo ee dhinacyo badan la iska taagaya ay uu saxartirto inta aanu marin.

Guurku waa xidhiidhka keliya ee lab iyo dheddig inta uu dhex maro guuleysta, oo maadaama aynnu kala qaabdhsimeed, qaabfeker iro rabitaanno nahay wax kasta oo aynnu isnidhaahno ku midooba labadeenna jinsi waynnu ku fashilannaa sida badanka ah, se guurku wa inta aad hayso oo aan u baahanahay,iyo inta aan hayo oo aad u baahan tahay,waana korantada xadhiggeeda taban iyo keeda togan oo aynnu isula nimaadno, waana hubaal in ay koranto dhalayaan, guurkaasina midhadhal ayuu noqonayaa haddii sida uu yahay loogu aado ee isaga oo ay fari ku godan tahay aan la isku maqiiqin.Guurku ma aha xubno israadsaday iyo laba qof oo gogol iyo guri ku kulmay,ee waa qoys qoys la midoobay iyo qabiil qabiil la jaalay,oo waa tii la yidhi, inani waa meel-xunjoog.

Guurkaagu waxa uu go'aaminayaa dad dhintay oo dharaato duugnaa magacoodu meesha uu ku danbaynayo iyo sii-noolaynta xuskooda,waxana uu go'aaminayaa habnololeedka iyo habdhaqankaay nolosha kula jaanqaadayaan dad aan weli dhalani, ee haddii aadan taada dan ka lahayn dadka aad xanbaarsan tahay aayohooda ka tal ilmahaaguna maalinka uu hiilka kaaga baahan yahay waa maalinka waalidkiisa kula dhalaya aad xulanayso.Guurku aniga iyo adiga ayuu meesha ka saarayaa oo waxa uu unkayaa innaga. Kelinimada ayuu dilayaa oo wadajirka ayu

noolajnayaa,balseba'ba waa in uu guurkaagu kelinimada sii in oo wdeg jo aunmankag ad nogetan babo lada.d jro maan kala taggan.

man was u kagi asda yan yohay admign indisa lale ce fehet,tian Oow Idiley; habdhaqanka iyo habfekerka dadku laba ayay u kala hnet ijo fekcad uu haysto ayuu wax ku halbeegaa, Caqlaanina wao o ku astaysnow, jacaylkuna aalaaba Jitaalaha ayuu la jal yahay wagysana labadaas ka uu u janjeedho hubi,Jiraalahana ha seegin.

Guurku waa unugga koowaad ee uu ka unkamo jidhka bulshadu,sida uu qofkuba u yahay unugga koowaad ee ka unkama xawooyinka waalidka ce Zygote,haddi unuggaasi aanu si ku habboon u dhismin,dhinacyadisa uu ka shdaal qaato aanu ka wada dhergin, bu'diisa ah gabadhuna aanay unuggaas intisa kale ee ubad, oday, ehel, asxaab,iyo ummadda kaleba ah isu haynin, waxa uu noqonayaa unug caabuqsan (kansar uu hayo), qaybsankiisa uu bulshadaas ku soo biirinayo xubanaha cusubina waxa ay noqonayaan xubno (shakhsiyo)caabuqaas (kansarkaas) sida, sidaasna bulshadaas unuggaas keliya ee qoyska ahi baabo'ooda ayuu kaga arriminayaa.Si uu guurkaagu libin u soo hooyo waa in aad ka shidaal qaadataa xeerka saldhigga u ah guurka ee ah, si aad u hesho qofkii kugu habboonaa in ay mahuraan tahay in aad horta adigu noqoto qofkii habboonaa, ma waayaysid markaa qof kuu qalma oo shinbirba shinbirkiisa ayuu la duulaa.

Qofka lammaane bilaa dhalliil ah raadiyaa weligii ma lammaanaysanayo, se ceebaalka qaar aan la qaadan karin ayaa jira.Jacaylku waxa uu leeyahay gan (gas), haddii guurka hortii gankaas gadhfeedh(shanlo) loo qaato oo la farafareeyo guurka dabadi isaga oo hoodhay oo dub siiban iyo

harag engegan oo san noqday ah ayaa la isula yimaaddaa, ka dibna fal aan laabta lagu hayn iyo faruhu way istlidane lammankasi lalleemo (lulo) hurdeed oo sanna ma ledaan,

著 社

s kat o iu haeyieerioad a ditin yabhoy co xanarud iyo zalld maayo,eewaa in caadifadda jacaylkeennana aynnu oo inagu tari wa coshikeeritanayinu zoo granma o nolosheenna aynu ruurta u ritaa.Haddii se muxibbadu ay ina qaaddo oo 'waynnu hecdltdhas,cooshad parna waymnu wada degiye ayanu isgursanno.dhacen aynnu farta dhexda ka qaniini doonno.Waxa aan ka soo kaxaysanayaa daadihiye aabbe, daryeela hooyo, ld tan iyo ababkaagii la soo oon-wadaagaysay eeaad soo eyfulafo oo garaykeeda aan baadho uun ii nogon maysid,ee intaasba inaha ad ka tebayso waan kaa tiri haqabkooda (baahidooda),daltabyo ijo dadtabyo Guulle idankii kuma badayo, saranseer adduun iyo saxarir aad la ilgo'dana kuma galinsiinayo. Boqorad ah bu'da (wilka)ishayda ayaan kaa dhiganayaa, wadanoolaansheheennuna ka weyn mid iswaalwaal wax lagu kala doono, isweydiin iyo xisaabtan ku isman,ama isjidad iyo loollan joogto ah ku jira. Intaas aan kuu noqonayo inteeda ayaa adigana lagaaga fadhiyaa.

Marka ay noqoto guurkeenna, waa in aynnu kun xisaabood iyo xisaab isugu laabannaa oo qodob kastaba aynnu saadaalinnaa sida apnu kaga talo gelaynno iyo hadba waxa aynnu kaga go'aan qaadanaynno.Guurku waa aasaaska dhaxaltooyada aadamaha eearlada,waana imidda dhadhanka nolosha laga galo haddii si wacan looga firsado,xagga Rabbina waa laga jecel yahay,waana waxyaabihii uu nebigu "Dhallinyarooy; ruuxa awooda arrimaha reernimo ha ku guursado,guurku wuu arag-laabis badan yahay, wuuna dardaarmay kuwa ugu mudan. xubin-dhawris og Jahaye. ” Bukhaari:

4.779.Muslim:1.400.Guurku waa beerta laga biqlinayo ubaxii ay ummaddasi aayaha intifacsan ahayd ee ubadka arladas u soo baxaya ahaan lahaa.

Waa ka bulshada isu haya ee labanka iyobulukeedka de tferd adhe bub foada u ah un baunioan abur. Oof par bad:Waa 2Tn laga yaqyaqsoodo haddi aanay daruuro iyo dan kale imanin. havdiodha, in kasta 0o calaRa iro ciddn and isku edihin n ng

haddana waa in aad falkii la timaaddaa,noloshaadahalkak Rabbina aadtalosaarataa waxna aad daydaydaa, xasilloonida tuhmaysana aad u kuurgashaa. fadhiyo waxakaaga filan Guurku miisaanka uu inoogu maahmahaha Soomaaliyeed oo aad u firsadid uun. Ma og the waaya'aragtay, gadaashana ay ku wadato murti qof lasa co haddii ay mahmaahdaasi weli bulshadaas dhexdeeda

adecgsi lb leedahayna ay muujinayso in tijaabadeedii ay weli taagan tahay.Ha dhayalsan maahmaahaha ummadaha, guurkana maahmaahaha kg yidhi uun eeg afkii ay doonaanba ha ahaadeene, waayo; waa tijaabad ugu muddada dheer ee uu aadmigu waaya'aragnimada ka haysto.

***

Sidaas oo dhan ayuu iigu carbinayay guurka, rejadayda guuma ar isaga u ahayd,xisaab kasta oo aan leeyahayna aan isaga ugu saleeyar.Wuu gacan wanaagsanaa oo deeqsi ayuu ahaa, magaciisa ayuuna Ilaahay u qaaday oo qof waliba magaciisa nasiib ayuu ku leeyahay. Wa deeqsi ku deeqaya.

Garasho Ilaahay wuu ka hodmiyay oo kuma aanan khasbanayn was kastaba in aan afka ka sheegto ee ishayda ayuu ka fahmayay.

Laakiin haantaa-hadhuubla' ayuu maanta i dhigay, hawaavigg adduunna wuu igu sii daayay, barbarkii uu iga xigayna wuu ka baxy,dhankiisa ayayna dhaxani iga haysaa.

***

DeC hbdllahiveri anrdinahas oo dhamni waxa ay ina batapan inqodobbo mahuraan ah si uu gof kastaauuku bodbado dhab ah baradisa ugu helo.IHth gursanin qof aad in uun relo ka qabto waxyzabo aadan ku beddeli doono,ruugto ayaadkalahuleelaysaaye.farta oo aad dhexda ka qaniinto iyo faruurta oo aad

Marka aad kafekerayso qofka aad guurkiisa u jeellan tahay, inta oo inta aadan jidin-la-wadaaggisa jamanin jiho in aad u wada jeeddaan iska hubi.Ha u gacangelin qalbigaaga qof aan garanayn qiimigaaga xataa haddi ad doobnimo iyo guunnimo la galluubnaanayso,qiimigaaga oo luma waa khasaare adduun oo aanu guurku cawilcalis kaaga noqonayne.

Yaanay guurkaaga caadifaddaadu ka talin oo muraaqada ku qaadday iro muxibbada ku sidata ee aad qofka u haysaa aanay boholo kuu hadoodilin, waayaha nololeed ee kakan in aad wax kaga talo gashana aanay ku seejin, ee guurkaaga garaadkaagu ha go'aamiyo, qofka aad guursanaysidna xumihiisa iyo samihiisaba miiska saar oo u caddaalad samee naftaada, ka dibna marka aad isu miisaanto isweydii, ma kuu qalmaa inaad qolqol la degto mise kuuma qalmo oo waad isku kadeedmaysaan? Haddii ay caadifaddaadu go'aamiso guurkaaga ogow marka ay waayo adduun kugu soo hamaansadaan in aanay waxba kuu taraynin caadifaddaasi.

Imisa jeer ayaad aragtay kuwo calaacalaya oo leh: "haddii aan..haddii aan sidan moodayay... waxa aan islahaa... waxa aan u malaynayay...isma aanan lahayn... ” iwm?!Marka aad guursanayso sababta ay muhimka u tahay qoyskaagu in ay kula ogadan waa in adiga xilligaas uu garaadkaaga gorfayneed badan oo bohol kugu ridayana aadan iska arkayn, se ehelkaagu nanay

299

cuadifudoonayn ce ugu yuran ay hu darensinayran warnas,siuban a anarayaan, haddi kale oo aad tichahdo chel waxta igama nganogowmarka ay runta gaadho ee qalbigayga ayaan raacayaana, Inti aad hadhow farta dhexda ka ganini lahayd goor aanay arrimiyo guurkaaga,halbecg sugn oo hadoodil la'na wx kqiys.

Bil-saddex gurigaagana way kaakaxaysaa gurikalenakuma gadhsiso'e, haddi hawaawi guur uu ku galo oo aad fooraha ku gaadhi maysid ee toddobabaxa dabadi guurkaagu galilyo ayu kugn guur ayay ku tidhahdaa ama guurso'e ha la birinbirgoon ee ka firso,guurkaaguna yaanu ku koobmin adduun iyo ayaamihii ee ha lahaado himilo fog, si sanna uga baaraandeg. Raaxo waa rafaad dabadiye haddii aad dhaldhalaalka adduun hawlyari isugu dhilbto oo aayahaaga qoysnimo aadan u meeldeyin, lammaane kulul, ubad wada halaagan,iyo nolol ildaran ayaad isgelisay, waana galabsigaa.Guurku ma aha wax dhayalsi iyo fudayd lagu galo ee bilkeed iyo ka-baaraandeg qoto dheer ayuu u baahan yahay,masalo guurna waa kabogasho.

Guurka dabadii dadka lababa si ayay isku qabtaa, laba xarbi isku qabta, laba xiise isku qabta, iyo laba xisaab isku qabta. Waxa go'aaminaya hadba adi iyo lammaankaa jaadka aad noqonaysaan sida aad marka hore uga firsataan guurkiinna ee aad noloshiinna aayeheeda danbe uga baraandegtaan.Way yasiran tahay in la guursadaa, balse waxa adag sii-wadidda guurkaas aan laga fiirsan! Wayna yasiran tahay in toddobaadka hore la isla wanaagsanaadaa, balse waxa adag sii-joogtaynta wanaaggaas an markii horeba loo meeldeyin!Inta aadan guurdoon noqon garo waxa uu galo iyo waxa uu gud guurku, garo miisaankiisa iyo maamuuskiisa, tashi iyo talo raadi o waaya'arag wax ka weydii, akhri oo baadh waxa uu

kaa mudan yaha waa haddii aad doonayso in aad guur hungooba ka badbaaddo'e.

Sida dabeecigaahh Idiley,raggu isma diraan oo nin in uu nin kale kula xantoahaan inta uu nin kuu yimaaddo xaskanga kulama 00uu maydho,gaar sheeggan yihiin.

Io praecan tahoy dhisato ce ay doonayso ruerkeeduas in ey lnenay mabnarusamayso in aanu u 90o dhafin Gabadhu godobla ugu wot W hadlo-waa in ay dumarka kale caydooda iyo ishooda iska ilaaliso.ana chel ha ahaadeen ama asxaabe in ay ninkeeda iyo gurigceda kala sheekapsato,ka dibna ay faaqidaad hoose u dhaadhacaan.

Tallaabada gabadha ugu habbooni waa in ay haweenka kale ee ehel ino asxaabba leh maqaamkooda ku ekayso oo aanay nolosheeda hoos ugu dhaadhicin.

Sidaas oo dhan ayuu talooyin iiga siinayay guurka heer uu xataa ii sheegayay caadifadda dhankiisa ii haysaa in aanay i beerqadin ee aan caqliga isaga laftiisa ku miisaamo, isaguna in uu miisaankaas i saaray uu ii muujiyay.

Haddana waa kaas cidla' ciirsilada igaga dhaqaaqay ee aan keligay dhaxamaha galluubnahay,gubtahanyadana aan la galgalanayo.

301

musa ou ka mid noqday guurkt mid ka rid ah arrimaha ugu aitg dheera ee marka la soo rogrogo wa hal arrin uun,waana fahankisicn murgay.

"Tlaahay ayaa wax ina siiya ee ku allaale iyo ki aad ku qanacdo i keen laga qaadanayaa aanay iyada aayeheeda u roonayn oo ay guunnimo u uu u doonayo in uu inantiisa meel uun ku hubsado.Gabadhaas dhallinta ah ee guurka diyaarka u ah haddi ninka ay jamatay uu u soo bandhigo in uu aabbeheedna u yimaaddo oo Shilimaadka yar ee uu hayo uu u dhiibo,iyadana uu guri ku habboon aroos-walow jiingadba ha ahaado'e-u sharraxo,jacaylkoodana ay halkaas kula daanshoodaan, raalli aay ku tahay oo gabdhuhu badiba way fahmeen noloshu in ay tahay fursad mar albaabka kuu soo gargaraacda,haddii aad isa seejisana sidaas kugu dhaafaysa.

Laakiin dhibaatadu waxa ay ka taagan tahay darafkii saddexaad ee guurka gabadhaas go'aaminayay.Ninkii la odhan jiray Robert Mugabe ayaa laga hayay:“ninkii ragga ugu farxadda badnaa waxa uu ahaa nebi Aadan oo soddoh Soddohdu waa ta haddii ay reerka kula dhisayso aad ragba tahanta dhaafayso,haddlii aanay raalli kaa ahaynna ma aanu lahayn!” aadan raaskaaga dhaafayn.

Soddohdu waa furaha gabadhaada iyo foodsaarada (oodrogada)hoygaaga,haddii aanay dhanka san u furinna dhanka silloon ayay u furaysaa.

Hooyadaasi waa ta teellada ku ah taabbagalka aqalka inanteeda, waa ta adkaynaysa ee tobannaanka arrin ee wiilka iyo gabadha midkoodna aanu doonayn dhuunta ka gelnaysa,waana ta qarash ahaanna qoyska ololinaysa,qiimi

ahaanna nolosha ku qaaliyaynaysa. Ma tagaannaa sababta ay sidaas u samaynayso? Keliya waa in ay hadalka dadka iska

sidiii aanay dumarrayawga kale ugu sheekaysteen:idiso/ Kelijya waa u lita ayay racisay,ama sidi uur lagu qarsasay ayay ama waxa sidaas aarar iska dirtay/"ar dabadeeda kaodhanayan ayay ka baqaysaa soddohdaas, ka dibna ugu Linth bo di waro bodan in bharshle inuisa ugi badan un bacn jeebkeeda yahay,icnabin, wasa ay soddohdu isu kadcedaysaa, ammaanahas noloofa tobka ugu weyn ec guurkdi adkecyay. Haddana marleyba waa hubaal Bgica aya kaadag, mana doonayso in sida sipaasadda goleyasha lagu falangeeyo.

Cuntadu ninka kaalin gaar ah ayay ugu jirtaa, heer la odhan karaba riaka guurka dabadii qalbigiisa waxa loo mara labadisa af,hadba gabadhu sida ay labadaas u daryeeshana kashiisa way u hanataa. Waa ta la pidhi karis-xun iyaduna ku wax la'.Meherku waa waajib uu Ilaahay ninka gabadha ugu waajibiyay si uu,ugu Xataa qaanuunnada nolosha marka aynnu isla nimaadno,meherku maadaama uu yahay deyn ninka lagu xalaashado xubinkeeda iyo jidhkeedaba. Mar kasta oo leeyahay mar kasta oo deynkaasi uu culays ku noqdo meherku uu gaaliyoobo aqalkaas ayuu barakada ka gabadha ayuu ka jarayaa! Haddii uu xaalku furriin la qaadaa. gaadho oo ay isku xumaadaan maadaama aanu deynkaas iska gudi karaynin silic iyo carcaraaf adduun ayuu gabadhaas u dhammaynayaa,heer ay ku khasbanaato in meherkeeda ay warqaddeeda ku gadato!Dhinaca kalena,haddii meherku uu saayid u fududaado maalin uun haddi isfahmiwaa uu meesha yimaaddo oo arrinku uu furriin gaadho gabadhaasi

ninkaas agtiisa way ku fududdahay,farta ayuuna wexeedaba ka saarayaa haddii aanu ahayn nin Ilaahay ka cabsanaya.

Qaabka ugu wanaagsani waa in meherku uu noqdo dhexdhexaad rali ay lammaankaasi iskaga yihiin, mid walibana uu ku xasillan yahay,wax valibana nolosha dhexdhexaadkaas ayay ku qurxoon yihiin.

Waxa jira isaguna qodob kale oo badanaa aan lagu baraarugin, se qayb libaax ka qaatay ka-maagistaguurka iyo kawaabashada ay labada darafba ka warwareegaan.Marka aad tagaanno qof aad u xun oo mar kasta odhaahdisa iyo falaadkiisuba ay silloon yihiin, agtaadafahan gaar ah ayuu ku yeelanayaa. Haddii aad maalin uun aragto isagii oo wax wanaagsan samaynaya ama hadal wanaagsan ku hawraartamaya fahankaagi isgeddi ayaa ku imanaya oo waxa aad is'odhanaysaa 'illeen qof xoogaa wanaag ah leh ayuu ahaa' ilaa aad marka danbe in uun qofkaas xoogaa wanaag ah u qaaddo.

Dhanka kale marka aynnu iska taagno, haddii qof aad mar walba wanaag ku ogaan jirtay oo hadal ahaan iyo hawl ahaanba aad wanaag iyo samaan uga baratay aad maalin uun isaga oo xumaato falaya ama odhanaya la kulanto, amaba uu arrimihii siyaabihii uu kuugu samayn jiray nusqaamiyo oo uu khadka ka saaro, fekerkaagii wuu isgeddiyayaa oo waxa aad u arkaysaa qofkii in uu wada doorsoomay, danna aanu kaa lahayn.

Xataa qoyska, carruurta qofka mar walba wanaagsani marka uu khaldamo amankaag ayay noqotaa, haddii se qofka xumaanta ku sheegganaa uu hal mar wanaag sameeyo ehelka wayla weynaataa.Waa qaanuunnada nolosha dadka kuwooda ugu muhimsan.

Xilliga haasaawaha ee uu qof waliba isa soo-bandhigga iyo muujinta dhankiisa san ku jiro, waxa uu sameeyaa wanaagyo badan oo hadal iyo hawlqabadba leh,waxana uu unkaa fahan laga qaadanayo in uu wanaag mug leh u dhashay. Ka dib marka uu qofkii guursado ee xidhiidhkiiyo wicitaankii taleefanku uu dhinmo, amaba uu qofkii illeen qofkii kale wakhti badan ayuu ag joogayaaye ay wax badan oo deelqaaf hadal iyo dalanbaabi hawleed ahiba ka dhacaan,marba marka ka danbaysa qofka kale waxa uu ka qaadanayaa feker ah in uu qofkan ku soo kadsoomay ee uu xumaanno badan leeyahay, ama uu isbeddelay markii uu isku hubsaday.

Waa sababta aynnu maanta u aragno in badan oo da'yar damac guur uu ku jiro ah, se ka werwer qaba inta uu qof isu wanaajiyo in uu hadhow dib ka xumaado, mana jiro qof sidaas samaynayaa ee maadaama ay labada qof marka hore kala durugsan yihiin oo khad taleefan ay xill

kooban ka wada hadlaan waxa kala gaadhayaaba wuu yaranayaa,bohodon wanangs agroun bun u brdinanayel Mata la hu yuenaglun war haynayaan,mid waliba ka kalegoldaloolooyinkiisiina wuu wapus ien gof ceth ta salim ahi ma lioe,nateas Mnu ama uu iminkaisbeddelay, inta kale ee gaashaanqaadyada iyo geshantiyaha ah marka uu xogtas gaadhsiyana cabsi aya gelaysa.

dardais lahayn u dhaqmo inta haasawaha si uu hadhow gurka wnaagyo aanu hote u samayn jirin uu sameeyo,amaba ugu yaraan uu si xejsto oo aanu qofkan kale isu odhan wuu ku soo xero gashanayay.

***

Hoh iyo caku, waxaas oo aannu afar sano nolol dhisaynay waan seegay,Deeqna aniga ayuu i seegay!

305

Deeq:

macaanaa,mark iiaan Maalin ayaan akhriyay buug runtii aad u kalibadhla maryay ayu goringil bugeu bu soo arotiay xog u balka uu gaboadh labad, mid saddexand, iyo mid afarad la tadeon walalaha yihin ah u guuriyo saddex xaas,isaguna uu xaskisi koovead ka farxiyo?!" marinayay ayayniyaddayda ku soo Halkaas markii uu qoraagu dhacday iga wallee in aanu ka waxaas qoray nin ahayn ee uu gabadh qortay!Iska-cadhaysiintaadaas aad camanka kuusayso ee aad jidhdidsan tahay godobka aan doonayo in aan gorfeeyaa waxa ay la mid tahay sheekadaas gabadhaasi ay inagula talinayso, ee runi run,beenina been Idileegmo-wacaney.Beri ayuu nin goor galabnimo ay cadceeddu fallaadheheediicavlla iyo caadkii galbashada kala dhex ololayso gabadhiisii daaradda gurigooda kula qaxweeyay,markasuu si kedis ah u weydiiyay:"haddi aan mashruuc bilaabo oo uu fashilmo maxaad igula talin lahayd?"Gabadhii:"in aadan niyadjabin ee aad mashruuc kale bilawdo."Ninkii: "haddii aan bilaabo ooaan ku

Gabadhii: "in aadan intaas ku ekayn ee aad mashaariic guuleystana?” kale oo badan bilawdo. ” Markaasuu ku soo ururiyay warkaa: "gacaliso; guurka badan ee nimankuna kaas ayuun buu ka dhigan yahay. Haddii uu guurkooda hore guuldarraysto kama qancaan ee way ku ceshadaan, haddii uu guuleystana kuma qancaan ee way badsadaan,oo haddii xalaasha loo diido xaaraanta iyo cashiiqadaha u qarsoon ayay badsadaan!"Cidda guurka badan dhibaatada ugu badan ku qabtaa waa nimanka!Ninka labada xaas guursanaya ayaa dhibaatada

ugu badan la dalanbaabiyaya. Waa laba xaas, laba biil, laba buuq, laba dagaal, laba xamasadood,iyo laba qof oo midba aad ku khasban tahay in ad

Ibigtisa gaar u ilaaliso,,rabashkaas oo dhan ayad

gondaha la gelaysaa.Guud ahaan,marka la eego labka iyo dheddigga dhalashadisa abdhahadieuder wil ugy raran habluhu wa shan Waa3d0ka ar joogaan tiradii ragga iyo dumarka.ah u kalabadatay Haddanawaxasii yareeyay ttirada ragga maadaama ay raggu xagga dhimashada dabeeciga ah uga badan yihiin dumarka oo raggu ay ka jihiin,halkaay awoowayaasheen 90% dhinteen, mana aha arin dhugpanta ko siadhan ec het kasta oo nolosha ahba sidas ayarion kala dhimasho badan yahay.Mar saddexadka, waxa dagallada ku dhinta ee malin walba aadwararka ka maqashaa waa rag, malaayiinta daafaha ga 00tiro ah Hwdh dagaladeeda ku dhimanaysaa waa rag.Waxa hoos usi dhacaya mooyane mid ay dagallo galaaftaan ay aad ugu yar tahay.lraga oo ay raggii iyo dumarkii saddexdas jecrba isdhaafeen,oo ahaydba ay ragga wiiqeen, ayay dhibaatooyin kale si baaciyeen.Inti paay dee ragga ka joogtay ee la heli karayay badigoodi laba golgol ayay ku kala xeraysan yihiin. In waxa laga buuxiyay xabsiyada oo dadka xidhani badanka waa rag, weliba innaga caalamkeenna Islaamka dumarka lama yaalaa xidho, deyrka labaad ee lagu xereeyayna waa xeryaha ciidanka oo askarta waxa ah ee rayidka ka faquuqani badanka waa rag. Raggii markii horeba ka tirada yaraa dumarka ee ay ku soo saddexlaabmayeen waxa u sii raacday intoodii noolaydna in badan oo ka mid ah in laba heli waayo oo xeryahaas lagu ammuuro.

Intaasi waa innaga caalamkeenna Islaamka, ee bulshooyinkii aan Islaamka ahayn laba dhibaato oo kale oo ka sii daran ayaa u raacay.Manta waxa ka

soo ifbaxay in badan oo khaniisyo ah oo ka dilan iyo ka dilayba aanay gabadh tebaynin,taasina waxa ay sii wiiqday tiradii ragga guurka diyaarka u ahaa.Ta labaadna waa in ay guurkii qiime rideen oo dhanna ay dacaayad ku asqaysiiyeen, dhanka kalena ay noloshii guurka ee qoysnimo